
Boqortooyadiisa waa la qabsaday.
Laakiin wuu soo ceshanaya.

# BOQORKA AMMAANTA




Sida looga soo xigtay
Qoraallada Quduuska Ah

Waxaa ka sheekeeynaya
P. D. Bramsen

Waxaa sharraxaysa
Arminda San Martín



Relief Opportunity & Care for Kids
ROCK INTERNATIONAL
Resources Of Crucial Knowledge

**Somali translation of King of Glory**
By P. D. Bramsen
Illustrated by Arminda San Martín
Copyright © 2011, 2022 ROCK International. All rights reserved.

ROCK International
• Relief, Opportunity & Care for Kids
• Resources Of Crucial Knowledge
P.O. Box 4766, Greenville, SC 29608, USA
resources@rockintl.org • www.rockintl.org • **www.king-of-glory.com**

**Boqorka Ammaanta**
Qoraaga P. D. Bramsen
Sharraxaadda Arminda San Martín
Xaqdhawrka © 2022 ROCK International. Xaqa oo dhan waa la dhawray.

**ISBN: 978-1-62041-024-0**

Kharashka ka soo baxayo buugga waxaa dib loogu maalgalinaya mashruucyada ROCK International. Haddaad rabto inaad turjumtid Boqorka Ammaanta ama daabacado kaleeto ay iska leedahay ROCK iyo warbaahinadeeda, kala xariir: resources@rockintl.org

Xigashooyinka buugga oo ku isticmaalayaan buuggan waa la qaaday Kitaabka Quduuska ah ee buuggan ku jira waxaa dhammaan laga soo xigtay © 2008 Society for International Ministries.

Ku saabsan qoraaga: Paul Dan Bramsen wuxuu ku dhashay Kalifoornia. Isaga iyo naagtiisa waxay saddexdooda carruur ku soo koriyeen Senegal, Galbeedka Afrika, quruumahan ku yaalin geeska Saxaaraha dadka ku nool waxay u badan yihiin Muslin. Bramsen wuxuu u qora daawadeyaal caalami ah oo ka faa'iidaysanayaan wuxuu soo saaro, wuxuu diyaariya waxyaalo sheegayaan qisooyinka nebiyada Kitaabka Quduuska ah ku dhigan oo taxane ah. Qoraalladiisa waxaa ka mid ah The way of righteousness (100 qisooyin oo taxane raadiyaha loo diyaariyay oo ilaa iyo boqol luqadooyin ah) iyo Ilaah keliya iyo Kitaab keliya (buug [ku dhigan 12 luqadooyin] oo loo diyaariyay in lagu caawiyo kuwa run-doonka ah si ay uga guulaystaan waxyaalaha iimaankooda lidka ku ah oo ay weliba qummaati u fahmaan qisada iyo farriinta Ilaah.) Qoraallada Bramsen waxay ka soo askunmaan kalgacayl uu u qabo Qoraallada Quduuska ah iyo jacayl uu u qabo Ilaah iyo dadka. Kala xariir: pb@rockintl.org


Ku saabsan sawiryahanka: Arminda San Martín oo ka timid Argentina waxay qortay: "Inta aan noloshayda xasuusan karo oo dhan, wax baan sawirayay. Fasax aan qaaday inaan u huriyo naftayda inaan ahaado naag oona korsado carruurtayda kaddib markaan go'aansaday inaan fasax qaato si aan noloshayda ugu adeego naag ahaan iyo hooyo korsanaysa ilmaheeda, waxaan dib u bilaabay tacliintayda si aan u xigto darajada farsamada Sawiraynta heerkeeda Sare. Aad baan u shaqeeyay, waxaan hindisay qaab wax loo farsameeyo dalkayga dhexdiisa iyo xataa New York, halkaasi aan ku noolaa sanado yar '90 maydii. Markaan ku soo noqday Argentina waxaan lahaa fursadda inaan kobciyo xirfadda takhasuska ah inaan sawiro ku sharraxo buugag badan, inta badan khuusaynayso dabci iyo ruuxnimo. Xirfaddayda oo Ilaah i siiyay oo dhan waxaan ku soo koobay inaan sawiro Boqorka Ammaanta. Ani ahaantayda, mashruucan wuxuu ii yahay riyo ii rumowday, fursadda keliya ee noloshayda soo martay. Mahad ku filanna uguma mahadin kari Ilaah fursaddan qaaliga ah uu i siiyay. Waxaa kaloo aan u mahad u celinayaa Paul Bramsen, ma ahan oo keliya inuu yahay qoraa ku takhasusay qoridda oo keliya ee laakiin qof qora daabacid ka fiican kuwa kale. Waxaan Ilaah ugu mahadcelinaya cilmigiisa iyo taladiisa joogtada ah ee ugu dambaysti lagu helay natiijadan." Arminda waxay hadda xirfaddeeda sawir abuurka kaga dhex shaqeeynaysa kuwa badan oo ka mid ah kaambuniyaasha daabacadda ku hawshan. Kala xariir: armisanmartin@yahoo.com.ar





# AMMAANTA BOQORKA IYO BARAKADA CARRUURTA CIMRI KASTA IYO QURUUN KASTA LEH







*"Ammaanaa? Yaa sheegay wax ku saabsan ammaan?*
*'Waxaan hubaa inuu ahayn mid ammaan ku sugan.*
*Laakiin wuu fiican yahay.*
*Waxaan kuu sheegaya inuu yahay Boqorka."*

— Laga soo xigtay *The Lion, the Witch, and the Wardrobe* ee C.S. Lewis









# DHACDO XULASHADA

**Saldhigga Dhacdooyinka** ........ **6**
**Bilowga** ........ **8**
1 • Boqorka iyo Boqortooyadiisa
2 • Boqorka iyo Nebiyadiisa
3 • Boqorka iyo Adduunkiisa
**Qaybta 1 – Boqorka wuxuu sii sheegayaa Qorshehiisa** ........ **15**
4 • Maalintii ugu horreeysay — Bilowgii 1
5 • Duni kaamil ah — Bilowgii 1-2
6 • Ninka ugu horreeyay — Bilowgii 1-2
7 • Beer kaamil ah — Bilowgii 2
8 • Sharciga Dambiga iyo Dhimashada — Bilowgii 2
9 • Naagta ugu horreeysay — Bilowgii 2
10 • Boqortooyada Iftiinka — Muujintii 4-5
11 • Boqortooyada Mugdiga — Ishacyaah 14; Yexesqeel 28
12 • Abeesada — Bilowgii 3
13 • Doorashada — Bilowgii 3
14 • Dambi iyo Ceeb — Bilowgii 3
15 • Dhimashada xagga ruuxa — Bilowgii 3
16 • Habaarka — Bilowgii 3
17 • Ballanka — Bilowgii 3
18 • Allabariga ugu horreeyay — Bilowgii 3
19 • Waa la cayriyay — Bilowgii 3
20 • Carruurta ugu horreeysay — Bilowgii 4
21 • Cibaadada Dambiileyaasha — Bilowgii 4
22 • Sharciga Qurbaanka Dambiga — Bilowgii 4
23 • Aqbalaadda iyo Diidmada — Bilowgii 4
24 • Dilka ugu horreeyay — Bilowgii 4-5
25 • Samir iyo Xukun — Bilowgii 6-7
26 • Bilow cusub — Bilowgii 8-9
27 • Munnaaraddii Kibirka — Bilowgii 11

28 • Ilaah oo u yeeraya Ibraahim Bilowgii 12
29 • Ballan Dhowraha Bilowgii 15
30 • Imtixaanka kama dambaysta ah Bilowgii 22
31 • Wiilka xukumnaa Bilowgii 22
32 • Sawiro iyo Waxyiyo Bilowgii 22
33 • Ilaah daacad ah oo quduus ah Baxniintii 19-20
34 • Tobanka Amar Baxniintii 20
35 • Mataallo kale Baxniintii 20, 24
36 • Waxyiyo kale Sabuurro & Nebiyo

**Qaybta 2 – Boqorka wuxuu fulinayaa Qorshehiisa ........................................ 74**

37 • Qisada Boqorka way socotaa Matayos 1
38 • Qisada Maryan Luukos 1
39 • Qisada Yuusuf Matayos 1
40 • Imaatinka Luukos 2
41 • Qisada Arijirrada Luukos 2
42 • Qisada Nimankii Xigmadda lahaa Matayos 2
43 • Cunugga kaamilka ah Luukos 2
44 • Wanka Ilaah Yooxanaa 1
45 • Wiilka kaamilka ah Matayos 3
46 • Ninka labaad Matayos 4
47 • Masiixa-Boqorka ah Luukos 4
48 • Awoodda ka sarreeysa ruuxaanta xunxun iyo Cudurka Luukos 4
49 • Awoodda ka sarreeysa Dabaysha iyo Duufaanada Markos 4
50 • Awooddda ka sarreeysa Dambiga Markos 2
51 • Awoodda ka sarreeysa Dhimashada Luukos 7; Yooxanaa 11
52 • Deeq Bixiyaha Yooxanaa 6
53 • Macallinka Matayos 5-7
54 • Waynaantiisa Matayos 17
55 • Ergadiisa Matayos 16, 20
56 • Boqorka wuxuu galaya Yeruusaalem Markos 11
57 • Boqorka waa la su'aalay Luukos 20
58 • Boqorka waa la xiray Markos 14
59 • Boqorka waa la cambaareeyay Yooxanaa 18

60 • Boqorka waa la caleemasaaray Matayos 27
61 • Boqorka waa la qodbay Luukos 23
62 • Boqorka-Badbaadiyaha ah Luukos 23
63 • Allabarigii ugu dambeeyay Matayos 27
64 • Boqorka waa la aasay Matayos 27
65 • Xabaasha eberka ahayd Matayos 28
66 • Farriinta Nebiyada Luukos 24
67 • Jir baddalmay Yooxana 20
68 • Baxitaanka Falimaha Rasuullada 1
69 • U Dabbaaldegga Guusha Sabuurrada 24; Muujintii 5
70 • Boqorka wuu soo noqonayaa Muujintii 19-22

**Xiritaanka** ........................................ **141**

• Farxad weligeed ah Qisada kaddib?

• Warka Xun

• Warka wanaagsan

• Jawaabta aad siisay Boqorka

**Astaan gaar ahaaneed dheeraad ah** ........................................ **153**

• Su'aalaha Naqtiinka Dhacdada

• Saldhigga Qoraallada muhiimka ah ee la soo xigtay

• Qummaati u dhex galid

# SALDHIGGA DHACDOOYINKA

*Alice way ka sii daalaysay la fadhigga ay walaasheed kula fadhiday gargarka, iyo hawl la'aanta, wax ay sameeyso ma lahayn; hal ama laba mar ayay fiirisay buugga walaasheed akhrinaysay, laakiin buuggu ma lahayn sawiro ama wadahadal taxan, "oo maxay tahay muhiimadda buug ku jirta," ayay ku fikirtay Alice, "haddii uusaan lahayn sawiro ama wadahadal taxan?"*

—Waxaa laga soo xigtay Erayada ugu horreeyaan ee qoraalka loo yaqaano, Alice's Adventures in Wonderland ee Lewis Caroll, 1865

Buugga aad akhrini doontid hadda waxaa ka buuxa sawiro iyo wadahadalo. Laakiin ka duwan qisada khayaaliga oo ku salaysan qoraalka la yiraahdo *Alice in Wonderland*,[1] sawirada iyo wadahadalada ku jiraan *Boqorka Ammaanta* waxay ka soo farcameen dhacdo runtii dhacday.[2]

Anigoo maankayga isku duwanayn ayaa waxaan go'aansaday inaan soo saaro buug ay ku sawiranyihiin sawiro ka sheekeeynaya qisada tan adduunka ugu wayn.

Sanado ka hor, markaan degna Galbeedka Afrika, waxaan qaatay maaddo ku saabsan sida loo sameeyo barnaamijka raadiyaha. Maalintii ugu horreeysay fasalka barafasoorka wuxuu waydiiyay, "Waa maxay faa'iidooyinka midkood uu raadiyaha kaga wanaagsan yahay telefishanka?" Jawaabtiisa way naga yaabisay.

"Wuxuu na tusayaa sawir aad u fiican." Waa run.


Xataa filimada kuwa ugu heerka sarreeyo ee si daran loo kharash galiyay way ku xarbiyaan inay isku dayaan siday ku keeni lahaayeen kartida maskaxda insaanka inay turjumto erayo fudud si ay uga dhigaan sawiro u cad maskaxda. Qoraallada nebiyada oo qadiimiga ahaa waxay sawirayaan boqolaal sawir oo erayo ah kuwaasi oo ay jirin filin qummaati u muujin karo, oo weliba ma jiro farsamayaqaan insaanka ah oo si buuxda u muujin karo.

Aniguna isla sidaas ayaan rumaysanahay. Ma jirto hawl wada qabad si sax ah u muujin karto qisadan ugu wanaagsan uguna wayn adduunka.

Saa ay tahayna, waxay ila ahayd maaweelo inaan isku dayo.







Arminda San Martín, farsamayaqaankeenna oo lagu mannaystay hibo gaar ah ee wanaag leh oo ka timid dalka Argentina, waxay sameeysay shaqo cajaa'ib ah oo khalad la'aan ah taasi oo ahayd turjumidda qisooyinka ku qoran Kitaabka ay ku baddashay sawiro. Iyadoo isticmaalaysa qalin iyo burush casriyaysan, Arminda way dhammaystirtay hawsheeda ugu horreeysay iyo kaamilidda sawirada taasi oo iyada ku qaadatay muddo afar iyo toban bilood ah keliya. Waxaan rajaynayaa inaad ka heli doontid shaqadeeda sida aniga aan uga helay.

Hadda bal ka fikir tan.

Haddaan akhrino buug qiso leh, xaggee baan ka bilaabaynaa? Dhexda? Maya, waxaan ka bilaabaynaa bilowga. Markaas oo keliya ayaan qisada fahmi karnaa. Isla sidaasna, haddaan rabno inaan fahano Qoraallada, waa inaan ka bilowna aasaaskeeda oo aan raacno qisada ilaa iyo dhammaadkeeda taxan ee qancinayo.

Qoraallada nebiyada waxaa ku jira boqolaal qiso oo gaaban oo tixraacayaan inay qaabeeyaan hal qiso. Markaan qorayay Boqorka Ammaanta, waxaan iisu dareemay sida ubaxle loo xilsaaray inuu galo beer aad u ballaaran oo ubax noocya fara badan leh, inuu galo oo ka soo xusho wax darsan dhan oo ku raseeyo xirmo ubax ah oo tusaysa ammaanta beerta oo dhan. Buuggan waxaan u doortay dhawr darsan oo ah qisooyinka kuwa ugu muhiimsan ee ku jiraan Qoraallada oo waxaan u kala qaybiyay dhacdooyinkan in lagu jilo 70 dhacdooyin anigoo isku dayaya inaan ku caddeeyo ammaanta Boqorka daa'imka ah oo isku muujiyay taariikhda insaanka.

Ducadayda waxay tahay oo aan Ilaah ka baryaya inay tusidda iyo sheegidda qisadan runta ah ku dhaliyaan daawadeyaal cimri kasta leh inay ku farxaan qoraallada nebiyada, inay jeclaadaan Kan ay iyaga ka hadlayaan, oo ay ku darsamaan boqortooyada faraxsan ee aan dhammaadka lahayn.

Si aad sawir cad u heshid,

Paul D. Bramsen

# Bilowga

Qalbigaygu wuxuu la buuxdhaafaa hadal wanaagsan,
Oo waxaan boqorka u sheegayaa waxyaalihii
aan sameeyey,
Carrabkaygu waa sida karraani
dhaqsiyo badan qalinkiisa.
Runta iyo camalqabowga iyo xaqnimada daraaddood,
Waxaad faraskaaga ku fuushaa haybad
adigoo barwaaqaysan,
Oo gacantaada midigna waxay ku bari

— Laga soo xigtay Qoraallada Nebiyada (Sabuurkii 45:1,4)

## Dhacdada 1

# Boqorka iyo Boqortooyadiisa

Waaggii hore, intaanu dunida bilaabanin ka hor, waxaa jiray boqor, Boqorka ammaanta.

Boqorkan wuxuu ahaa mid aad iyo aad uga sarreeya iyo mid aad iyo aad ugu awood badan qof kasta ama wax kasta adiga ama aniga umalaysan karno. Waqtiga waa waxaan dhammaad lahayn Isagana wuxuu ahaa Boqorka keliya, iyo Boqortooyadiisa boqortooyo keliya, boqortooyo oo xigmad kaamil ah, jecayl, farxad iyo nabad. Boqortooyada ma u baahnayn qorrax ama xiddigo, waayo Boqorka naftiisa ayaa ahaa iftiinkeeda.

In kastoo ay cabbirka boqortooyadiisa xad lahayn, waxaa xadeeyay xagga waddaniyiinteeda. Dadka qaarkood waxay ku hadlaan inuu Boqorka waddaniyiin lahayn inaba.

Ama miyuu lahaa?

Mid ka mid ah waxyaalaha la yaabka leh ee qarsoon oo ku saabsan boqorkan waxay tahay in xataa markuu keligiis jiray, inaba keligiis ahanin weligiis.

Weli, wuxuu rabay inuu la qaybsado noloshiisa noole kale oo caqli leh.

Oo Boqorkan fiican iyo xigmadda leh ayaa sameeyay gobol ay ka jiraan milyan ruux oo nuuraya oo aad u caqli badan oo loogu magaca bixiyay malaa'igo. Wuxuu dhammaan ku wada garanayay magacyadooda oo wuxuu rabay inay iyaguna Isaga gartaan. La noolaanshaha Boqorka waxay ahayd nolol xiiso leh aanan dhammaanaynin.

Laakiin Boqorka wuxuu rabay wax malaa'igo ka badan. Oo sidaas darteed wuxuu abuuray boqortooyo waqti hawada sare, cirka, iyo wax kasta—maskaxda iyo adduunka ka shaqaysiin kara la socda meere [xiddigo waawayn] dhaldhalaalayaan kaasi oo hoy u ahaan doono noole cajiib ah oo loogu yeeri doono bini-aadanka.

Ka duwan malaa'igaha, reerka bini-aadanka waxay ku bilaabadeen laba noole oo keliya, nin iyo naag. Isla sidii uu malaa'igaha ula qaybsaday noloshiisa, Boqorka wuxuu rabay inuu iyaga ula qaybsado.

Markaasna wax baa dhacay, wax xun. Caasinimo ayaa ka dhex dhalatay boqortooyada, ugu horreeyntii jannada dhexdeeda, kaddibna dunida korkeeda.

Malaa'ig caasi ah ayaa boqortooyada dunida qabsatay iyadoo qabsatay bini-aadankeeda. Laakiin Boqorka ma uusan la yaabin.

Boqorka qalbigiisa waxaa ku jiray qorshe badbaado yaab leh, oo qarsoodi ah, oo wax aad heer sare u ah, oo muhiim noqday inuu qaadan doono kumaankun iyo kumaankun sanadooyin inuu fuliyo.

Maxaa kale aad ka filan lahayd Boqorka daa'imka ah?

Wuxuu ka sarreeyaa waqtiga.





## Dhacdada 2

# Boqorka iyo Nebiyadiisa

Inaad garatid Boqorka iyo qorshehiisa, waa inaad garatid Kitaabkiisa.

15 qarni in ka badan Boqorka wuxuu doortay qiyaastii 40 qof inay qoraan qisadiisa iyo farriintiisa. Iyaga waxaa loogu wici jiray nebiyo. Boqorka wuxuu siiyay iyaga erayadiisa oo ay ku qoreen haragyo inay la minguuriyaan, la wareejiyaan oo u xafidaan farcanka mustaqbalka ah. In kastoo nebiyada inta ugu badan ay is garanaynin iyaga dhexdooda, qoraalladooda waxay sheegayaan hal qiso iyo hal farriin oo xiriirsan.

Qoraallada nebiyada waxaa la yiraahda Qoraallada Quduuska ah. Qoraallada la'aantooda waan iska qiyaasi lahayn oo keliya meesha aan ka imaanay, iyo sababta aan inta u joogno, iyo meesha aan u socono. Inaan garano jawaabta saxda ah waxaan u baahan nahay Kitaabka Boqorka. Qiyaastii 3,500 oo sano ka hor, Boqorka wuxuu u waxyooday nebi oo magaciisa lay yiraahdo Muuse inuu qoro,

> Dadku waa inaanu kibis oo keliya ku noolaan, laakiin waa inuu eray walba oo afka ILAAH ka soo baxa ku noolaado.
> (Matayos 4;4; Sharciga Kunoqoshadiisa 8:3)

Maanta Boqorka erayadiisa waxaa laysugu soo aruuriyay hal Kitaab, *Kitaabka Quduuska ah.* Quduus macnahiisa waa *daahir* ama wax kale oo *ka gooni ah* waxyaalaha oo dhan. Kitaabka Quduuska waxaa waaye Kitaab ama Kutuubyo laysku keenkeenay. Kitaabka Quduuska ah waa buugga aad looga iibsado dunida oo ugu turjumadda badan. Kumanaan waraaq oo harag ah ay tusaan inuu yahay qoraalka oo ka dhawrnaa qoraalka qadiimiga ah oo dhan.[3]

Kitaabka wuxuu ka kooban yahay laba qayb oo waawayn.

Qaybta kowaad waa Axdigii Hore (Towraad, Sabuurro, iwm.)
Meesha uu Boqorka qorshehiisa kuu sheegayo.

Qaybta labaad waa Axdiga Cusub (Injiil, Falimaha Rasuullada, iwm.)
Meesha u Boqorka qorshehiisa ku fulinaayo.

Axdi macnahiisa waa *ballan, qandaraas* ama *heshiis*. Axdigii Hore wuxuu noo sheegayaa qorshehii Ilaah sameeyay. Axdiga Cusub wuxuu qorayaa qorshehiisa dhammaystiran. Ilaah keliya ayaa taariikh qori karaa intaanay dhicin ka hor.

Kala duwanaanshada Axdigii Hore iyo Axdiga Cusub dhexdooda waa kala duwanaanshada inuu leeyahay boqor wayn oo kuu soo diraya warqado iyo sawiro—iyo weliba boqorkii ayaa toos ku soo booqanayaa shaqsi ahaan.

Qoraallada waxay ugu horreeyntii soo gaareen Bariga Dhexe, Afrika, Aasiya, iyo Yurub, kaddibna Ameerika iyo meelaha ka sarreeya. Nebiyada waxay ka imaadeen xagga Bariga Dhexe, laakiin qisadu iyo farriinta ay qoreen waa quruun kasta darteed. Reer kasta dartiis. Qof kasta dartiis.

Adiga dartaada.





# DHACDADA 3

## BOQORKA IYO ADDUUNKIISA

Haddii waqtiga iyo samada sare aan gadaal u celin karno, gadaal,
gadaal,
gadaal,
meesha ugu dambeeyso,
intay dadka, meereyaasha [xiddigaha waawayn], ama xiddigaha jirin ka hor, waxaan markhaati u ahaan lahayn awoodda iyo ammaanta ka dambeyeen erayada ugu horeeyeen ee Qorniinka:

> Bilowgii Ilaah samada iyo dhulkuu abuuray. (Bilowgii 1:1)

Maanta, dad badan waxay umalaynayaan inay dunida iyo mucjisooyinkeeda ka soo ifbaxeen Abuure xigmad leh la'aantiisa. Laakiin aragtidooda ma ahan mid si buuxdaan sharaxaad uga bixinaysa hab dhismeydka iyo nidaamka la sadaalin karo ee adduunka.

Boqorka wuxuu Kitaabkiisa ku leeyahay,

> Samooyinku waxay caddeeyaan ammaanta Ilaah, Cirkuna wuxuu muujiyaa sancadii gacantiisa. (Sabuurkii 19:1)

Ka hadalka gacmaha, kuwaada fiiri. Dhaq-dhaqaaji suulashaada. Isku day inaad qabsato buug, xaaqin, ama buris iyaga la'aantooda. Ogow ciddiyaha gacmaha, xibnaha, iyo maqaarka. Waxaad ku fikirtaa waxyaalo qaarkood oo muhiim ah aad ku qabsatid gacmahaaga. Yaa kale oo aan ka ahayn farsamayaqaan heer sare ah oo sameeyn kara qalabka noocaas ah?

Xigmad iyo awood noocee ayaa loo baahanyahay in la sameeyo hal bilyan oo ururka xiddigaha? Ama la abuuro unug nool ee qabaan milyan xibnood oo in la fahmo ay adagtahay? Ama inaad isku daabac-tosho unuggii duntiisa oo aad u yar oo duuban oo socdaan calaamado kooban oo lagu gudbiyo sirta, kaasoo *adiga* ku sameeynayo?

Qiyaastii saddex kun oo sano ka hor, nebi ahaa boqor oo lay yiraahdo Daa'uud wuxuu qoray,

> Oo adigaa igu daboolay maxalkii hooyaday. Waan kugu mahadnaqi doonaa, waayo waxaa la ii sameeyey si cabsi iyo yaab badan.
> (Sabuurkii 139:13-14)

Ma doonaysaa inaad la kulantid Midka ku qaabeeyay? Ma doonaysaa inaad la noolaato weligaa Abuuraha iyo Sayidka ururka xiddigaha? Waad kartaa. Wuu is muujiyay. Wuxuu doonayaa inaad isaga baratid. Xataa wuxuu raba reerkaaga iyo bulshadaada inay isaga bartaan. Wuxuu kugu casuumayaa inaad fahanto qorshehiisa, inaad lahaato khibradda jecaylkiisa, inaad aragto haybaddiisa, inaad isku dhiibto Xeerkiisa, iyo inaad u noolaato ammaantiisa. Laakiin ma kugu qasbi doono inaad ahaatid mid raacsan Isaga.

Si kastaba ha ahaatee, Isaga ma aha boqor oo keliya. Isagu waa *Boqorka. Boqorka ammaanta.*

Tani waa qisadiisa.



# Qaybta 1

## Boqorka wuxuu sii sheegayaa Qorshehiisa

— AXDIGII HORE —

## Dhacdada 4

# Maalintii ugu horreeysay

Kitaabka Ilaah wuxuu ku bilaabanaya hab boqorka istaahilo. Wuxuu noo sheegayaa wixi u rabo inuu anaga noo sheego ee wax kale ma ahan.

> Bilowgii Ilaah samada iyo dhulkuu abuuray. (Bilowgii 1:1)

Wax walba aan arki karno oo taaban karno wuxuu leeyahay bilow, laakiin midka Abuuraha iyo Mulkilaha dunida ma lahaa bilow iyo dhammaadba toona. Isaga wuxuu yahay Ruux mid aanan la arkaynin ee daa'im oo joogi kara meel kasta isku waqti. Wuu arkaa wuuna garanayaa wax kasta.

Ma garanaysaa magaciisa? Ilaah wuxuu leeyahay magacyo badan, laakiin magaciis ugu caansan waa RABBIGA. Luuqadda asalkiisa hore kitaabka Ilaah lagu qoray, magaciisa waa *Yahweh*, oo laga wado *Kaan ahay*, ama si fudud *WAAN AHAY*.

Qisada abuuritaanka waxay la socotaa sharaxaadda uu Boqorka ka bixiyay sifada dunida asliga ahayd.

> Dhulkuna qaab ma lahayn, wuuna madhnaa; gudcurna moolkuu dul joogay; oo Ruuxa Ilaahna wuxuu ka dul dhaqdhaqaaqayay biyaha. (Bilowgii 1:2)

Waxay ahayd xilliga adduunka loo diyaarini lahaa dadka.

> Oo Ilaah wuxuu yidhi, "Iftiin ha ahaado," iftiin baana ahaaday.
>
> Ilaahna wuxuu arkay iftiinkii inuu wanaagsan yahay: Ilaahna iftiinkii ayuu ka soocay gudcurkii. Ilaahna iftiinkii wuxuu u bixiyey Maalin, gudcurkiina wuxuu u bixiyey Habeen. Waxaana jiray fiid iyo subax —isla maalin ah. (Bilowgii 1:4-5)

Muxuu sameeyay Ilaah maalinta ugu horreeysay abuuritaanka? Wuxuu amray iftiin inuu dhex maro mugdiga. Kaddib qorraxda waxay ku iftiimi doontaa dhulka, laakiin ma ahayn Maalinta ugu horreeysay. Ilaah wuxuu rabaa anaga inaan garano inuu yahay Iftiinka Asalkiisa.


> In Ilaah nuur yahay; oo Isaga aan gudcur ku jirin innaba. (1 Yooxanaa 1:5)

Ilaah waa daahir, sida iftiin. Isaga ma la wasakhayn karo. Xataa markuu iftiinku ku iftiimo waxyaalaha aadka u wasakhda ah, wuu daahirsan yahay. Ilaah waa kaamil. Ilaah waa quduus.

Miyaad aqoonsatay kan Ilaah ku wehelinayay goobta abuuritaanka? Ruuxiisa Quduuska ah meesha ayuu joogay, wuxuu ka dul dhaqdhaqaqayay biyaha. Eraygiisa xataa wuu jiray, wuuna hadlayay.

> Bilowgii waxaa jiray Ereyga, Ereyguna wuxuu la jiray Ilaah, Ereyguna wuxuu ahaa Ilaah. Isagu Ilaah buu la jiray bilowgii. Wax walba waxaa laga sameeyey xaggiisa.... (Yooxanaa 1:1-3)

Ruuxa Quduuska Ilaah iyo Erayga waxay weligood la jireen Ilaaha keliya ee runta ah. Taasi ayaa ah sababta looga hadli karo Boqorka: *Xataa markuu keligiis jiray, inaba keligiis ahanin weligiis.*





# DHACDADA 5

## DUNI KAAMIL AH

Lix maalmood oo nidaam leh, Boqorka wuxuu abuuray duni quruxsan oo cajiib ah. Ilaah wuu hadlay keliya, oo naqshad yaab leh oo kaamil ah ayaa soo muuqatay.

Maalinta kowaad Ilaah wuxuu yiri: "Iftiin ha ahaado!" oo iftiin baana ahaaday.

Maalinta labaad Ilaah wuxuu abuuray jawiga dhulka la socda cirka buluugga ah aan aragno iyo hawada qarsoon oo aan ku neefsano. Ilaah wuxuu qaabeeyay cirka iyo nolol isku-qasan oo kaamil ah ee neef oo badbaadinaysa naf, sida oksijiin iyo naytiroojin.

Maalinta saddexaad Ilaah wuxuu yiri, "Ha muuqdo dhul engegan!" Oo taasna way dhacday. Kaddib Ilaah wuxuu yiri, "Dhulku ha soo bixiyo doog!" Si durba ah waxaa soo baxay caws, geedo, ubaxyo, iyo miro waxay bilaabeen inay soo baxaan oo mid kasta wuxuu soo bixiyay mirehiisa.

Maalinta afaraad Ilaah wuxuu amray qorraxda iyo dayaxa inay iftiimaan iyo qeexaan sanadooyin dunida, bilooyinka, iyo maalmaha. Wuxuuna sameeyay xiddigaha.

Maalinta shanaad Ilaah wuxuu yiri, "Biyuhu aad ha u soo bixiyeen uun dhaqdhaqaaqa oo badan, oo naf nool leh, haadduna ha duusho dhulka dushiisa xagga meeshii bannaanayd oo samada dhex ahayd." Oo taasna way dhacday.

Maalinta lixaad Ilaah wuxuu yiri, "Dhulku ha soo bixiyo uun nool oo caynkiisa dhala, kuwaasoo ah xoolo, iyo waxa gurguurta, iyo dugaagga dhulka oo caynkooda dhala!" Ilaah wuxuu sameeyay noole kasta oo inuu dhalo ilmo dhashiisa ah oo uu xannaaneeyo ilmihiisa yar.

> Ilaahna wuxuu arkay in taasu wanaagsan tahay. (Bilowgii 1:25)

Waxaa xukuntay nabadda. Bilowgii xayawaannada oo dhan waxay lahaayeen naxariis. Iyagu ma is dilin mana is cunin. Waxay ka helayeen cuntadooda geedaha.


Waxaa xukumay nidaamka. Si nadaamsan oo lagu kalsoonaan karo, qorraxda waxay ka fogaan lahayd fogaanshada saxda ah dhulka. Bisha waxay ka baddalmi lahayd bil cusub oo waxay u baddalmi lahayd bil buuxda. Dhulka wuxuu dib-u-isticmaali lahaa hawadiisa, biyahiisa, iyo qashinkiisa. Haddii si fiican loogu taliyo, boqortooyada dhulka marnaba ma wayn lahayn waxyaalaha wanaagsan. Waxay ahaan lahayd guri ku habboon bini-aadanka.

Maalin walba abuuritaanka wuxuu na siinayaa tilmaam yar sidaa Ilaah uu yahay.[4]

> Maalinta 1. ayaa na tusaysaa Ilaah inuu yahay *quduus*. Isagu wuxuu yahay kaamil iyo daahir, sida iftiin.
> Maalinta 2. Ilaah wuxuu *awoodi karaa wax kasta*. Isagu wuxuu sameeyay jawiga, wuuna sii wadaa.
> Maalinta 3. Ilaah wuu wanaagsan yahay. Wuxuu noo sameeyay kumaankun geedo iyo cuntooyin.
> Maalinta 4. Ilaah waa *daacad*. Qorraxda iyo bisha waxay ku sii jiraan wareeggooda.
> Maalinta 5. Ilaah waa *nolol*. Wuxuu dhigay kalluun badda dhexdeeda iyo shimbiraha cirka.
> Maalinta 6. Ilaah waa *jecayl*. Ilaah markuu abuuray xayawaannada, waxay ahayd xilli uu qaabeeyn lahaa noolaha ee uu ku shubi lahaa jecaylkiisa.

Waxay ahayd xilli uu abuuro noole khaas ah oo muujin kara quduusnimadiisa, awooddiisa, wanaaggiisa, daacadnimadiisa, noloshiisa, iyo jecaylkiisa.





## Dhacdada 6
## Ninka ugu horreeyay

Maalintii lixaad ee abuuritaanka Boqorka wuxuu la sheekaystay Naftiisa (Ilaah, Ruuxiisa oo Quduuska ah, iyo Eraygiisa) oo dhahayaa,

> "Aan nin inoo eg ka samayno araggeenna,[5] oo iyagu ha xukumeen… dhulka oo dhan, iyo waxa dhulka gurguurta oo dhan …."
>
> Oo Ilaah nin buu ka abuuray araggiisa, Ilaah araggiisa ayuu ka abuuray isaga; lab iyo dhaddig ayuu abuuray. (Bilowgii 1:26-27)

Markuu Qorniinku dhahayo inuu Ilaah ka abuuray dadka araggiisa, taas macnaheeda ma aha in laga wado inuu Ilaah yahay sida anaga oo kale. Macnaha waxaa waaye waa inaan muujino dabcigiisa iyo shaqsi ahaantiisa. Sida lacagta birta ah ee Roomanka waxaa lagu shaabbadeeyay suldaanka araggiisa, sidaa darteed aragga Ilaah waxaa lagu shaabbadeeyay bini-aadanka. Ninka ugu horreeya iyo naagta ugu horreeysay waxaa loo abuuray karti si ay ugu fikiraan, jeclaan, oona u hadlaan sida Abuurehooda oo kale. Sidaas darteed waxay kareen inay ku raaxeestaan xariirka dhow ay la leeyihiin Isaga. Dadka loo ma sameeynin inay u ahaadaan Ilaah addoomadiisa. Laakiin waxaa loo sameeyay inay ahaadaan Ilaah saaxiibadiisa.

Inuu ka abuuray bini-aadanka araggiisa, Ilaah wuxuu siiyay iyaga awood xukun. Dadka waa inay u ilaaliyaan inayna u xukumaan dhulka Ilaah, inayna soo helaan sirtiisa iyo isticmaalaan khayraadkiisa si xigmad leh. Awooddan oo kale waxay ka meel dhigaysaa bini-aadanka boqortooyinka xayawaanka.

Xayawaanka Ilaah wuxuu siiyay laba qayb: jir iyo naf.
Bini-aadanka Ilaah wuxuu siiyay saddex qayb: jir, naf iyo ruux.

> Rabbiga Ilaah ahuna nin buu ka sameeyey ciidda dhulka,[6] dulalka sankiisana wuxuu kaga afuufay neeftii nolosha; ninkiina wuxuu noqday naf nool. (Bilowgii 2:7)

Jirka wuxuu ahaa guriga sidaan oo qur ah, ama teendho, Ilaah wuxuu ku afuufay qofka naftiisa iyo ruuxiisa.

Nafta waxay ahayd qofka caqligiisa, dareemkiisa, iyo go'aankiisa shaqsi ahaantiisa, oo u awooday inuu ku fikiro, dareemo, iyo go'aammo.

Ruuxa wuxuu isku xiray bini-aadanka iyo Ilaah. Intii lagu jiray jirka wuxuu qalabeeyay bini-aadanka inuu isku xiro dunida muuqata, Ruuxa wuxuu qalabeeyay bini-aadanka inuu isku xiro Ilaah aan la arkaynin. RABBIGA wuxuu rabay bini-aadanka inay isaga gartaan.

Dadka waxay ahaan lahaayeen Ilaah khasnaddiisa khaaska ah. Tan iyo waqtigu Ilaah sameeyay iyaga, ma ahayn Abuurehooda keliya, laakiin sidoo kalena Mulkiilehooda.

RABBIGA Ilaah wuxuu u bixiyay magaca ninka ugu horreeya Aadan, macnaha *Wuxuu Ka Yimid Dhulka*, ama si fudud *Nin*. Kaddib Ilaah wuxuu qaabeeyn lahaa naagta ugu horreeysa, laakiin taas kahor waxaa jiray wax diyaarin loo sameeyo. Aadan wuxuu u baahnaa guri iyo shaqo.





# Dhacdada 7

## Beer kaamil ah

Kaddib markuu jirka bini-aadanka ugu horreeyay ka sameeyay dhoobo[6] oo ku afuufay neefta nolosha, Ilaah beer buu ku abuuray Ceeden dhexdeeda, meel ku taala Bariga Dhexe.

Webi saafi ah ayaa dhex qulqulay beerta.

> RABBIGA Ilaah ahuna wuxuu dhulka ka soo bixiyey geed kasta oo indhaha u roon, oo cunto ku wanaagsan; beerta dhexdeedana wuxuu ka soo bixiyey geedkii nolosha iyo geedkii aqoonta wanaagga iyo xumaanta.
>
> RABBIGA Ilaah ahuna ninkii wuu kaxeeyey oo wuxuu geeyey beer Ceeden inuu falo oo dhawro. (Bilowgii 2:9,15)

RABBIGA Ilaah ma uusan waydiinin Aadan hadduu rabay inuu ku noolaado Ceeden. Ilaah wuxuu ahaa bini-aadanka Abuurehiisa-Mulkiilehiisa. Wuxuu ogaa wixi bini-aadanka u fiican.

Aadan beerta gurigiisa waxaa ka buuxday farxad ma dhammaata ah—waxyaalo la arko, maqlo, uriyo, taabto, iyo dhadhamiyo. Ilal biriqbiriq ah. Shimbiro oo heesayaan. Ubaxyo udgoon ah. Noole duf leh. Miro dheecaan leh. Khudro calalis. Miro macaan. Kaymo qariib ah. Dhagaxyo midabo badan. Cayayaan soo jiidasho leh. Iyo hal milyan oo milyan kale oo cajiib ah ayaa sugayaa in la helo.

Laakiin bini-aadanka waxaa loo sameeyay sahmin iyo cuno wax ka badan. Ilaah wuxuu ka dhigay Aadan jinsiga bini-aadanka madaxooda. Ilaah wuxuu rabay Aadan iyo reerkiisa inay Isaga la xukumaan weligiis. Laakiin kuwaasi keliya oo lagu aammini karo hawl yar waxaa la siin kara hawl wayn.

Oo Ilaah wuxuu siiyay Aadan shaqadiisa ugu horreeysay: Inuu ilaaliyo beerta.

Beertan waxay ahayd meel kaamil ah. Ma lahayn qodxo ama cagaaro xun ama cayayaan xun. Jawiga wuu fiicnaa oo ciidda waxay ahayd hodan, weli roob ma uusan u da'in weligood. Baddalkaas, ceeryamo ayaa dhulka ka soo baxday oo dhulka waraabisay.

Ilaah haddana shaqo kale ayuu u dhiibay Aadan: Inuu magacyo u bixiyo xayawaannada.

RABBIGA wuxuu xayawaannada u keenay isaga, si uu u arko magaca uu u bixin lahaa. Qiyaas dhacdada. Lammaane xayawaan ah oo guudkooda babbanaaya oo lugo xoog leh ayay ku afarqaadlayeen [ordayeen]. Aadan wuxuu daraasaynayaa iyaga, wuxuuna salaaxayaa dhabarkooda, oo wuxuu u bixiyay magacooda *fardo*. Markuu yeerista Abuuraha, waxaa ku soo baxday shimbir wayn oo af qaroofan leh oo baalo ballaaran ayaa u soo dagtay. "Gorgor!" ayuu yiri Aadan. Kaddib bahal oo duf leh oo midab jaale casaan-xigeen ah leh oo riigmo madow leh ayaa soo ag martay. Maxaad umalaynaysaa Aadan wuxuu u bixiyay?

> Oo ninkii baa magacyo u bixiyey xoolaha oo dhan, iyo haadda hawada, iyo dugaag kasta oo duurka jooga. (Bilowgii 2:20)

Ceeden waxay ahayd meesha kaamilka ah oo ninku ku barani karo Abuurehiisa.

Waxay ahayd waqtigii Aadan la siin doono imtixaan.





## DHACDADA 8

# SHARCIGA DAMBIGA IYO DHIMASHADA

Ka bilaabato waqtiga bilowgiisa, Ilaah iyo nin aadanaha waxay ahaayeen saaxiibo, laakiin saaxiibtinimadaas waxay u baahnayd in la imtaxaamo. Boqorka adduunka ma ku buuxin lahayn Boqortooyadiisa waddaniyiin oo lagu qasbay in ay isu dhiibaan Isagu.

Ilaah wuxuu jeclaa Aadan, wuxuuna u haayay qorshooyin cajiib wayn leh Isaga iyo reerkiisa mustaqbalka. Maxaa yeelay Ilaah wuxuu rabay dad inayna ahaan dabadhilifyo, wuxuu siiyay Aadan hal amar uu addeeco.

> RABBIGA Ilaah ahuna wuxuu ninkii ku amray isagoo leh, Geed kasta oo beerta ku yaal wax baad ka cuni kartaa: laakiin geedka aqoonta wanaagga iyo xumaanta waa inaanad waxba ka cunin: waayo, maalintii aad wax ka cuntid hubaal waad dhiman doontaa. (Bilowgii 2:16-17)

Kani ma ahayn amar adag. Aadan wuxuu cuni karay mir kasta oo beerta ku taala *hal mooyaane*. Inuu addeeco sharcigan fudud, Aadan wuxuu tusi karay inuu aamminay Abuurehiisa in isagu ogaado waxa isaga u fiican.

Waa maxay waxa uu Ilaah sheegay inay ku dhici doonaan Aadan hadduu amarkan jabiyo?

Ilaah miyuu Aadan kula taliyay in hadduu cuno mirta laga mamnuucay inuu bilaabo inuu raaco sunooyin, isticmaalo tusbaxyo, soomo, sadaqad bixiyo, tago kaniisad, macbud, ama masaajid, iyo isku dayo inuu sameeyo camal fiican oo ku filan inuu dhellitiro camalkiisa xun? Ilaah ma sidaas uu yiri?

Maya, ma aha wax u Ilaah yiri.

Ilaah wuxuu u sheegay Aadan, "Markaad wax ka cuntid hubaal waad *dhiman* doontaa."

Ku caasinta amarka Ilaah waxaa loogu yeera *dambi*.
Ciqaabta jabinta sharciga Ilaah waxay ahaanaysa *dhimasho*.
Kitaabkiisa dhexdiisa, Boqorka wuxuu tan ugu yeeraya "qaynuunka dambiga iyo dhimashada" (Rooma 8:2).

Qaynuunka Boqorka wuxuu sheegaya in dambi lagu ciqaabo dhimasho.

Dhimashada macnaheeda waa *kala-fogaasho*. Hadduu Aadan ku caasiyay mid ka mid ah sharciyada Ilaah wuxuu ahaanaya sida laan jabtay oo engegaysa oo dhimanaysa isla marka ay ka go'do saldhigga nolosheeda.

Hadduu Aadan go`aansaday inuu sameeyo wixi uu rabay baddalkii uu fulin lahaa wuxuu Boqorka adduunka u sheegay inuu sameeyo, taasi waxay ahaan lahayd caasinimada; waxayna ahaan lahayd *dambi*.

Dambigu wuxuu jari lahaa saaxiibtinimada bini-aadanka iyo Ilaah u dhexeysay. Dambigu wuxuu keeni lahaa jirka bini-aadanka inuu koro oono duqoobo oono dhinto.

Dambigu wuxuu ruuxa, nafta iyo jirka aadanaha ka fogayn lahaa Ilaah weligood ah. Dambigu waa dilaa.





# Dhacdada 9

## Naagta ugu horreeysay

Markuu Ilaah siiyay ninka ugu horreeya shaqo uu sameeyo iyo sharci uu raaco, waxaa la gaaray waqtigii la qaabeeyn lahaa naagta ugu horreeysay.

> Oo RABBIGA Ilaah ahu wuxuu yidhi, "Ma wanaagsana in ninku keligiis ahaado; waxaan u samayn doonaa mid caawisa oo ku habboon."
>
> Oo RABBIGA Ilaah ahu hurdo weyn buu ku riday ninkii, kolkaasuu gam'ay; kolkaasuu wuxuu ka bixiyey feedhihiisii middood, meesheediina hilib buu ku awday. Oo feedhii RABBIGA Ilaah ahu ka bixiyey ninka ayuu naag ka sameeyey, oo wuxuu iyadii u keenay ninkii.
>
> Ninkiina wuxuu yidhi, "Tanu hadda waa laf ka mid ah lafahayga,
> iyo hilib ka mid ah hilibkayga: waxaa iyada loogu yeedhi doonaa Naag,
> maxaa yeelay, iyada waxaa laga soo saaray Nin." (Bilowgii 2:18,21-23)

Ma fahantay yaa sameeyay qalliinka ugu horreeya—
ee yaa qorsheeyay guurka ugu horreeya? Haa, wuxuu ahaa Ilaahay.

Naag macnaheeda waxaa waaye Wax Ninka ka soo baxay. Kaddib, Aadan wuxuu u bixiyay naagtiisa magaca Xaawa, macnaha waa Hooyada Bini-Aadanka oo dhan. Intii lagu jiray Ilaah siiyay iyaga door kala duwan, Wuxuu ka dhigay ninka iyo naagta isku qaymi. Sida Aadan oo kale, Xaawa waxaa iyadana laga abuuray araggii Ilaah. Xataa iyada waxaa loo abuuray inay garato Abuureheeda-Mulkiileheeda, muujiso tarbiyadiisa, iyo inay raxaysato oo xariir aad u farxad badan inay la lahaato isaga weligeed.

> Oo Ilaah wuxuu arkay wax kasta oo uu sameeyey, oo bal eeg, aad bay u wanaagsanaayeen. Waxaana jiray fiid iyo subax, maalintii lixaad.
>
> Maalintii toddobaadna wuxuu dhammeeyey shuqulkiisii uu sameeyey; oo maalintii toddobaad ayuu ka nastay shuqulkiisii uu sameeyey oo dhanba. (Bilowgii 1:31; 2:2)

Muxuu Ilaah u nastay maalintii toddobaad? Maxaa yeelay Shaqadiisa wuu dhammeeyay. Haddana, abuurista uu dunideeda ku abuuray lix maalmood oo nastay maalinta toddobaad, Ilaah wuxuu abaabulay wiigga toddobada maalmood leh—waa silsilad shaqo iyo nasasho ah oo lagaga dhaqmo adduunka oo dhan.

RABBIGA Ilaah wuxuu Aadan iyo Xaawa u dhaqaaleeyay sida aabbo xigmad leh oo weliba dareen jecayl leh. Habeen kasta, wuxuu iyaga kula socday oo kula hadlayay beerta dhexdeeda. Way ku faraxsanayeen, wayna ku istareexeen Joogitaankiisa.

> Oo labadooduba way qaawanaayeen, ninka iyo naagtiisuba, mana ay xishoonaynin. (Bilowgii 2:25)

Qiyaas duni kaamil ah oo ay deganyihiin lammaane kaamil ah oo xariirka ay abuurehooda la leeyihiin kaamilan yahay. Taasi waa sida ay wax ahaayeen bilowgii. Maxaa qaldamay haddaba?





## Dhacdada 10

# Boqortooyada Iftiinka

Intanaan sahminin wixii ka qaldamay dunida, waa inaan fahano waxyaalaha qaarkood oo ku saabsan Samada.

Dunidan kale oo loogu wacay Janno waa meel qabta iftiin daahir ah, midabo soo jiidasho, hees macaan, hadal qanacsan, iyo sir badan oo furfurmaysa. Hawlaha ugu fudud ee ka dhacaan samada way ka awood badan yihiin waxyaalaha ugu daran ee ka dhacaan dunida. Jannada waa cabbir kale.

Jannada waa guriga Boqorka.

Soo jiidashada ugu wayn ee laga helayo meeshan farxadda leh waa Boqorka Naftiisa.

Gees kasta oo magaalada heerka sare ah waxaa loo qaabeeyay inuu muujiyo sharaftiisa.

> Oo magaaladuna waxay ahayd dahab saafi ah oo u eg muraayad saafi ah. (Muujintii 21:18)

Sifada ugu faahfaahsan ee jannada waxaa lagu qoray Kitaabka ugu dambeeya Qorniinka, *Muujintii*. Ilaah wuxuu u muujiyay nebi Yooxanaa muuqaalka jannada, kaddibna wuxuu u sheegay inuu qoro wuxuu soo arkay.

> Waxaa jiray carshi samada qotoma, oo mid baa carshigii ku fadhiyey. …oo carshigana waxaa ku wareegsanaa qaansoroobaad midabkeedu u eg yahay dhagax sumurud. … Oo carshigiina waxaa ka soo baxay hillaac iyo codad iyo onkod. … Oo carshigii hortiisana waxaa yiil wax la mid ah bad muraayad ah oo u eg madarad.
>
> Waxaan ku arkay oo ka maqlay malaa`igo badan codkood, oo tiradooduna waxay ahayd toban kun oo meelood oo min toban kun ah oo meelood oo min toban kun ah, iyo kumaan kun. [Waxay ku wareegsanayeen carshiga… marna ma joojin iyago dhahaya]: "Quduus, quduus, quduus waxaa ah Rabbiga ah Ilaaha Qaadirka ah, oo jiray oo jira oo iman doona." (Muujintii 4:2-3,5-6; 5:11; 4:8)

Malaa'ig macnaheeda waa *rasuul* ama *adeege*. Malaa'igo waa jiritaan ruux leh. Isla sida Abuurehooda oo kale, malaa'igaha way ka qarsoonyihiin bini-adaanka, waxaan ka ahayn in loo diray hawl meel looga baahanyahay inay muuqdaan.


Boqorka samada wuxuu sameeyay malaa'igo intuu sameeynin bini-aadan ka hor. Kitaabkiisa wuxuu noogu sheegaya "oo ay carruurta Ilaah [macnaha waa malaa'igaha Ilaah] oo dhammu farxad la qayliyeen" (Ayuub 38:7) intay fiirsanayeen markuu abuurayay dunida.

Ilaah wuxuu siiyay malaa'igahiisa awood ay ku gartaan, addeecaan, ammaanaan oo ay ugu adeegaan weligood. Malaa'igaha ma ahayn addoomaddii Ilaah. Isla sida uu ku sameeyay bini-aadanka, Ilaah ma qasbin iyagu inay addeecaan Isaga. Wuxuu rabay adeegeyaal faraxsan, oona dhaqsadii ay yeelayaan amarkiisa.

Qoraallada waxay noo sheegayaan inay jirtay mid ka mid ah malaa'igaha oo jago sare haysatay malaa'ig taasi uu Ilaah ku deeqay caqli badan, quruxnimo, iyo awood.

Haddaad garanayso malaa'igtan qisadeeda, haddaba waad garanaysa meesha uu sharka ka soo farcamay.





## DHACDADA 11

# BOQORTOOYADA MUGDIGA

Lusifer wuxuu ahaa malaa'igaha Ilaah kan ugu jagada waynaa. Macnaha magaciisaa waa Midka Iftiimaya. Qoraallada nebiyada waxay ku sifaynayaan Lusifer inuu yahay "dhammaystirkii kaamilnimada, oo waxaa ka buuxay xigmad iyo qurux kaamil" (Yexesqeel 28:12).[7]

Kaddib Lusifer wuxuu bilaabay inuu naftiisa is fiiriyo intuu fiirin lahaa Boqorkiisa wayn ee Abuuraha ah. Waa markaa ugu horreeysay oo ka hor ma dhicin, in wax la abuuray ay isla waynadaan abid! Isagoo ay indha tireen quruxdiisa iyo caqligiisa, oo iloobay midka isaga sameeyay, Lusifer wuxuu qalbigiisa iska yiri,

> "Anigu waxaan kori doonaa samada, oo carshigaygana xiddigaha Ilaah waan ka saari marin doonaa.... Waxaan kori doonaa daruuraha sare korkooda, Waxaan noqon doonaa sida Ilaaha ugu sarreeya oo kale." (Ishacyaah 14:13-14)

Lusifer wuxuu rabay inuu noqdo boqor. Wuxuu rabay *doonistiisa* in loo sameeyo baddalkii doonista Ilaah. Dambiga ayaa adduunka soo galay.

Lusifer wuxuu ka dhaadhiciyay malaa'igaha saddex meelood meel inay isaga ku darsoomaan caasinimadiisa, laakiin Ilaah, kan aan oggolaanaynin dambiga wuxuu ka cayriyay iyaga ciddiisa jannada.

Lusifer magaciisa waxaa loo baddalay Shayddaan, macnaha waa *eedeeye*. Sidoo kale waxaa loo bixiyay Ibliis, macnahana waa *khaa'inole*. Malaa'igaha xunxun waxaa la yiraahdaa ruuxaanta xunxun.

Meel qarsoon oo mugdi ah ayaa Ilaah ka diyaariyay xabsi loogu talagalay shayddaanka iyo shayddaanka ruuxaantiisa xunxun. Meeshaas waxaa la dhahaa naarta iyo Badda Dabka. Waa meel kala-fogaan weligeed ah laga fogeeyay Ilaah, meel oo caasiyiinta dhibaato dambe geeysan doonin. Maalin waxaa dhici doonta in Shayddaanka iyo ruuxaantiisa xunxun oo dhan lagu xiri doono weligood xabsigaas, laakiin weli kulligood xagga ma jiraan.

Sidaa darteed xaggey tageen ruuxaanta xunxun, markuu Ilaah bannaanka u soo tuuray?

Waxay u guureen hawada dhulka ku xeeran. Halkaas Shayddaanka wuxuu ugu habeeyay malaa'igahiisa darajooyin. *Hadduunan maamuli karin samada, wuxuu maamuli lahaa dunida!* Sidaas daraaddeed ayaa Qorniinka ugu yeeraa Shayddaan "madaxda xoogga hawada oo ah ruuxa haatan ka dhex shaqaynaya carruurta caasinimada" (Efesos 2:2).

Shayddaan iyo ruuxaantiisa xunxun way naga qarsoonyihiin, laakiin waa wax jiro. In kastoo aan garanaynin siday u eegyihiin, waxaan garanaynaa ujeeddadooda mugdiga ee sharta ah. Waxay isticmaali doonaan dhammaan noocyada kala duwan ee khiyaanada ah inay dadku ku biiraan boqortooyadooda mugdiga iyo halaagga. Iyaga marnaba ma joojin doonaan inay ku burburiyaan.

> Shayddaanka qudhiisu wuxuu isu ekaysiiyaa malaa'igta iftiinka. (2 Korintos 11:14)
> Cadowgiinna Ibliiska ahu sida libaax ciyaya ayuu u wareegaa oo uu doondoona cid uu liqo. (1 Butros 5:8)

Hadda aan ku soo laabano qisada waalidiinteenna ugu horreeysay.





## Dhacdada 12

# Abeesada

Aadan iyo Xaawa noloshooda waxaa ka buuxay nolol xiise leh iyo ujeeddo.

Maalin kasta wax yaab leh oo aad u wayn ayay ahayd, markay sahmiyeen beertooda ballaaran, ka ilaaliyeen nooleheeda iyo geedaheeda, oona dhadhamiyeen cuntadeeda.

Habeenba habeen ka sii dambeeyo wuu ka sii fiicnaa, waayo Abuurehooda-Mulkiilehooda wuxuu ku xushmeeyay inuu ugu imaado booqasho shaqsi ahaaneed. Sidee ay u jeclayeen inay Isaga la socodaan oona la hadlaan! Ninka iyo naagtiisa waxay ku faraxsanayeen guriga beertooda.

Laakiin Shayddaan ma faraxsanayn. Wuxuu nebcay Ilaahay wuxuuna nebcay labadaas noole oo muujiyeen Ilaah araggiisa!

Oo Shayddaankii oo guuldarraystay inuu qabto boqortooyada samada, wuxuu sameeyay shirqool inuu qabto boqortooyada dunida. *Hadduu keli qaban karay Aadan, madaxa aadanaha, inuu doorto inuu jabiyo sharciga Ilaah. Laakiin mu damacgalin lahayn isagu si toos ah…*

Hal maalin Xaawa waxay maqashay cod.

Ma ahayn Aadan. Ma ahayn Ilaah.

Waxay ahayd abeeso!

Xaawa agteeda xamaarato oo hadlaysaa waxay ahayd hindiso cusub oo kale keliya. Waxna ma aysan ka ogayn inuu Ilaah cadowgiisa iska soo dhigay abeesada. Maysan ogayn Shayddaan inuu rabay inuu isticmaalo iyada, si ay damacgaliso Aadan inuu jabiyo Ilaah sharcigiisa.

Abeesada way sugtay, wayna dulqaadatay, indhaheeda khiyaanada waxay raaceen naagtii. Kaddib, xilliga fursadda, waxay u siislaysay [nuxnuxlaysay] iyada,


> "Ilaah miyuu idinku yidhi, 'Waa inaydnaan waxba ka cunin geed kasta oo beerta ku yaal'?" (Bilowgii 3:1)

Shayddaankii wuxuu rabay inay Xaawa ka shakiso Ilaah eraygiisa. Wuxuu kaloo rabay inay ku fikirto inuu Ilaahii ka qarinayay iyada iyo ninkeeda wax wanaagsan.

> Naagtiina waxay abeesadii ku tidhi, Midhaha geedaha beerta waannu cuni karnaa; laakiinse midhaha geedka beerta dhexdeeda ku yaal, Ilaah wuxuu nagu yidhi, Waa inaydnaan waxba ka cunin, ama aydnaan taaban, yeydnan dhimanine.
>
> Abeesadiina waxay naagtii ku tiri, Ma dhiman doontaan; waayo Ilaah wuxuu og yahay in maalinta aad cuntaan ay indhihiinnu furmi doonaan, oo aad noqon doontaan sida Ilaah oo kale, idinkoo kala garanaya wanaagga iyo xumaanta. (Bilowgii 3:2-5)

Xaawa maxay sameeyn lahayd?





## DHACDADA 13

# DOORASHADA

Ilaah wuxuu siiyay Aadan iyo Xaawa xornimada inay doortaan sameynta doonistiisa ama doonistooda.

RABBIGA wuxuu ogaa wixii u fiican noolahan khaaska ah oo uu ka sameeyay araggiisa. Wuxuu rabay Aadan iyo Xaawa inay Isaga aamminaan, xataa hadday fahmaynin sababta ka dambaysa amarkiisa.

Ilaah keliya ayaa saadaalin karay natiijooyin ballaaran ee aad ka u daran ee khuuseeya in badan xumaanta, taaso ahayd sababtuu Aadan ugu sheegay,

> Geedka aqoonta wanaagga iyo xumaanta waa inaanad waxba ka cunin: waayo maalintii aad wax ka cuntid hubaal waad dhiman doontaa. (Bilowgii 2:17)

Laakiin hadda abeesada waxay u sheegtay Xaawa,

> Ma dhiman doontaan. (Bilowgii 3:4)

Yay aamminta Xaawa—Abuureheeda ama noole?

Tani waa waxa dhacay:

> Oo markii naagtii aragtay in geedki cunto ku wanaagsan yahay, oo indhaha u roon yahay, oo uu yahay geed caqli lagu yeesho, ayay midho ka qaadatay, oo cuntay;
>
> Ninkeedii la joogayna
> wax bay ka siisay,
> oo isagiina wuu cunay. (Bilowgii 3:6)

Iyadu way cuntay! Isagu wuu cunay!

Xaawa waxay cuntay mirtii laga mamnuucay, waayo waxaa khiyaanay Shayddaanka xeeladiisa. Aadan wuu cunay, wuxuu si ula kac ah u doortay inuu raaco jidkiisa baddalkii jidka Ilaah.

Baddalkii isku dhiibi lahaayeen Abuurehooda quduuska ah oo jecel, bini-aadanka waxay isku dhiibeen cadowga.

Waalidiinteenna ugu horreesay way dambaabeen.





## Dhacdada 14

# Dambi iyo Ceeb

Aadan waxaa loo magacaabay madaxa jinsiga aadanaha. Waa isaga midka Ilaahay u amray inuusan ka cunin geedka aqoonta wanaagga iyo xumaanta. Ma ahayn ilaa Aadan qaniinay mirta laga mamnuucay, isaga iyo naagtiisa waxay bilaabeen inay dareemaan natiijooyinka aad u xun doorashadooda.

> Oo labadoodiiba indhahoodii way furmeen, oo waxay garteen inay qaawan yihiin; waxayna isku tosheen caleemo berde, oo ay gunti ka samaysteen. (Bilowgii 3:7)

Ceeb aad u xun iyo eed wadno-jab ah ayaa qalbigooda soo dhex galay. Waxay ka dareemeen gudaha bannaankaba nijaasnimo.

Dambiga wuxuu keenay ceeb.

Intaynaan jabin Aadan iyo Xaawa Ilaah sharcigiisa ka hor, waxay ahaayeen Ilaah-yaqaan "mana ay xishoonaynin" (Bilowgii 2:25). Waxaa lagu xishmeenayay inay la jiraan Abuurehooda, inay muujiyaan araggiisa, iyo inay ahaadaan saaxiibadiisa.

Laakiinse markay ka cuneen geedka aqoonta wanaagga iyo xumaanta, waxay noqdeen isyaqaana ceebtooda.

Sharaftii waxay isku baddashay ceeb.

Waxay isku dayeen ceebtooda inay ku daboolaan caleemo, laakiin ma jirin qiimo ay is kugu dadaali kareen, si ay u daboolaan dhibkooda. Waxay ahaayeen kuwo aan awood lahayn inay ka takhalusaan dambigii qabsaday naftooda. Ma lahayn awood ay ku soo celiyaan sharaftii ay lahaayeen oo ay lumiyeen.


Waxay ahayd galab.

Goordhow Abuurehooda oo quduuska ah oo jecayl ayaa u imaan lahaa booqashadii oo habeen ah. Fikradda araggiisa waxay jirkooda ku dhex abuurtay hirar gariir ah oo argaggax leh.

Isagu muxuu ku dhihi lahaa iyaga?

Iyagu maxay ku dhihi lahaayeen Isaga?





# Dhacdada 15

## Dhimashada xagga ruuxa

Intaynaan Ilaah ku caasiyoobin ka hor, Aadan iyo Xaawa waxay ku faraxsanayeen inay arkaan Abuurehooda-Saaxiibkooda oo mar walba soo booqanayay iyaga.

Hadda way cabsadeen.

> Oo waxay maqleen codkii RABBIGA Ilaaha ah, isagoo beerta dhex socda kolkii maalintu qaboobayd: oo ninkii iyo naagtiisii way iska qariyeen Ilaah, oo waxay ku dhuunteen geedihii beerta dhexdooda. (Bilowgii 3:8)

Sida carruur caasiyoobay oo isku dayeen inay iska qariyaan, waalidiintooda Aadan iyo Xaawa waxay isku dayeen inay iska qariyaan Abuurehooda.

> Oo RABBIGA Ilaah ahu wuxuu u yeedhay ninkii, oo wuxuu ku yidhi, Xaggee baad joogtaa?
>
> Isagiina wuxuu yidhi, Codkaagaan beerta ka dhex maqlay, waanan cabsaday, maxaa yeelay, waan qaawanaa; oo waan isqariyey.
>
> Kolkaasuu ku yidhi, Yaa kuu sheegay inaad qawaan tahay? Miyaad wax ka cuntay geedkii aan kugu amray inaadan wax ka cunin?
>
> Ninkiina wuxuu yidhi, Naagtii aad i siisay inay ila joogto ayaa geedkii wax iga siisay, oo anna waan cunay.
>
> Oo RABBIGA Ilaah ahu wuxuu naagtii ku yidhi, Waa maxay waxaan aad samaysay?
>
> Naagtiina waxay tidhi, Abeesadaa i khiyaanaysay oo anna waan cunay. (Bilowgii 3:9-13)

Aadan iyo Xaawa maxay u rabeen inay ka dhuuntaan Ilaah? Maxaa yeelay way dambaabeen. Maxay kuwa kale ugu eedeeyeen dambigooda? Maxaa yeelay way ceebaysanaayeen.

Aadan iyo Xaawa ma aysan muujinin araggii quduuska ah ee Ilaahii. Baddalkii ay muujin lahaayeen Abuurhehooda quduusnimadiisa iyo jecaylkiisa, waxay hadda muujiyeen Shayddaanka caasinimadiisa iyo kibirkiisa.

Laamaanihii ugu horreeyay waxay noqdeen laan laga gooyay geed nool.

Dambigooda wuxuu jabiyay xariirkooda ay la lahaayeen Boqorka adduunka.

Ruux ahaan, way dhinteen. Dambigooda wuxuu ka fogeeyay Isha nolosha daa'imka ah.

Jir ahaan, weli way noolaayeen, laakiin waxaa bilaabay koritaanka jirkooda inuu duqoobo. Awoodda dhimashada ayaa jirkooda soo dhex gashay.

Oo maxay ahayd waxa sababay dhimashadan iyo burburkan oo dhan? Dambiga.





## DHACDADA 16

## HABAARKA

Bilowgii taariikhda bini-aadanka, Ilaah iyo bini-aadanka way isla jireen. Nabad iyo farxad ayaa jirtay. Kaddib ninka ayaa jabiyay sharciga Ilaah.

Isla maalintii ay Aadan iyo Xaawa dambaabeen, Ilaah wuxuu iyaga ogaysiiyay qaar ka mid ah natiijooyinka kuwa ugu daran uu keenay dambigooda. Naagtiina wuxuu ku yidhi,

> Dhibtaada iyo wallacaaga aad baan u badin doonaa; oo dhib baad carruur ku dhali doonta; oo waxay doonistaadu ahaan doontaa ninkaaga, wuuna kuu talin doonaa. (Bilowgii 3:16)

Intaynaan dhacdadan dambiga galin ka hor, Xaawa waxay ku faraxsanayd ninkeeda jecaylkiisa iyo daryeelkiisa ee damac la'aanimadiisa, laakiin hadda dambigooda wuxuu wasakheeyay dabeecadda oo ugu dari lahaa khilaaf iyo xanuun farxadda guurka.

Tallaabada xigtay, Ilaah wuxuu ninka ku yiri,

> Dhulku waa habaaran yahay adiga aawadaa; maalmaha cimrigaaga oo dhanna dhibaataad wax kaga cuni doontaa. Qodxan iyo yamaarugna waa kaaga soo bixi doonaan…Wejigaagoo dhidisan baad wax ka cuni doontaa ilaa aad dhulka ku noqotid; maxaa yeelay, dhulkaa lagaa qaaday, waayo ciid baad tahay, ciid baadna ku noqon doontaa." (Bilowgii 3:17-19)

Dambigooda dartiis, Aadan iyo Xaawa waxay lumiyeen awoodda ay u lahaayeen xukumidda dunida. Adduunkooda hadda waxaa ku soo darsoomayaa qodxo, xanuun, murugo, cudur, iyo dhimasho.

Qaarkeen waxaan umalaynaynaa in murugada noocaas ah ay caadi yihiin. Laakiin miyay ahayd asalka naqshada Ilaah inuu geed dhala ubax cas oo caraf leh oo qodxan shar leh? Ama layaabka dhalashada inuu soo koobo xanuun aad u daran? Ama iyagii oo laga abuuray Ilaah araggiisa inay duqoobaan oo dhintaan? Maya. Ilaahii ma ugu talagalin abuuritaanka asalka inuu la dagaalamo naftiisa. Waxay ahayd ninka dambigiisa dartiis in dunida u timid habaarka Ilaah hoostiisa.

Bini-aadanka wuu dambaabay oo bini-aadanka waa innu dhinto. Sharciga dambiga iyo dhimashada ayaa u baahnaa.

Dhimashada waa kala-fogaasho. Dambigu wuxuu keenay saddex kala-fogaasho oo aad u daran:

1. Dhimashada ruuxa: Ninka ruuxiisa waxaa laga fogeeyay Ilaah.
2. Dhimashada jirka: Ninka ruuxiisa iyo naftiisa waa laga fogeeyay jiirka (iyo dadka isaga uu jecelyahay).
3. Dhimashada daa'imka ah: Ninka ruuxiisa, naftiisa, iyo jirkiisa ayaa Ilaah iskaga fogeeyay weligeed oo lagu tuurayo Badda Dabka.[8]

Ninku ma lahayn waddo oo iskaga badbaadiyo habaarka dambiga.

Miyay jirtay wax rajo ah?





# Dhacdada 17
## Ballanka

Shayddaan wuxuu xaday khasnadda khaaska ahayd ee Boqorka, laakiin Boqorka wuxuu lahaa qorshe u qarsoon si u dib-u-soo iibsan lahaa. Maxaa yeelay qiimaha madax-furashada Boqorku qorsheeyay inuu bixiyo si aan loo malaysan karin, ruuxaanta xunxun iyo dadka midkoodna ma fahmi karaan qorshehiisa ilaa laga fuliyo.

Isla maalintiiba Shayddaan ayaa qabsaday jinsiga bini-aadanka, Ilaah wuxuu abeesadii ku yiri,

> Waxan aad samaysay aawadiis waad ka habaaran tahay xoolaha oo dhan, iyo dugaag kasta oo duurka jooga; waxaanad ku socon doontaa boggaaga, ciid baanad cuni doontaa maalmaha cimrigaaga oo dhan. (Bilowgii 3:14)

Markuu Ilaah abuuray abeesooyinka waxay lahaayeen lugo. Maxaa yeelay abeesadu waxaa isticmaalay Shayddaan inay ku hoggaamiso dhammaan dadka dambi, Ilaah wuxuu ku habaaray inay bogga ku socoto dhulka. (Ma ogtahay inay jabisooyinku leeyihiin ib yar maqaarkooda hoostiisa mar ay lahaan jireen lugo?) Inuu ka dhigo abeesooyinka dugaagga midka ugu hooseeyo, Ilaah wuxuu siiyay reerka dadka xasuus inuu waqtigiisii burburin doonaa "masduulaagii weynaa oo ahaa maskii duqa ahaa hoos baa loo soo tuuray, kaasoo la yiraahdo Ibliis iyo Shayddaan, kii dunida oo dhan khiyaaneeyey" (Muujintii 12:9).

Kaddib Ilaah wuxuu ku yiri Shayddaankii, kaasoo isticmaalay abeesada,

> "Oo colaad baan idin dhex dhigi doonaa adiga iyo naagta, iyo farcankaaga iyo farcankeeda; oo madaxaaguu burburin doonaa, adiguna cedhibtiisaad burburin doontaa." (Bilowgii 3:15)

Tani waxay ahayd waxyaalihii ugu horreeyay waxyiyaha badnayd ee uu Ilaah, si tartiib-tartiib ah u ogaysiiyo qorshehiisa qarsoon uu dadka kaga badbaadinayo Shayddaanka, dambiga iyo dhimashada. Laakiin si uu Shayddaanka iyo asxaabtiisa uga qariyo qorshehan, Boqorkii wuxuu waxyiga ku dhigay xuruufo sir ah.

Ilaah wuxuu ballanqaaday dunida inuu u soo diro Badbaadiye—*Farcanka naagta*. Badbaadiyaha wuxuu lahaan doonaa hooyo insaan ah, laakiin ma lahaan doono aabbo insaan ah. Isagu waxaa loo garan doonaa Masiixa, macnahiisa waa *Kii La Doortay*. Shayddaan wuxuu ku dhufan doonaa Masiixa ciribtiisa, laakiin Masiixii wuxuu burburin doonaa Shayddaanka madaxiisa.

Waxyaalahan oo dhan macnahooda waa maxay? Boqorku mar dambe ayuu u caddeeyn doonaa, laakiin hadda Ilaah wuxuu siiyay Aadan iyo Xaawa fallaar ilays rajo ah.

Kumaankun oo sanadood kaddib, mid ka mid ah nebiyada Boqorka wuxuu qori doonaa,

> Dadkii ku socon jiray gudcurka ayaa iftiin weyn arkay… Gabadh bikrad ah baa uuraysan doonta, oo waxay dhali doontaa wiil, oo magaciisana waxay u bixin doontaa Cimmaanuu'eel—['Ilaah nala jooga']. (Ishacyaah 9:2; 7:14)

Boqorka ayaa madaxfuri[9] doonaa khasnaddiisa khaaska ah. Laakiin meeqay ku qaadan lahayd?





# Dhacdada 18

## Allabariga ugu horreeyay

Ma xasuusataa waxaa ay sameeyeen Aadan iyo Xaawa markay cuneen mirta laga mamnuucay? Waxay sameeysteen caleemo ay isku daboolaan.

Guntiyaha ay sameeysteen miyay ku dareemeen raaxo Abuurehooda ama Xaakinkooda ah hortiisa? Maya! Waxay dareemeen ceeb iyo eed. Ma lahayn waddo ay iskaga dhigaan Ilaah hortiisa xaq.

Oo Ilaah wax buu u sameeyay iyaga.

> RABBIGA Ilaah ahuna wuxuu Aadan iyo naagtiisa u sameeyey dhar harag ah, wuuna u xidhay iyagii. (Bilowgii 3:21)

Yaa sameeyay xoolaha allabariga ee ugu horreeya abid? Ilaah ayaa sameeyay.

RABBIGA wuxuu dilay xayawaanno qaar, wuxuu ka sameeyay harag xoolaad, iyo wuxuu u xiray Aadan iyo Xaawa. Sababta u sameeyay tan, Ilaah wuxuu barayay iyagii casharro aas aas ah ku saabsan caddaaladdiisa, naxariistiisa iyo nimacadiisa.

Aan ka fikirno saddexdan erayo oo muhiimka ah.

> *Caddaalad*. Bal eeg xayawaannada dhintay. Muxuu Ilaahii u sameeyay allabari? Wuxuu u sameeyay inuu tusiyo Aadan iyo Xaawa in sharcigu dambiga iyo dhimashada taageero. Dambigooda waa in lagu ciqaaba dhimasho. Taasi waa caddaalad.
>
> *Naxariis*. Bal eeg Aadan iyo Xaawa. Ilaah miyuu dilay iyaga? Maya. Ilaahii wuxuu dilay xayawaanno baddalkooda. Tani waxay ahayd Ilaah jidkiisa inuu ciqaabo dambigooda si uusan iyaga u ciqaabin. Taasi waa naxariis.
>
> *Nimco*. Hadda bal eeg Aadan iyo Xaawa dharkooda quruxsan. Labadan qof oo sharciga jabiyay miyay u qalmaan hadiyaddan? Maya, laakiin Ilaahii wuxuu tusiyay iyaga nimco, markuu dhar oga dhigay haragga xoolaha ee allabariga. Taasi waa nimco.

Maadaama u RABBIGA wax u sameeyay, Aadan iyo Xaawa waxay ku farxeen inay la joogaan Ilaah mar kale!

Dhiigga xayawaanka wuxuu daboolay *dambigooda*. Aadan iyo Xaawa waxay u qalmeen inay dhintaan maalintaas, laakiin xayawaanno oo aan eed-lahayn ayaa baddalkooda dhinteen.

Khamiiska haragga oo xayawaanka ayaa daboolay *ceebtooda*. Mar kale Aadan iyo Xaawa waxay dareemeen raaxo Ilaah hortiisa.

Kumanaankun sanadooyin kaddib Ilaah nebiyadiisa mid ka mid ah wuxuu qoray,

> Si weyn baan Rabbiga ugu rayrayn doonaa, oo naftayduna Ilaahayga bay ku farxi doontaa, waayo, wuxuu ii xidhay dharkii badbaadada, oo wuxuu i huwiyey khamiiskii xaqnimada. (Ishacyaah 61:10)

Ilaah keliya ayaa leh waddo xaq ah inuu u sameeyo dambiileyaasha mar kale.





# DHACDADA 19

## WAA LA CAYRIYAY

Markuu Ilaah ka cayriyay malaa`igaha caasiyoobeen jannada, burburkooda waa hubaal. Ruuxyada noolaha ah kuwaasi oo ku noolaadeen holaca iftiinka jannada, waxba marmarsiin uma lahaan karin dembigooda. Laakiin wasakhaynta dambiga ee bini-aadanka, RABBIGA wuxuu lahaa qorshe inuu dib-u-soo ceshto hadday aammini lahaayeen Isaga.

Weli, dambiga wuxuu leeyahay natiijo. Isla sida u Ilaah uga cayriyay Lusifer iyo malaa`igahiisa sharaysan jannada xagga samada, haddana Ilaah wuxuu uga cayriyay ninka iyo naagtiisa jannada xagga dunida ah.

> Kolkaasuu ninkii eryay; Beer Ceeden barigeedana wuxuu taagay Keruubiim, iyo seef ololaysa, oo dhan walba u jeesanaysa, si ay u dhawrto jidka geedka nolosha. (Bilowgii 3:24)

Geedka nolosha wuxuu ahaa geedka kale oo khaas ahaa oo beerta ku dhex yaalay dhexdeeda. Dad kaamil keliya ayaa ka cuni kareen. Aadan iyo Xaawa ma aysan ku sii ahaanin kaamil. Way dambaabeen, waana inay duqoobaan oo dhintaan.

Abuureheenna aad u wayn waa quduus. Macnaha waxaa waaye inuu yahay daahir, nadiif, kaamil iyo xaq. Dabcigiisa iyo sharcigiisa quduuska ah dartiis, waa inuu ku ciqaabo dambiga dhimasho—kala-fogaasho Isha Nolosha.

Dadka qaarkood waxay umalaynayaan maadaama Ilaah "heer sare u yahay" inuu iska dhaafi karo sharciyadiisa u Isagu amray. Bal qiyaas maxkamad halkuu xaakinka diido inuu ku dirqiyo sharciyada dalka. Miyaad dhahi lahayd inuu xaakinka noocaas oo kale inuu yahay *heer sare*? Bal qiyaas tartan kubbadda cagta halkuu garsooraha madaxda ah iska dhaafi lahaa sharciyada cayaarta. Miyaad ugu yeeri lahayd garsoore *heer sare* ama garsoore *xun*?

Shayddaan wuxuu rabay inay Xaawa aamminto inuusan Abuureheeda ku dirqinaynin sharciyadiisa, inuusan ku ciqaabaynin sharci jabiyaasha dhimasho. Laakiin Boqorka xaq ah iyo Xaakinka adduunka wuxuu dhawraa eraygiisa si weligeed ah.

Ilaah aad buu u wayn yahay. Waad aammini kartaa Isaga.

> Carshigaaga aasaaskiisu waxa weeye xaq iyo caddaalad, Oo naxariista iyo runtuna way ku hor socdaan. (Sabuurkii 89:14)

Bal fiiri haddaad ka jawaabi kartid hal xirxiralahan: *Maxay Shayddaanka iyo bini-aadanka sameeyn karaan oo RABBIGA Ilaah ahu sameeyn karin?*

Halkani waa jawaabtii Ilaah:

> "Axdigayga ma jebin doono, Oo wixii afkayga ka soo baxayna ma beddeli doono. Mar baan waxaan ku dhaartay quduusnimadayda….been uma sheegi doono." (Sabuurkii 89:34-35)

Boqorka dunida ma baddali karo eraygiisa.





# Dhacdada 20

## Carruurta ugu horreeysay

Beerta bannaankeeda weli dunida waxay ahayd meel quruxsan, laakiin waxaa kaloo ku jira waxyaalo xun sida qodxo qodxo leh, cayayaan la dhibsado, jilbo maqaar-siiban, iyo san cabbursan. Xayawaannadu badnaa maysan sii lahaanin naxariis. Si fudud lagu ma heli karin cunto. Aadan iyo Xaawa waxay ahayd inay aad u shaqeeystaan oo keliya sida ay ku buuxin lahaayeen calooshooda gaajaysan.

Sidaa oo kale waxay lahaayeen  waqti yar oo riyaaq iyo farxad.

> Ninkiina naagtiisii Xaawa ahayd buu u tegey; wayna uuraysatay, oo Qaabiil bay dhashay, oo waxay tidhi, Wiil baan ku helay RABBIGA caawimaaddiisa." (Bilowgii 4:1)

Xaawa waxay u bixisay cunugga adduunka ugu horreeya Qaabiil, macnahuna waa *lahaansho*. Waa khasnad qaali ah oo ka timid Ilaah! Laga yaabaa waxay ku fikirtay wiilkeeda inuu ahaan lahaa Badbaadiyaha oo ballanka, laakiin mardhow waxay ogaatay wiilkeeda yar ee bilicsan inuu ahaa mid madax-adag oo weliba wuxuu ahaa mid naftiisa oo keliya ka fikiro—sida waalidiintiisa!

Kaddibna, markuu wiilkooda labaad dhashay, Xaawa waxay u bixisay Haabiil, macnaha waa *wax ma tare* ama *waxba*. Sii cad, Aadan iyo Xaawa ma dhali karin *Farcanka naagta* oo dambi la`aan ah oo ka badbaadin lahaa dadka dambigooda.

Baddalkii muujin lahaayeen Ilaah araggiisa quduuska ah, Aadan iyo Xaawa ilmahooda waxay muujiyeen dabciyadooda dambiga leh.

> Aadanna…wiilal iyo gabdhona wuu dhalay…u eg oo araggiisii leh. (Bilowgii 5:4,3)

Fiiri sawirka. Ma arkaysaa Qaabiil oo ka dafaaya xabxabka walaalkiisa yar? Wuxuu dhaqmanayaa sida waalidiintiisa, kuwaaso qaateen mirta aysan iyaga lahayn. Sida cudur la isku daarto, Aadan iyo Xaawa waxay ku daarteen dambigooda carruurtooda.

> Haddaba sida dembigu nin keliya dunida ugu soo galay, dhimashaduna dembiga ugu timid, sidaasaa dhimashadiina u gaadhay dadka oo dhan, waayo, waa la wada dembaabay. (Rooma 5:12)

Maahmaah Afrikaan ah ayaa dhahaysaa, *Jiir wuxuu dhali karaa farcan dhulka qodo keliya*. [Geed walba wuxuu dhalaa mirihiisa.]

Maahmaah Arab ah ayaa dhahaysaa wax la mid ah: *Wiilka boolaboolada waa sabbeeyaa.*

Markay waalidiinteenna ugu horreeysa ay dambaabeen, waxay noqdeen laan geed ka soo jabtay. Sida laan yar oo kasta iyo caleen kasta oo ku taala laanta jabsan waa la saameeyay, qof kasta oo ka tirsan Aadan reerkiisa oo farcankiisa ah waxaa saameeyay Aadan dambigiisa.

Waqti dheer kaddib dhimashada Aadan, nebigii Boqorka ahaa Daa'uud ayaa qoray,

> Aniga waxaa laygu qabanqaabiyey xumaan—Oo waxaa hooyaday igu uuraysatay dembi. (Sabuurkii 51:5)

Laga yaaba anaga ma rabno inaan taas maqalno, laakiin waan garanaynaa inay taas runta tahay.





# DHACDADA 21
## CIBAADADA DAMBIILEYAASHA

Aadan iyo Xaawa waxay lahaayeen wiilal iyo gabdho badan, laakiin Qoraallada waxay si taxaddar gooni uga sheekayaan wiilaashooda ugu horreeya.

> Haabiilna wuxuu ahaa adhijir, laakiin Qaabiil wuxuu ahaa beerfale. (Bilowgii 4:2)

Labadooda Qaabiil iyo Haabiil waxay ahaayeen shaqaale fiican.
Labadooda waxay garanayeen Abuurehooda.
Labadooda waxay rabeen Ilaah inuu aqbalo iyagii iyo cibaadadooda.
Labadooda waxay lahaayeen hal dhibaato isku mid ah: *Dambiga*.

Dambi keliya ma lagu dhalin, laakiin waxay u noolaayeen sida dambiileyaal. Maalin kasta waxay ku fikiri jireen, ku hadli jireen, oo ku dhaqmi jireen jidad muujinaynin Ilaah dabcigiisa daahirsan iyo jecaylka leh. Kitaabkiisa dhexdiisa Boqorka adduunka wuxuu ugu yeerayaa sidan dambi.

> Maxaa yeelay, dhammaan way wada dembaabeen oo gaadhi waayeen ammaanta Ilaah. (Rooma 3:23)

Miyuu jiray jid Ilaah inuu raalligeliyo Qaabiil iyo Haabiil ee sheego iyagii xaq ah araggiisa hortiisa? Haa, laakiin waxay noqon lahayd qiimo aad iyo aad u qaali badan.

> Dhiigdaadin la`aan dembidhaaf ma jiro. (Cibraaniyada 9:22)

Sharcigaas aan-la-jabin karin ee adduunka—sharciga dambiga iyo dhimashada—waa inuu hirgelo. Dambiga waa inuu lagu ciqaabo dhimasho. Sidaas darteed Boqorka jidkiisa oo dambidhaafka waxaa loo baahanyahay bixinta dhimashada. Maadaama uu dambiileyaashu u qalmaan inay dhintaan, Ilaah wuxuu aqbali lahaa dhiig xayawaan oo nooc khaas ah, sida wanka.

Wanka waa inuusan noqonin mid jirran, dhaawacsan, ama wasakhaysan. Waa inuu qabo caafimaad oo ahaado nadiif. Waa inuu ahaado wan kaamil ah.

Wanku wuxuu noqon lahaa wan la dilo ee la gubo. Wuxuu u dhimaan lahaa baddalkii dambiilaha eedaysanaha ah. Wanku wuxuu gali lahaa dambiilaha baddalkiisa.

Maalin ayaa labada walaal ay qurbaan Ilaah u keeneen, laakiin hal keliya ayaa keenay qurbaan sax ah.

> Maalmo dabadeed waxay noqotay in Qaabiil qurbaan ahaan Rabbiga ugu keenay midhihii dhulka.
>
> Haabilna wuxuu wax uga keenay curadyadii adhigiisa iyo baruurtoodiiba. (Bilowgii 4:3-4)

Qurbaankee kula tahay inuu Ilaah aqbalay?





# Dhacdada 22
## Sharciga Qurbaanka Dambiga

Bal eeg walaalaha. Bal eeg waxay Ilaahii u hibeenayaan. Bal eeg meelaha allabariga.

Meesha allabariga waxay ahayd meel taag ah oo ka koraysa dhulka, si caadi ah waa laga sameeyay dhagaxyo ama ciid. Waxay ahayd meel dhimasho. Meesha allabariga waxay kor u qaaday qurbaanka u dhexeeya samada iyo dunida, Ilaah iyo nin. Wax kasta oo loo hibeeyay allabariga waa in dabka lagu gubaa.

Ilaah mar walba caddaalad ayuu sameeyaa, laakiin wuxuu rabaa inuu tusiyo naxariis. Siduu labadaba u sameeyn karay? Siduu u ciqaabi karay dambi, isagoon ciqaabin dambiilaha?

Waqti dheer kaddib Qaabiil iyo Haabiil, Ilaah wuxuu u sheegay nebi Muuse:

> Waayo, jidhka noloshiisii waxay ku dhex jirtaa dhiigga; oo anna waxaan meesha allabariga dusheeda idiinku siiyey in nafihiinna loogu kafaaro gudo, waayo, waa dhiigga waxa loogu kafaaro gudaa nolosha daraaddeed. (Laawiyiintii 17:11)
>
> Oo waa inuu gacanta saaraa madaxa neefka qurbaanka la gubayo, oo waxaa loo aqbali doonaa inuu isaga u ahaado kafaaraggud. (Laawiyiintii 1:4)

*Kafaaraggudka* macnahiisa waa maxay? Waa wax ku saabsan bixinta qiimaha madaxfurashada oo waa loo baahnay sida dambiyada ay u dabooli lahaayeen, lagana nadiifin lahaayeen, loona cafin lahaa. Waqtiga Axdigii hore Ilaah wuxuu u sheegay dadka inuu aqbali doonaa dhiigga laga daadiyo wanan, wanan geesaha [sumallo], ariyo, dibiyo iyo qoolleeyo caafimaadka qabaan bixinta dambigooda darteed. Dhiigga nocaas wuxuu keenaa kafaaraggudka—daboolitaanka dambiga—laakiin ilaa maalintu Ilaah diyaariyay allabari kaamil ah inuu bixiyo qiimaha runta ah sharciga dambiga iyo dhimashada looga baahnaa.


Hadda eeg Qaabiil muxuu Ilaah u hibeenayaa. Waxaa doorasho aad u qurux badan ah miro iyo khudaar! Sida ugu adag u uga shaqeeyay inuu soo saaro qurbaankan! Laakiin dambiyadiisa muu dabooli karin, waayo ma jirin dhiig, iyo dhimasho wax loo bixinayo.

Bal eeg Haabiil iyo qurbaankiisa. Arag murugada hortooda ah! Wanka yar oo la xirxiray oona dhiman doona. Ma arkaysaa Haabiil oo gacantiisa ku haayo wanka madaxiisa? Maxaa yeelay Haabiil wuxuu aamminay Ilaah qorshehiisa, Ilaah wuxuu qaaday Haabiil dambiyadiisa oo dhan, wuxuuna dul saaray wanka. Haabiil wuxuu u mahadcelinayaa RABBIGA inkastoo isaga, Haabiil, u qalmo ciqaabta dhimashada, Ilaah wuxuu aqbalay wanka dhiiggiisa sida dambigiisa u dabooli lahaa.

Sharciga Ilaah wuxuu u baahnaa sidataan kulli dambiileyaasha in lagu ciqaabo dhimasho, laakiin Ilaah, caddaaladdiisa iyo naxariistiisa darteed, wuxuu aqbali lahaa dhimashada wanka baddalkooda. Ilaah wuxuu ugu yeeraa kan "sharciga ku saabsan qurbaanka dembiga" (Laawiyiintii 6:25).

Sharciga qurbaanka dambiga wuxuu Haabiil ka xoreeyay sharciga dambiga iyo dhimashada.

Laakiin ka warran Qaabiil?





# Dhacdada 23

## Aqbalaadda iyo Diidmada

Ma arkaysaa meesha uu Qaabiil allabariga u diyaariyay? Maxaa kor saaran? Khudro qallalan.

Hadda bal eeg Haabiil meeshiisa allabariga. Maxaa kor saaran? Dhiig iyo dambas.

Muxuu Ilaah ka qabaa labadan walaalo iyo cibaadadooda?

> Rabbiguna wuu eegay Haabiil iyo qurbaankiisii; laakiinse Qaabiil iyo qurbaankiisii Rabbigu ma uu eegin. (Bilowgii 4:4-5)

Anaga manala wargelinin siduu Ilaahii u tusiyay aqbalaaddiisa qurbaankii Haabiil iyo diidmadiisa qurbaankii Qaabiil.[10] Kitaabka wuxuu dhahaa keliya:

> Haabiil rumaysad ayuu Ilaah ugu bixiyey allabari aad uga wanaagsan kii Qaabiil, sidaas daraaddeed waxaa loogu markhaati furay inuu xaq yahay, Ilaahna waa ka markhaati furay hadiyadihiisii. (Cibraaniyada 11:4)

Maxaa yeelay wuxuu aamminay RABBIGA iyo qorshehiisa, Haabiil waa la cafiyay, waxaana laga dhigay mid xaq ah. Tani waxay ahayd hadiyaddii Ilaahii u siiyay Haabiil.

Ilaah wuxuu Haabiil dambigiisa kor saaray wanka. Wankii ayaa dhintay Haabiil baddalkiisii. Wankii dhiiggiisa waa la daadiyay, jirkiisana waa la gubay ilaa dambas u ka noqday. Ilaah xanaaqiisii xaq ah kana soo hor jeedo dambiga wuxuu ku dhacay wankii baddalkii Haabiil. Ilaah muxuu ugu farxay Haabiil wankiisa oo la gowracay? Sababta oo ah waxaa uu tilmaamay in Badbaadiye soo socdo oo maalin maalmaha ka mid ah bixin lahaa daynta dambiga dunida.

Sababto ah wuxuu iimaan ku lahaa qorshaha Ilaah, Haabiil wuxuu kula jiray xariir xaq ah Ilaah. Kaddib, markuu Haabiil dhintay, baddalkuu ka fogaani lahaa, wuxuu u tegi lahaa Ilaah, oo hadda u yahay Saaxiibkiis. Sharciga qurbaanka ee dambiga wuxuu ka guulaystay sharciga dambiga iyo dhimashada.

Qaabiil wuxuu abbaaray Ilaah ducadiisa, laakiin wuxuu ka tegay Ilaah sharcigiisa oo sheegaya dambiga waa in loo ciqaaba dhimasho. Qaabiil wuxuu ahaa qof diineed, laakiin ma kula jirin xariir xaq ah Ilaah. Sharciga dambiga iyo dhimashada weli isagii korkiisa ayay saarnayd sida daruur madow. Hadduu aamminin Ilaah iyo qorshehiisa, weligiis muu ogaan lahayn Ilaah inuu yahay Saaxiibkiisa. Wuxuu hor-istaagi lahaa Ilaah sida Xaakinkiisa.

Dadka qaarkood waxay isku dayaan inay difaacaan Qaabiil, iyagoo dhahaya, “Qaabiil wuxuu ahaa beeraley. Wuxuu keenay wuxuu haayay.” Laakiin Ilaah muu rabin waxa u haayay. Qaabiil wuxuu ka ganacsani karay khudraddiisa qaarkood hal wan wanankii Haabiil ka mid ah, ama wuxuu saari karay gacantiisa Haabiil wankiisa, wayna iskula cibaadaysan kareen isla meesha allabariga.

Qaabiil muxuu sameeyn lahaa?

Miyuu toobadkeeni lahaa oo Ilaah ula tegi lahaa qurbaan sax ah?





# Dhacdada 24

## Dilka ugu horreeyay

RABBIGA wuxuu diiday qurbaanka Qaabiil. Isla mar ahaantaas, weli Ilaah wuxuu jeclaaday isaga, wuxuuna ku qalqaaliyay isagii inuu toobadkeeno. Maxay ka dhigan tahay in la toobadkeeno?

Ka soo qaad inaad rabto inaad u safarto magaalo gaar ah. Markaad fushay tariinka, waxaad ogaanaysaa inaad kortay tariin qaldan. Maxaad samaynaysaa? Waxaad qiraysaa qaladkaaga, waxaad ka baxaysaa tariinkan, iyo waxaad fulaysaa tariinka saxan. Saas waa macnaha toobadkeenta.

Toobadkeentu macnaheeda waxaa waaye inaad *baddashid maskaxdaada; inaad ka soo leexatid wax qaldan iyo isku dhiibtid waxa runta ah*. Toobadkeentu Ilaahii hortiisa ma laga wado inay tahay inaan anigu is ciqaabo dambiyadayda dartooda. Macnaha waxaa waaye waa inaan arko dambigayga sida Ilaah u arka.

Ilaah wuxuu rabay Qaabiil inuu toobadkeeno—inuu joojiyo isku halleeynta jidkiisa uuna aammino oona raaco jidka Ilaah.

> Qaabiilna aad buu u cadhooday, wejigiisiina wuu madoobaaday.
>
> Oo RABBIGU wuxuu ku yidhi Qaabiil, Maxaad u cadhoonaysaa? Maxaase wejigaagu u madoobaaday? Haddaad wax wanaagsan samaysid, sow laguma aqbaleen? Haddaadan wax wanaagsana samaynse, dembi illinkuu kuugu gabbanayaa; doonistiisuna aday noqon doontaa, adiguna waa inaad xukuntid isaga. (Bilowgii 4:5-7)

Qaabiil aad buu uga kibray inuu toobadkeeno. *Walaalkiis ayaa ceebeeyay! Isaguna wuxuu iska dheereen lahaa ceebtan, wuxuuna ku soo ceshan lahaa sharafta jidkiisa!*

> Qaabiilna wuxuu ku yidhi walaalkiis Haabiil, Ina keen, aynu duurka tagnee. Waxaana dhacday, markii ay duurka joogeen, in Qaabiil walaalkiis Haabiil ku kacay oo dilay isagii.
>
> RABBIGUNA wuxuu Qaabiil ku yidhi, Walaalkaa Haabiil meeh?
>
> Kolkaasuu yidhi, Ma aqaan: ma anigaa ah walaalkay ilaaliyihiisa?
>
> Kolkaasaa Ilaah ku yidhi, Maxaad samaysay? Codkii dhiiggii walaalkaa ayaa dhulka iiga dhawaaqayaye. (Bilowgii 4:8-10)

Haabiil naftiisa iyo ruuxiisa waxay tageen inay la joogaan RABBIGA, laakiin jirkiisa wuxuu ku noqon lahaa ciidda ilaa maalinta mustaqbalka, markuu Ilaah u baddalayo ciiddaas jir sharaf leh oo ku habboon nolosha daa'imka ah.

Haddaba Qaabiil, Ilaah wuxuu siiyay fursad kale inuu ku toobadkeeno, laakiin wuu diiday.

> Qaabiilna Rabbiga hortiisuu ka tegay. (Bilowgii 4:16)

Ruux caasinimo iyo kibir leh, Qaabiil wuxuu u guuray dhinaca bari, wuxuuna dhisay magaalo. Isagii iyo naagtiisa waxay lahaayeen carruur badan.

Ilmaha ilmahooda sii dhaleen oo haddana sii dhaleen oo haddana sii dhaleen waxay sameeyeen alaabta birta ee ugu horreeysay iyo qalabkii muusiga.

Qaabiil farcankiisa way caqlibadnayeen, laakiin ma garanaynin RABBIGA.





# Dhacdada 25
## Samir iyo Xukun

Toban farcan kaddib markuu Aadan dambaabay, Ilaah wuxuu siiyay warbixin murugsan oo ku saabsan reerka bini-aadanka:

> In dadka sharkiisu ku badan yahay dhulka, iyo…fikirrada qalbigiisu ay shar keliya yihiin had iyo goorba. (Bilowgii 6:5)

Laakiin hal reer oo dunida dusheeda weli waxay aamminsanayeen Ilaah.

> Laakiin RABBIGU Nuux raalli buu ka ahaa.
>
> Oo Ilaah wuxuu Nuux ku yidhi, Intii jidh leh oo dhan dhammaadkoodii aan dhammayn lahaa ayaa gaadhay; waayo, dhulkii waxaa ka buuxsamay dulmi iyaga ka yimid, oo bal eeg, iyagaan dhulka la baabbi'in doonaa. Doonni ka samayso qoryo gofer ah; qowladana ka dhex samee doonnida, daamurna ka mari dusha iyo hoostaba. Waa inaad sidatan u samaysid iyada…." (Bilowgii 6:8,13-15)

Doontan ballaarnayd oo saddexda fooq lahayd, dheererkeedu wuxuu ahaa hal iyo badh labajibbaar ballarka ee garoonka kubbadda waxay lahaan lahayd boos ku filan inay siiso hooy lammaane oo xayawaan kasta ah iyo toddoba lammaane oo xayawaannada qurbaanka dambiga. Doontii ballaarnayd waxay lahaan lahayd nidaamka hawada iyo hal albaab oo wayn.

Hal qarni oo dhan, Nuux iyo naagtiisa, iyo saddexdiisa wiil iyo naagahooda waxay wada dhiseen doonta ballaarnayd. Markuu shaqeeynayay, Nuux wuxuu uga digay dunida xukunka Ilaah oo soo socda, laakiin dadku way ku jeesjeesayeen isaga.

Ugu danbayntii doonta ballaarnayd waa diyaarsanayd. Nuux reerkiisa waxay ka buuxiyeen sahay. Ilaah wuxuu keenay xayawaannada, xamaaratada, cayayaanka, iyo shimbiraha. Waxa hortooda ah markay galeen doonta, iyo ku soo dageen kumaankun qayb-qayb ah!

Nuux iyo reerkiisa way galeen sidaa oo kale. Qof kale miyuu soo galay meesha ammanka? Maya. Oo Ilaah xiray albaabka. Daruuro xanaaqsan ayaa ku wareegsanayeen adduunka, hillaac ayaa birqayay iyo onkod sameenayay guux.

> Isla maalintaas ayaa ilihii moolka weyn biyo ka buqdeen, dariishadihii samadana la furay. Roobkuna wuxuu dhulka ku da'ayay afartan maalmood iyo afartan habeen. (Bilowgii 7:11-12)

Waxay ahayd masiibada ugu xumayd ee ka dhacday taariikhda adduunka. Sideed ruux oo gabbaadsadeen doonta ballaarnayd dhexdeeda mooyaane, bini-aadanimo oo dhan waa la burburiyay. Duni kibirsan oo aan rumaysan waxay barteen runta laakiin xilli dambe.

Diiwaanka cilmiga ku shaqada leh qaabka dhismaha dhulka iyo duqnimada ayuu xaqiijinaya qoraalka Kitaabka. Lamaddegaanka ku yaala Waqooyiga Afrika ilaa buuro silsilad ah oo goglan koofurta Aasiya, bololka badda waxaa laga hindisan karay dunida lamaddegaanka iyo buuraha aadka u wayn.

Ilaah naxariistiisa xaggiisa wuu u dulqaataa, laakiin caddaaladdiisa xaggiisa wuxuu xukumi doonaa dambiga.





# Dhacdada 26

## Bilow cusub

Oo maxaa ku dhacay Nuux iyo reerkiisa, iyo xayawaannadii doonta ballaarnayd ku jiray? Waxaa laga badbaadiyay xukunka Ilaahay.

> Oo Ilaah wuxuu xusuustay Nuux, iyo wixii noolaa, iyo xoolihii doonidii kula jiray isagii oo dhan; oo Ilaah dabayl buu dhulka dul mariyey, biyihiina way dhinmeen. (Bilowgii 8:1)

Doonta ballaarnayd hoos ayay u sabbeeysay, ugu danbayntii ayay ku joogsatay Ararat, oo ah buur aad u wayn oo laba caarad leh Bariga Turkiga.

Saddex mar ayuu Nuux wuxuu u diray qoolleey si ay u raadiso dhul engegan. Marka kowaad qoolleeyda way iska soo noqotay. Marka labaad qoolleeyda waxay kuu soo noqotay Nuux iyada oo afkeeda ku wadata caleen saytuun. Marka saddexaad qoolleeyda ma soo noqonin. Waxay heshay guri! Nuux wuu gartay in la gaaray waqtiga inay ka baxaan doontii ballaarnayd. Hal sano ayaa ka soo wareegtay waqtiga tan iyo intuu daadku bilowday.

Miyaad garanaysaa waxa ugu horreeyay Nuux uu sameeyay, markay reerkiisa iyo xayawaannadu ka soo baxeen doonta ballaarnayd kaddib?

> Nuux meel allabari buu RABBIGA u dhisay; xayawaankii daahirka ahaa iyo haaddii daahirka ahaydba, intuu wax ka qaatay, ayuu allabaryo la gubo ku bixiyey meeshii allabariga dusheeda. Rabbiguna wuxuu uriyey caraftii udgoonayd…. (Bilowgii 8:20-21)

Ilaahay caddaaladdiisa iyo naxariistiisa ma is baddalin. Dambiga weli wuxuu u baahanyahay bixinta dhimashada. Sidaas darteed ayuu Nuux u daadiyay dhiigga xayawaanno aan eed lahayn oona ku gubay jirkooda meeshii allabariga dusheeda, inta u dhaxaysa samada iyo dunida, Ilaah iyo nin dhexdooda. Allabariyaasha noocaas oo kale ah waxay noo tilmaamayaan in Masiixa dambi lahayn. Kani oo maalin imaan lahaa dunida inuu na siin doono bixinta runta ah ee dambiga.

Markii xigtay, Ilaahay wuxuu amar siiyay Nuux iyo reerkiisa:

> "Wax badan dhala, oo tarma, oo dhulka ka buuxsama." (Bilowgii 9:1)


RABBIGA Ilaah ah wuxuuna ku sameeyay adduunka axdi:

> "Waxaan qaansadayda ku dhex dhigay daruurta, waxayna noqon doontaa calaamadii axdiga dhex yaal aniga iyo dhulka. …Biyuhuna dib dambe ma noqon doonan daad baabbi'iya inta jidh leh oo dhan. (Bilowgii 9:13,15)

Waxaa calaamad u ahayd axdigiisa, Ilaah wuxuu soo bandhigay qaansoroobaad quruxsan, wuxuuna kor yeelay daruuraha cirka. Ilaah wuxuu ballanqaaday inuuna mar dambe ku ridi doonin daad koonka adduunka oo dhan.

Qaansoroobaadka wuxuu noo xasuusinayaa hadday tahay ciqaab ama difaaco, Ilaahay had iyo goor wuxuu fulinayaa ballankiisa. Had iyo goor.





# Dhacdada 27
# Munnaaraddii Kibirka

Xataa markii lagu barakeeyay bilow cusub, dhowr farac gudahood dadka inta badan waxay ka leexdeen jidka RABBIGA inay jidkooda raacaan. Tusaale ahaan, Ilaah wuxuu amray bini-aadanka inay kala firdhaan oo “dhulka ka buuxsamaan” (Bilowgii 1:28; 9:1). Oo haddaba bini-aadanka muxuu sameeyay?

Qorniinku wuxuu noo sheegaya.

> Dhulka oo dhammuna wuxuu ahaa isku af iyo isku hadal keliya.
>
> Waxaana dhacay markay xagga bari u sii socdaaleen inay waddankii Shincaar meel bannaan ka heleen [xilliga-maantay ah Iraq]; oo halkaas ayay degeen. Oo waxay isku yidhaahdeen, Ina keena, aynu leben [bulukeeti] samaysannee, oo aynu aad u dubnee.
>
> Oo waxay dhagaxa meeshiisa u haysteen leben [bulukeeti], nuuradda meesheedana dhoobo.
>
> Oo waxay yidhaahdeen, Ina keena, aynu magaalo dhisannee, iyo munaarad dhaladeedu samada gaadho, oo aynu magac yeelannee, waaba intaasoo aynu dhulka dushiisa oo dhan ku kala firidhnaaye. (Bilowgii 11:1-4)

Intay ammaani lahaayeen magaca aadka u wayn ee RABBIGA, dhisayaasha magaaladan waxay rabeen inay dadku iyaga ammaanaan. Sida Shayddaanka waxaa iyaga xakameeyay ruux ku salaysna kibir iyo caasinimo.

Inay niyeystaan dhisidda “munaarad dhaladeedu samada gaadho,” waxay ahaayeen sida dad diineed oo maanta rajaynayaan inay ku gaaraan jannada dadaalkooda dartiisa. Sida Qaabiil, dadkaasi waxay ahaayeen dad diineed, laakiin waxay iska dhegatireen jidka Ilaah oo dambidhaafka iyo xaqnimada. Maysan aamminin Ilaah iyo qorshehiisa.

Oo RABBIGA Ilaah ah wuxuu yiri,

> “Ina keena, aynu degnee, oo halkaas aynu afkooda iskaga qasnee, yaan midna midka kale hadalkiisa garanine.”
>
> Kolkaasaa Rabbigu halkaas ka kaxeeyey oo ku kala firdhiyey dhulka dushiisa oo dhan, oo dhisiddii magaaladii way joojiyeen. Sidaas daraadeed magaceedi waxaa loo bixiyey Baabel, maxaa yeelay, halkaasaa Rabbigu afkii dhulka oo dhan iskaga qasay; oo halkaasuu Rabbigu ka kaxeeyey iyagii oo ku kala firdhiyey dhulka dushiisa oo dhan. (Bilowgii 11:7-9)

Inuu siiyay reer kasta ama qabiil kasta luqado kala duduwan, RABBIGA ayaa joojiyay mashruucooda dhismaha. Dadka ma lahayn doorasho waa inay ka guuraan Baabel oo ay ka buuxsamaan dunida, sidaa Ilaah ku amray.

Dadka ma dhammaynin dhisidda munnaaraddoodii,
laakiin qorshooyinka Ilaah waxay ku jireen jadwal nidaamsan.





# Dhacdada 28

## Ilaah oo u yeeraya Ibraahim

Toban farcan baa soo maray tan iyo waqtigii nebi Nuux kaddib. Shayddaanku wuxuu ku lahaa quruumaha xukun adag, ama waa siday u ekayd.

Intay aammini lahaayeen RABBIGA, dadku waxay aammineen diimohooda. Quruumaha qaarkood waxay caabudeen qorraxda halkii ay ka aammini lahaayeen kii sameeyay. Kuwa kale waxay u sujuudeen bisha.

Waxay ahayd qiyaastii sanadkii 1925 Ciise ka hor.

Dalka waqooyiga-bariga Carabta waxaa ku noolaa nin duq ah oo la oran jiray Aabraam. Kaddib Ilaah wuxuu ku baddalay magaciisa Ibraahim, macnaha waa *Aabbaha farcan badan*.

Ibraahim wuxuu ahaa 75 jir. Saarah, naagtiisa, waxay ahayd 65 jir oo ma lahayn ilmo. Waalidiintooda iyo deriskooda waxay ahaayeen dad caabudi jireen sanam. Waxay caabudeen waxyaalo la abuuray halkay cabuudi lahaayeen Kii abuuray.

Rabbigu wuxuu Aabraam ku yidhi,

> "Ka tag waddankaaga, iyo xigaalkaaga, iyo reerkaaga aabbahaaba, oo dalka aan ku tusi doono u kac."
>
> "Oo quruun weyn baan kaa dhigi doonaa, oo waan ku barakayn doonaa, magcaagana waan weynayn doonaa; oo waxaad noqon doontaa barako; oo waan barakayn doonaa kuwa kuu duceeya, kan ku habaarana waan habaari doonaa: oo qabiilooyinka dhulka oo dhammu adigay kugu barakoobi doonaan." (Bilowgii 12:1-3)

RABBIGA wuxuu rabay inuu axdi la sameeyo Ibraahim. Hadduu ka tagi lahaa aabbihiisa reerkiisa, wuxuuna u kaci lahaa dal aan la ogayn, RABBIGA wuxuu ku sameeyn lahaa laba wax oo aad u wayn:

1. Ilaah wuxuu ka dhigi lahaa Ibraahim aabbaha quruun aad u wayn.
2. Xaggiisuu quruuntaas cusub, Ilaah wuxuu ku barakeeyn lahaa dad ku nool quruun kasta.

Hadduu Ibraahim aammini lahaa ee raaci lahaa RABBIGA, wuxuu noqon doonnaa aabbaha quruun oo ka imaan doonaan nebiyada, Qoraallada iyo Badbaadiyaha dunida.

Ibraahim muxuu sameeyay?

> Ibraahim kolkii loo yeedhay, rumaysad buu ku addeecay inuu tago meeshuu ka heli lahaa dhaxalka, wuuna tegey isagoo aan garanaynin meeshuu ku socdo. (Cibraaniyada 11:8)

Maysan u fududayn Ibraahim iyo naagtiisa inay ka tagaan qaraabadooda oo ay dusha aadiyaan diinta reerka. Sidaas ay tahayna, waxay dooranayeen inay u dulqaataan dhaleecaynta bulshadooda si ay u raacaan Ilaaha runta ah. In Ilaah la aammino oo la addeeco ma fududa had iyo goor, laakiin had iyo goor waa mida ugu fiican.





# DHACDADA 29
# BALLAN DHOWRAHA

Ibraahim iyo naagtiisa way duqoobeen, carruurna ma lahayn. Isla markaasna RABBIGA wuxuu ka ballanqaaday inuu Ibraahim ka dhigi doonoo aabbaha quruun wayn.

Siduu Ibraahim uga ficil celiyay ballanka Ilaah "ee aan suurtoobaynin"?

> Ibraahimna Ilaah buu rumaystay, oo waxaa isaga loogu tiriyey xaqnimo, oo waxaa loogu yeedhay saaxiibkii Ilaah. (Yacquub 2:23; Bilowgii 15:6)

Sida Aadan farcankiisa oo dhan, Ibraahim wuxuu ahaa dambiile, laakiin sida Haabiil iyo Nuux, Ibraahim wuxuu Ilaah ku hibeeyay allabaryo dambiga dartiisa. Maadaama uu Ibraahim rumaystay RABBIGA iyo ballamadiisa, Ilaah wuxuu ku tiriyay xaqnimada Ibraahim qoraalkiisa samada. Wuxuuna siiyay hadiyad oo nolol daa`im ah. Saarahna waxay aammintay RABBIGA iyo Ilaah wuxuuna ku tiriyay mid xaq ah.

Laakiin way adagtahay inuu sugo.

Markay 10 sano joogeen dalka Falastiin, ku rajo dheeraayeen oona ku ducaysanayeen inay Saarah uur yeelato, siduu Ibraahim ku helo wiil, waxay go'aansadeen inay Ilaah "caawiyaan" inuu fuliyo ballankiisa. Raacidda dhaqan maxalliga ah, Saarah waxay Ibraahim siisay shaqalaheeda oo masriyadda ahayd oo la oran jirtay Haagaar. Wuu la seexday Haagaar, waxayna qaaday uur, waxayna dhashay wiil. Waxay u bixiyeen Ismaaciil.

Qiyaastii 13 sano kaddib, markuu Ibraahim ahaa 99 jir, Saarahna waxay ahayd 89 jir, Ilaah Qaadirka ah wuxuu u muuqday iyaga mar kale. Wuxuu u sheegay inay lahaan doonaan wiil oo ay u bixini doonaan Isxaaq. Waxaa kale uu RABBIGA u sheegay Ibraahim,

> Xagga Ismaaciilna…oo bal eeg, isaga waan barakeeyey…Laakiin axdigayga waxaan ku adkayn doonaa Isxaaq kan Saarah kuu dhali doonto sannadda soo socota xilligan oo kale." (Bilowgii 17:20-21)

Hal sano kaddib, Saarah waxay dhashay Isxaaq, wiilka ballanka.

Bal eeg sawirka. Ma arkaysaa habeen Ibraahim iyo naagtiisa oo fiirinayaan cirka? Waxay u mahadcelinayaan RABBIGA dacaadnimadiisa. Kaddib, Haagaar iyo Ismaaciil waa la cayriyay, laakiin Ilaah iyagana wuxuu uu sameeyay wanaag.

> Ilaahna wiilkii buu la jiray; wuuna koray; oo cidladuu degay, wuxuuna noqday qaansoole. Wuxuuna degay cidladii Faaraan: hooyadiis baana dhulka Masar naag uga qaaday. (Bilowgii 21:20-21)

Ismaaciil wuxuu noqday aabbihii dadka Carabta xoogga badan, kuwaaso Ilaah ku barakeeyay siyaabo badan.

Xagga Isxaaq, isagu wuxuu joogay guriga, wuxuu ilaalinayay lo'da iyo xaynta aabbihiisa. Mar mar Isxaaq wuxuu ku caawinayay aabbihiisa inuu doorto wan caafimaad leh, inuu dilo, oona ku gubo meesha allabariga dusheeda dambigooda dartiis. Laakiin midkoodna Isxaaq iyo aabbihiisa ma qiyaasi karin allabariga uu Ilaah mardhow uga baahnaan doono.





# DHACDADA 30

## IMTIXAANKA KAMA DAMBAYSTA AH

Ilaah wuxuu qorsheeyay inuu isticmaalo Ibraahim iyo wiilkiisa si uu dunida ugu muujiyo waxyiyo iyo sawiro ku saabsan qorshehiisa si uu uga badbaadiyo dambiileyaasha dambi iyo dhimasho.

Ilaah sida oo kale wuxuu qorsheeyey inuu jirrabo Ibraahim iimaankiisa ee aadka u sarreeya. Ilaah wuxuu waydiiyay isaga inuu sameeyo wax aad u daran, wax aan suurtagal ahayn ilaa imtixaanka u ka dhammaaday.

Heerkan noloshiisa Ibraahim wuxuu ku lahaa iimaan buuxa RABBIGA. Ibraahim wuxuu garanayay Ilaah. Ibraahim wuxuu garanayay Ilaah inuu wanaagsan yahay oona caaddil yahay. Haddaba, miyuu Ibraahim awoodi karay inuu aammino oo addeeco xataa hadduu Ilaah isaga waydiiyo inuu sameeyo wax u ek qalad?

Tani waa qiso, toos ah oo ka timid Qoraallada:

> Oo waxaa dhacay waxyaalahaas ka dib, in Ilaah jirrabay Ibraahim,
>
> oo uu ku yidhi, Ibraahimow!
>
> Isna wuxuu yidhi, Waa i kan.
>
> Markaasuu ku yidhi, Hadda kaxee wiilkaaga keligiis ah, kan aad jeceshahay, oo ah Isxaaq, oo u kac dalka Moriyaah;[11] oo halkaas isaga sida allabari la gubo ku dul bixi buuraha middood oo aan kuu sheegi doono.
>
> Oo aroortii hora Ibraahim kacay, oo wuxuu kooraystay dameerkiisii, oo wuxuu kaxaystay laba ka mid ah dhallinyaradiisii, iyo wiilkiisii Isxaaq; qoryihiina allabariga la gubo wuu jeexjeexay, wuuna kacay, oo wuxuu tegey meeshii Ilaah u sheegay.
>
> Maalintii saddexaad ayuu Ibraahim indhihiisa kor u taagay, markaasuu meeshii oo ka fog arkay. Ibraahimna wuxuu raggiisii dhallinyarada ahaa ku yidhi, Idinku halkaan dameerka la jooga, aniga iyo wiilkuna halkoo baannu tegaynaa oo Ilaah ku soo caabudaynaa, dabadeedna waannu idinku soo noqonaynaa.
>
> Ibraahimna wuxuu qaaday qoryihii allabariga la gubo, oo wuxuu saaray wiilkiisii Isxaaq, isna wuxuu gacantiisa ku qaaday dabkii iyo mindidii; markaasay labadoodiiba israaceen.
>
> Isxaaqna waa la hadlay aabbihiis Ibraahim, oo yidhi, Aabbow.
>
> Isna wuxuu yidhi, Waa i kan, wiilkaygiiyow.
>
> Markaasuu ku yidhi, Bal eeg, waa kuwan dabkii iyo qoryihii, laakiinse meeh wankii allabariga la gubo loo bixin lahaa?"
>
> Ibraahimna wuxuu yidhi, Ilaah qudhiisaa keeni doona wankii allabariga la gubo loo bixin lahaa, wiilkaygiiyow;
>
> Saas daraaddeed labadoodiiba way israaceen. (Bilowgii 22:1-8)





# Dhacdada 31

## Wiilka xukumnaa

Ma maqashay wuxuu Ibraahim u sheegay shaqaalehiisa intay isaga iyo wiilkiisa buurta allabariga fuulin ka hor?

> “Waanu…soo caabudaynaa, dabadeedna waannu idinku soo noqonaynaa.”

Siduu Ibraahim wiilkiisa *ku soo noqoni* karay, haddu isaga yahay midka la dilaayo oona jirkiisa la gubi lahaa? Qorniinka wuxuu dhahayaa,

> Wuxuu ku tirinayay in Ilaah ka kicin karo xataa kuwii dhintay. (Cibraaniyada 11:19)

Ilaah wuxuu ballanqaaday inuu Isxaaq ka dhigayo aabbihii quruun cusub (kaaso xaggiisa ka imaan lahaa Badbaadiyaha la ballanqaaday). Ilaah been ma sheegi karo. Ibraahim intaas baa ku filanayd.

Isxaaq muxuu isla markaas ku fikiray? Wuxuu ogaay inuu yahay dambiile oona u qalmo inuu dambigiisa u dhinto. Waxaa kaloo uu ogaa inuu Ilaah aqbali lahaa baddalkiisa. *Laakiin maanta waxay u socdeen meesha allabariga wan geesaha [sumal] ama wan la’aan? Wax macna ah ma sameeynayso!* Oo Isxaaq wuxuu ku yiri aabbihiis,

> Waa kuwan dabkii iyo qoryihii, laakiinse meeh wankii allabariga la gubo loo bixin lahaa?
>
> Ibraahimna wuxuu yidhi, Ilaah qudhiisaa keeni doona wankii allabariga la gubo loo bixin lahaa, wiilkaygiiyow.

Hadda aan sii wadno qisada.

> Oo waxay yimaadeen meeshii Ilaah isaga u sheegay; Ibraahimna meeshaasuu ka dhisay meeshii allabariga, qoryihiina wuu hagaajiyey, markaasuu xidhay wiilkiisii Isxaaq, oo meeshii allabariga saaray qoryihii dushooda.
>
> Ibraahimna gacantiisii buu fidiyey, oo mindidii buu u qaaday inuu wiilkiisii dilo.
>
> Markaasay malaa’igtii Rabbigu samada uga yeedhay isaga, oo waxay ku tidhi, Ibraahimow, Ibraahimow!
>
> Kolkaasuu yidhi, Waa i kan.
>
> Markaasay ku tidhi, Gacantaada ha saarin wiilka, waxbana ha ku samaynin: waayo, hadda waan garanayaa inaad Ilaah ka cabsatid, maxaa yeelay, igama aadan lexejeclaysan wiilkaaga, kaas oo ahaa wiilkaaga keligiis ah. (Bilowgii 22:9-12)

Ibraahim iyo wiilkiisa way farxeen! Laakiin maxaa kuu dhacay allabariga shardiga ah?

> Markaasaa Ibraahim indhihiisii kor u taagay, oo wax fiiriyey, oo wuxuu dabadiisa ku arkay wan geesaha [sumal] kayn kula jira. (Bilowgii 22:13)

Ibraahim wiilkiisa waa laga badbaadin lahaa ciqaabta dhimashada.

Ilaah wuxuu siiyay baddal!





# Dhacdada 32
## Sawiro iyo Waxyiyo

Siduu Ilaah ku badbaadiyay wiilkii xukumnaa ee Ibraahim? Wuxuu siiyay xayawaan aan iin lahayn oo eedlaawe ah inuu u dhinto meeshiisa.

> Markaasaa Ibraahim indhihiisii kor u taagay, oo wax fiiriyey, oo wuxuu dabadiisa ku arkay wan geesaha [sumal] kayn kula jira. Markaasaa Ibraahim tegey oo wankii soo kaxeeyey, oo wuxuu u bixiyey allabari guban meeshii wiilkiisa. (Bilowgii 22:13)

Dhacdooyinkan oo dhan waxay muujinayeen Ilaah qorshehiisa inuu u soo dirayo dunida Badbaadiye quduus ah oo fulin lahaa shardiga sharciga dambiga iyo dhimashada, oo badbaadin lahaa dambiileyaasha oo ka imadeen quruun kasta dunida dusheeda ah.

> Ibraahimna meeshaas wuxuu u bixiyey Yehowah Yireh [Rabbiga Siin Doonaa]; xataa ilaa maanta waxaa la yidhaahdaa, Buurta Rabbiga ayaa lagu arki doonaa. (Bilowgii 22:14)

Muxuu Ibraahim ugu bixiyay buurta *RABBIGAA Siin **Doonaa** baddalka RABBIGA Wuu **Siiyay**?*

Ilaah miyuu iska siiyay madaxfurasho?

Marku u bixiyay buurta *RABBIGA Siin **doonaa***, nebi Ibraahim wuxuu waxsheegay maalinta, markuu isla buurtan Ilaah qudhiisa ayaa siin lahaa Allabari dhiig leh oo aad u qaali ah oo Ilaah baa aqbali lahaa bixinta buuxda ee daynta dambiga dunida, in mid kastoo rumaystaa Allabarigaas uusan lumin, laakiinse uu lahaado nolosha weligeed ah.

Qiyaastii 1900 oo sano markuu nebi Ibraahim hibeeyay wankii meeshii allabariga dusheeda, Badbaadiyaha la ballanqaaday midkii ballanka qudhiisa wuxuu gadaal-u-fiirin doonaa dhacdooyinkii taariikhiga ah, wuxuuna dhahi doonaa,

> Aabbihiin Ibraahim waa ku reyreeyey inuu maalintayda arko, wuuna arkay oo ku farxay. (Yooxanaa 8:56)

Markuu qiiqa wanka u kacay samada, Ilaah ayaa siiyay Ibraahim eegidda allabari ee la gubi doono mustaqbalka, kaas baa ku noqon lahaa allabariga isla fiidii buurta. Si kadis ah, Ibraahim jawaabta su'aasha wiilkiisa: Aaway wanka? Waxay qaadatay macno qotodheer.

> Ilaah qudhiisaa keeni doonaa wankii allabariga la gubo loo bixin lahaa, wiilkaygiiyow. (Bilowgii 22:8)

Xagga Ibraahim iyo wiilkiisa weli Ilaah ma siinin wanka.
Wuxuu siiyay wan geesaha [sumal].

Aaway *Wankii*?

Waqtiga saxda ah, Ilaah qudhiisa ayaa siin doonaa jawaabta.





# Dhacdada 33

## Ilaah daacad ah oo quduus ah

Ma xasuusanaysaa labada ballamood oo waawayn oo RABBIGA ka ballanqaaday Ibraahim? Ugu horreeyntii Ilaah wuxuu yiri:

> Oo quruun weyn baan kaa dhigi doonaa. (Bilowgii 12:2)

Ilaah wuxuu fuliyay eraygiisa. Ibraahim wuxuu dhalay Isxaaq, Isxaaq wuxuu dhalay Yacquub, iyo Yacquub wuxuu dhalay toban iyo laba wiilal oo reerkooda waxay noqdeen toban iyo laba qabiilooyinka Israa'iil. Ilaahna wuxuu kale yiri:

> Oo qabiilooyinka dhulka oo dhammu adigay kugu barakoobi doonaan. (Bilowgii 12:3)

Ilaahna wuxuu fulin lahaa qaybtaas ballankiisa sidaa oo kale. Markuu la shaqeeynaayo quruun khaas ah—oo badanaa caasi ahaa—Ilaah wuxuu rabay inuu tuso dadka dunida dusheeda oo dhan siduu Isagu yahay iyo sida dambiileyaasha xaggiisa u imaan karaan. Mar kasta markuu Ilaah difaacay quruuntan, wuxuu difaacayay qorshehiisa inuu barakeeyo adiga iyo aniga—waayo waa quruuntan nebiyada, Qoraallada Quduuska iyo Badbaadiyaha la ballanqaaday ay ka imaan doonaan. Ilaah qorshehiisa qarsoon horey ayuu u sii socday.

Qiyaastii 1500 oo sano Ciise ka hor, Ilaah wuxuu u yeeray Muuse, oo ah farcankii Ibraahim inuu noqdo nebigiisa. Muuse wuxuu qoray shanta kitaab ee ugu horreeysa Kitaabka Quduuska dhexdiisa. Ilaahna wuxuu isticmaalay Muuse inuu hoggaamiyo saddex milyan oo farcamadii Ibraahim ahaa inuu ka kaxeeyo addoonnimadii oo ay ku jireen afartii qarni. Ilaah qudhiisa wuxuu ku hoggaamiyay iyaga inay sii dhex maraan lamaddegaanka khatarka ah. Ilaah wuxuu u sameeyay tiir daruur leh inuu siiyo har maalinnimada iyo tiir dab leh inuu siiyo iftiin habeennimada. Gacantiisa xoogga badan wuxuu ugu furay jid fakad ah Badda Cas, wuxuuna siiyay iyaga rooti oo ka yimid samada iyo biyo ka yimid dhagax, oo wuxuu keenay iyaga Buurta Siinay.

Halkaas buurta salka Ilaah wuxuu u sheegay dadka,

> Oo waxaad ii ahaan doontaan boqortooyo…iyo quruun quduus ah! (Baxniintii 19:6)

Ilaah wuxuu rabay quruuntan inay noqoto quduus: gooni buu u dhigtay oo wuxuu ka duway quruumaha kale oo ku wareegsan. Laakiin dadka ma fahmin macnaha in la noqdo quduus. Ma isku arkaan dambiileyaal aan awood lahayn. Waxay umalaynayeen inay si-uun uu kasban kareen Ilaah axsaankiisa. Si ay u bartaan cashar ku saabsan caradiisa gubanaysa ee lid ku ah dambiga, RABBIGA wuxuu ka soo degay oo wuxuu soo bandhigay dhulkoo ruxanaya oo dab ka holcaya oona buun ka qaylinaya.

> Oo Buur Siinay dhammaanteed way qiiqaysay, maxaa yeelay, Rabbi baa dusheeda ku soo degay, isagoo dab ku dhex jira, oo qiiqeediina kor buu u baxay sida qiiq foorno oo kale, oo buurtii oo dhammuna aad bay u gariirtay. Oo markii buunkii codkiisii aad iyo aad u sii weynaaday ayaa Muuse hadlay, Ilaahna kolkaasuu cod ugu jawaabay. (Baxniintii 19:18-19)

Ilaah wuxuu siiyay Aadan hal amar. Wuxuu u dhowaaday inuu siiyo quruuntan cusub toban amar.





# Dhacdada 34
# Tobanka Amar

Inta badan dadka quruunta waxay umalaynayeen inay aad ugu wanaagsan yihiin inay noqon karaan dadka Ilaah. Sidaa daraaddeed RABBIGA wuxuu siiyay iyaga Tobanka Amar, ugu horreeyntii codka sida onkodka ah baa ka yimid Buurta Siinay, kaddibna laba loox oo dhagax ah.

Aan akhrino Tobankii Amar (dhinaca midigta, ka soo kooben Baxniintii 20).

Ilaah wuxuu u sheegay Muuse waa inay addeecaan tobankii amar oo dhan sii kaamil ah.

> Inkaaru ha ku dhacdo ku kasta oo aan adkayn sharcigan erayadiisa inuu sameeyo. (Sharciga Kunoqoshadiisa 27:26)

Sidee kula tahay dadka inay dareemeen, markay maqleen dadkan tobankii amar? Miyaad umalaynaysaa inay weli umalaynayeen inay yihiin dad aad u wanaagsan? Adigana iska warran? Miyaad umalaynaysaa inaad aad u wanaagsan tahay inaad ku noolaato boqortooyada kaamilka ah ee Ilaah?

Akhri mar kale *sharciga kowaad*. Ilaah miyaad ugu horreeysiisaa mar walba noloshaada? Haddaad sameeynin, waxaad ku guuldarraysatay inaad fuliso sharcigan. Akhri *tirada shanaad*. Haddaad weligaa caasisay aabbahaaga ama hooyodaada, waxaad ku eedaysan tahay Ilaahii hortiisa. Hadda bal fiiri *sharciga siddeedaad*. Haddaad weliga qaadatay wax aadan lahayn ama aad khiyaameesay imtixaan, waxaad jabisay sharcigan. Weligaa been ma sheegtay? Markaas ma aadan addeecin *sharciga tirada sagaalaad. Amarka ugu dambeeya* wuxuu noo sheegayaa inay tahay qalad xataa inaad damacdo wax u qof kale iska leeyahay. Ilaah wuxuu arkaa dambiga gudaheenna ku jira.

Immisaa dambiyood ayay galeen oo ku burburiyeen xariirka Aadan iyo Xaawa la lahaayeen Ilaah? *Hal keliya*. Ilaah heerkiisa oo kaamilka ah ma is baddalin.

> Ku alla kii sharciga oo dhan xajiya oo qaynuun keliya ku gafa, kulli wuu ku eedaysan yahay. (Yacquub 2:10)


Ilaah waa quduus, mana iska dhegatiri karo dambiga. Sideed jeclaan lahayd inaad qol kula qaybsato doonfaar dhintay oo jirkiisu urayo? Kaasi waa dambigeenna Ilaah hortiisa. Inaad iskaga buufiso baraafuun jirka uraya ma nadiifin lahayn qolka, sida oo kale dadaalo diineed ma nadiifin karo qalbigeenna.

Siday muraayad i tusayso wasakhda ku taalo wejigayga, Ilaah sharcigiisa wuxuu i tusayaa dambiga oo qalbigayga ku jiro. Sidaynaan muraayadda u nadiifin karin wejigayga, Tobanka Amar ma nadiifin karaan qalbigayga.

> Maxaa yeelay, shuqullada sharciga ninna xaq ku noqon maayo Ilaah hortiis, waayo, sharciga ayaa lagu gartaa dembiga. (Rooma 3:20)

Si walba aan umalayno inaan wanaagsan nahay, ma nihin kuwo wanaag ku filan leh si aan ula noolaano Ilaaha ku jira jannada.

Waxaan u baahan nahay Badbaadiye.


1. Aniga mooyaane ilaahyo kale waa inaanad lahaan.
2. Waa inaanad samaysan sanam xardhan...waayo, anigaa ah Rabbiga Ilaahaaga ah.
3. Waa inaanad magaca Rabbiga Ilaahaaga ah si been ah ugu hadal qaadin.
4. Xusuuso maalinta sabtida, inaad quduus ka dhigto.
5. Aabbahaa iyo hooyadaa maamuus.
6. Waa inaanad qudh gooyn.
7. Waa inaanad sinaysan.
8. Waa inaanad waxba xadin.
9. Waa inaanad deriskaaga marag been ah ku furin.
10. Waa inaanad damcin naagta deriskaaga... ama waxa deriskaagu leeyahay oo dhan.



# DHACDADA 35
## MATAALLO KALE

Tobanka Amar waxay siiyeen quruunta cusub heerka cad ee xaqa iyo baadilka. Taasi waxay ahayd wax fiican. Laakiin Ilaah Sharcigiisu haddana wuxuu keenay war xun. Waxaa loo muujiyay dadka ku jiraan dhibaatooyin waawayn. Dambigooda dartiis waa inay kulligooda dhintaan oo Ilaah ka fogaadaan.

Warka wanaagsan wuxuu ahaa inuu RABBIGU weli aqbali lahaa daadinta dambiga wananka, dibiyaha, orgiyada, iyo qoolleeyada inay daboolaan dambiyadooda. Oona, isla maalintii markuu Ilaah onkoday Tobankiisa Amar, Ilaah wuxuu u sheegay Muuse,

> Meel allabari waa inaad samaysaa…oo waa inaad dusheeda iigu bixisaa qurbaannadaada la gubo. (Baxniintii 20:24)

Ma arkaysaa Muuse oo gacantiisa ku hayo wanka madaxiisa? Ma arkaysaa dadka u laacayaan gacmahooda xagga wanka? Waayo waxay aammineen Ilaah iyo jidkiisa dambidhaafka, dambigooda waxaa dusha laga saaray wankii eed-laawaha. Markaas wanka waxaa lagu dili lahaa meeshii allabariga. Dhiiggaas la daadiyay wuxuu dabooli lahaa dambiyada dadka. Kaddib, jirka xayawaanka waa la gubi lahaa ilaa u dambas ka noqdo. Dambaska wuxuu tusaa dadka wuxuu Ilaah ku sameeyay dambiyadooda. In la cafiyay!

Laakiin nidaamka hibeynta dhiigga xayawaanka dambiga lagu bixiyo dambidhaafka dambiyada wuxuu ahaa tusaalaha keliya ee runta Ilaah u baahnaa.

> Waayo, sharcigu wuxuu leeyahay hooska waxyaalaha wanaagsan oo iman doona, laakiin ma leh suuradda waxyaalahaas qudheeda. Oo caabudayaasha marnaba kaamil kagama uu dhigi karo allabaryo sannad walba had iyo goor la bixiyo. Haddii kale miyaan la joojiyeen in allabaryo la bixiyo? Maxaa yeelay, caabudayaashu, iyagoo mar la nadiifiyey, mar dambe dembiyo iskama ay garteen.
>
> Laakiin allabaryadaas waxaa sannad walba lagu xusuustaa dembiyo. Waayo, ma suurtowdo in dibiyo iyo orgiyo dhiiggoodu dembiyo qaado. (Cibraaniyada 10:1-4)

Xayawaannadu ma laga abuurin Ilaah araggiisa.

Qiimaha wanka ma la sinna qiimaha ninka. Sida aadan ugu siin karin baabuur carruureedka ninka iibiyaa baabuurta oo aadan ugu siin karin baabuur run ah. Sidaa oo kale, dhiigga wanka ma bixin karo qiimaha qaaliga ah oo loo baahan yahay in loogu bixiyo sharciga dambiga iyo dhimashada.

Waxaa loo baahnaa allabari ka wanaagsan.

Inkastoo allabariyada xayawaanka qaadi karin daynta dambiga dunida, waxay dambiileyaasha siiyeen mataal ku saabsan Kii oo qaadi karay.





# DHACDADA 36
## WAXYIYO KALE

Markuu waqtiga imaatinka Badbaadiyaha aad iyo aad u soo dhowaaday, RABBIGA wuxuu u sheegay nebiyadiisa inay ka qoraan waxyiyo[12] badan oo ku saabsan Masiixan-Boqorka. Waxaa jira ballamahaas qaar oo qadiimi ah:

*Gabadh bikrad ah baa uuraysan doonta, oo waxay dhali doontaa wiil. . . .*

*— Nebi Ishacyaah 7:14*

*Laakiinse adigu Beytlaxam. . .waxaa adiga iiga ka soo bixi doona mid taliye ka noqon doona, kaasoo bixitinkiisu ahaa waa hore, iyo tan iyo weligiis.*

*— Nebi Miikaah 5:2*

*Waayo, waxaa inoo dhashay ilmo, waxaa layna siiyey wiil. . .oo magaciisa waxaa loo bixin doonaa Ka Yaabkaleh. . .Ilaaha Xoogga leh. . .Amiirka Nabadda.*

*— Nebi Ishacyaah 9:6*

*Ilaahiinnu wuu iman doonaa. . .wuuna idin badbaadin doonaa. Oo markaasaa kuwa indhaha la' indhahoodu furmi doonaan, oo kuwa dhegaha la' dhegahooda furka laga bixin doonaa. Oo markaasaa ninkii curyaan ahu wuxuu u boodboodi doonaa sida deerada oo kale. . . .*

*— Nebi Ishacyaah 35:4-6*

*Isaga sidii wan la qalayo baa loo kexeeyey. . .*

*— Nebi Ishacyaah 53:7*

*Oo waxay iga mudeen gacmaha iyo cagaha.*

*— Nebi Daa'uud, Sabuurkii 22:16*

Badbaadiyihii la ballanqaaday wuu soo socday!
Laakiin goorma? Yuu ahaan doonaa?
Sidee waxyiyahan loo fulin doonaa?



# Qaybta 2

## Boqorka wuxuu fulinayaa Qorshehiisa

— AXDIGA CUSUB —



# DHACDADA 37

## QISADA BOQORKA WAY SOCOTAA

Sidee ayaad uga heshay qaybta kowaad Boqorka kitaabkiisa? Maxaad ka baratay Axdigii Hore?

Axdiga macnahiisa waa *heshiis* ama *wacad*. Goor hore markuu Ilaah siiyay Axdiga Cusub, wuxuu yiri,

> Bal eega, maalmihii waa imanayaan…oo anigu axdi cusub baan la dhigan doonaa. (Yeremyaah 31:31)

Axdigii kowaad dhexdiisa u la galay dadkiisa, Ilaah wuxuu siiyay iyaga sharciyo badan inuu tuso iyagii quduusnimadiisa iyo dambigooda. Wuxuuna siiyay iyaga tusaalooyin iyo waxyiyo badan oo ku saabsan Badbaadiyaha imaanayaa.

Axdigii hore nebiyadu waxay sheegeen: Boqorka-Masiixa wuu imaan *doonaa*. Laakiin axdigan cusub waxaan ka akhrinaynaa: Boqorka-Masiixa wuu *imaaday*!

Axdiga Cusub waxaa ku jira *Injiil*. Luqada Arabi sidoo kale waxaa la yiraahda Injiil. Erayga macnahiisa waa *War Wanaagsan*. Injiilka wuxuu ku bilaabmayaa erayadan:

> Kanu waa kitaabkii abtirsiinyada Ciise Masiix, ina Daa'uud, ina Ibraahim. Ibraahim wuxuu dhalay Isxaaq, Isxaaqna wuxuu dhalay Yacquub ….
> (Matayos 1:1-2)

Magacba magac bay Qorniinku u diiwaangeliyaan sida silsilad aan jabin farcamaddii Ibraahim ilaa Ciise. Ilaah wuxuu ilaalin doonaa ballankiisa inuu barakeeyo quruumaha oo dhan inuu ka soo diraayo Badbaadiyaha xagga farcanka Ibraahim.

Axdiga Cusub waxaa ku jira afar kitaab oo Injiil ah. Muxuu u yahay afar? Muxuu u ahaani waaye hal keliya? Axdigii Hore dhexdiisa Ilaah wuxuu u sheegay Muuse,

> Wax kastaba ha lagu adkeeyo afka laba markhaati ama saddex markhaati.
> (Sharciga Kunoqoshadiisa 19:15)

Si loo xaqiijiyo qisadiisa iyo farriintiisa, Ilaah wuxuu doortay, laba ama saddex keliya ma aha, laakiin afar qof inay qoraan warbixinno oo kale duwan oo ku saabsan nolosha Masiixa. Magacooda waa Matayos, Markos, Luukos iyo Yooxanaa. Sida afar wariye oo wartabinaaya isku hal dhacdo, mid kasta wuxuu sheegayaa qiso isku mid ah, laakiin afar aragti oo kala duwan.

Axdiga Cusub wuxuu ka kooban yahay 27 kitaabo. Falimaha Rasuullada, waxaa qoray Luukos, waxay noo sheegaan wixii dhacay, markuu Masiixa dhammeeyay ergadiisa. Ilaah wuxuu u waxyooday Bawlos (arggagixiye hore), Yacquub iyo Yuudas (walaalaha isku hooyo ahaayeen Ciise), iyo Butros iyo Yooxanaa (kalluumaysto) inay qoraan inta ka hartay Axdiga Cusub. Kitaab kasta wuxuu muujiyaa wax saa'id ah oo ku saabsan Boqorka iyo qorshehiisa dhammaan kuwa Isaga jecel.

Halkan hadda waa inta kale qisadiisa.





# Dhacdada 38
# Qisada Maryan

Waxaa la gaaray waqtiga. Kumanaan sanadooyin oo diyaargareeyn ah kaddib, waxaa la gaaray waqtigii Ilaahii u soo dirayay Badbaadiyaha-Masiixa-Boqorka la ballanqaaday xagga dunida. Laakiin yuu ahaan lahaa? Iyo siduu u imaan lahaa?

> Waqtigii Herodos ahaa boqorkii Yahuudiya… Ilaah baa malaa'ig Jibriil u soo diray magaalada Galili oo Naasared la odhan jiray ilaa gabadh bikrad ah oo u doonanayd nin la odhan jiray Yuusuf oo dhashii Daa'uud ahaa; gabadhana waxaa la odhan jiray Maryan.
>
> Malaa'igtii baa ku tidhi, Ha baqin, Maryamay, waayo, nimco ayaad Ilaah ka heshay. Bal eeg, waad uuraysan doontaa, oo wiil baad umuli doontaa, magacisiina waxaad u bixin doontaa Ciise. Nin weyn buu ahaan doonaa, waxaana loogu yeedhi doonaa Wiilka Kan ugu sarreeya, Rabbiga Ilaaha ahuna wuxuu siin doonaa carshigii awowgiis Daa'uud. Weligiiba wuxuu boqor u ahaan doonaa…boqornimadiisuna ma idlaan doonto.
>
> Kolkaasaa Maryan waxay malaa'igtii ku tidhi, Sidee baa waxanu ku noqon doonaan? Anigu ninna garan maayo.
>
> Malaa'igtii waa u jawaabtay oo ku tidhi, Ruuxa Quduuska ah ayaa kugu soo degi doonaa, oo xooggii kan ugu sarreeya ayaa hoosiis kuu noqon doona, sidaa darteed kan quduuska ah oo kaa dhalan doona waxaa loogu yeedhi doonaa Wiilka Ilaah. (Luukos 1:5,26-27,30-35)

Muxuu Jibriil ugu yeeray Ciise "Wiilka Ilaah"?

Dadka qaarkood waxay umalaynayaan eraygan macnahiisa waxaa waaye Ilaah inuu lahaaday naag oona ahaa aabbee wiil dhalay. Saas *ma aha* macnaheedu. Haddaad ka timid qaaradda Afrika laga yaabaa dadka qaarkood inay kugu yeeraan "wiilka Afrika". Tan miyaa laga wada Afrika waa la guursaday ee cunug bay dhashay? Maya! Macnaha waxaa laga wada inaad ka timid Afrika.

Masiixa waxaa loogu yeeray Wiilka Ilaah, waayo wuxuu ka yimid xagga Ilaah. Wuxuu u imaaday Aadan reerkiisa oo dambi-burburiyay, laakiin uunaan asalkiisa ka imaan Aadan. Wuxuu yahay Erayga naftirkiisaba, Nafta, iyo Wiilka Ilaah.

> Bilowgii waxaa jiray Ereyga, Ereyguna wuxuu la jiray Ilaah, Ereyguna wuxuu ahaa Ilaah. Isagu Ilaah buu la jiray bilowgii. Wax walba waxaa laga sameeyey xaggiisa, oo wixii la sameeyey lama samayn isaga la'aantiis. ... Ereyguna jidh buu noqday, oo waa ina dhex joogay, oo waxaannu aragnay ammaantiisii, taas oo ahayd ammaantii u ekayd tan Wiilka keliya ee Aabbaha. (Yooxanaa 1:1-3,14)

Ma xasuusanaysaa ballankii Ilaah u qaaday maalintii Aadan markuu cunay mirta laga mamnuucay? Ilaah wuxuu u sheegay *Farcanka naagta inuu burburinaya Abeesada madaxeeda*.

Farcankaas la ballanqaaday hadda wuxuu ku jiray minka gabadh bikrad ah.

Siduu u burburin lahaa madaxa Abeesada ay weli ahayd in la arkayo.





# Dhacdada 39
# Qisada Yuusuf

Maryan waxay u doonnanayd Yuusuf inuu guursado, isaga wuxuu ahaa nijaar oo degan Naasared, magaalo xuduudkeeda waqooyiga Falastiin.

Maryan iyo Yuusuf labadooduba waxay ahaayeen dad Yuhuud ah, waxay ka soo jeedaan isirkooda ilaa Boqorka Daa'uud iyo ilaa dib Ibraahim. Yuusuf wuxuu ahaan lahaa ninka dhaxalka sugaha boqortooyada, laakiin dalkiisa waxaa xukumay Rooma. Ciidaanka Roomaanka waxay ilaalinayeen waddooyinka. Dadka Yuhuud ah looga shakiyo qarandumiska waa la xiray, waana lagu dilay iskutallaabta. Canshuur-qaadayaasha waxay dhacayeen dadka. Nolosha waxay ahayd kharaar.

Laakiin Yuusuf wuu faraxsanaay. Goordhow wuxuu qaadan lahaa Maryan gurigiisa. Si adag buu u shaqeeyay siduu u diyaargareeyo meesha ay ku noolaan lahaayeen guurka kaddib. Maalin maalmaha ka mid ah wuxuu ogaaday war ka naxiyay:
Maryan waxay lahayd uur.

Sideey kula tahay inuu Yuusuf dareemay? Waxaa u muuqatay inay Maryan sinaysatay.

Yuusuf wuu qalbijabay, laakiin wuxuu rabay inuu sameeyo waxa saxda ah. Sidaas darteed wuxuu go'aansaday inuu iska furo nikaaxa si qarsoodi ah, waayo muusan doonayn inuu Maryan ceebeeyo.

> Laakiin intuu waxan ka fiirsanayay ayaa malaa'igtii Rabbigu riyo ugu muuqatay.
>
> Iyadoo leh, Yuusuf ina Daa'uudow, ha ka baqin inaad naagtaada Maryan qaadatid, waayo, waxa ay uuraysatay ayaa Ruuxa Quduuskaa ka yimid. Oo waxay umuli doontaa wiil, magaciisana waxaad u bixin doonta Ciise, waayo dadkiisa ayuu dembiyadooda ka badbadin doonaa.
>
> Waxaas oo dhan waxay u dhaceen in la arko wixii Rabbigu kaga dhex hadlay nebiga, isagoo leh, Gabadh bikrad ah baa uuraysan doonta oo wiil umuli doonta, Magaciisana waxaa loo bixin doonaa, Cimmaanuu'eel kan micnihiisu yahay, Ilaah baa inala jooga. (Matayos 1:20-23)

Yuusuf murugtiisa waxay isku baddashay farxad. *Xushmo wayn! Maryan waxay noqon lahayd hooyadii Masiixa la ballanqaaday! Isagana, Yuusuf, wuxuu noqon doonaa cunuggii mas'uulkiisa!*

Masiixii quduuska ah wuxuu lahaan lahaa hooyo insaan ah, laakiin ma lahaan lahayn aabbe insaan ah. Magaciisu wuxuu ahaan doonaa Ciise, macnahu waa *RABBIGA wuu badbaadinaa, ama si fudud, Badbaadiye.*

> Markaasaa Yuusuf hurdadii ka kacay oo yeelay sidii malaa'igtii Rabbigu ku amartay, oo naagtiisii ayuu qaatay; uma uuse tegin iyada ilaa ay wiil umushay, oo wuxuu magaciisa u baxshay Ciise. (Matayos 1:24-25)

Gacanta Ilaah waxay ku dhex jirtay wax kasta.





# DHACDADA 40

## IMAATINKA

Toddoba boqol oo sano ka hor, nebi Miikaah wuxuu ku waxyooday inuu Masiixa-Boqorka ahu ku dhalan doono Beytlaxam, magaalada qadiimiga ah oo uu ku dhashay Boqor Daa'uud.

Laakiin waxaa jirtay dhibaato. Maryan iyo Yuusuf waxay ku noolaayeen Naasared, safar saddex maalmood ah dhinaca waqooyiga. Sidee baa Qoraallada lagu fulinaya?

Ilaah baa wax walba gacmaha ku haaya.

Markii ay gaartay waqtigii Maryan ay ummuli lahayd, suldaanka Roomanka ah Kaysar Awgustus la xariira Roma ayaa bixiyay amar, kaasoo waddaniyiinta oo dhan oo suldaanada waa inay ku soo noqdaan isla markiiba magaalada abkooda si ay isku diiwaangaliyaan inay bixiyaan canshuurta. Sidaas darteed Yuusuf iyo Maryan oo xaammilo ahayd waxay ka safreen Naasared oo u socdeen Beytlaxam.

> Waxaa dhacay kolkay halkaas joogeen in maalmihii ay umuli lahayd dhammaadeen, waxayna umushay wiilkeedii curudka ahaa.
>
> Markaasay maro ku duudduubtay oo qabaal ku jiifisay, waayo meel ay ku hoydaan ayay hudheelkii ka waayeen. (Luukos 2:6-7)

Xagga Beytlaxam, oo ka buuxsamay musaafiriin daalan (waxay ku jireen magaalada diiwaangalinta canshuurta darteed), *Farcankii naagta laga ballanqaaday* wuu ku dhashay. Injiilka waxaa ku qoran dhacdada saxda ah:

> Waxayna umushay wiilkeedii curadka ahaa. (Luukos 2:7)

Xagga dhinaca hooyodiisa, cunuggan wuxuu ahaa cunugga cusub wiilka Maryan ay dhashay, laakiin xagga dhinaca Aabbihiis, wuxuu ahaa Wiilka Ilaah oo weligeed ah. Isla Eraygii Ilaah u ku abuuray dunida, isla Codkii ka onkoday oo ololayay Buurta Siinay hadda waxaa laga maqlay oohintiisa jilicsan cunugga gudihiisa.

Xagguuna ku dhashay?

Ma aha qasri boqor, ma aha isbitaal, xataa ma aha hudheel hareeraha waddo. Boqorka samada wuxuu ku dhashay meelaha ilmaha wanka ay ku dhashaan—xerada gudeheeda oo qabaalka ahaa sariirtiisa.

Waxaan oo dhan waxay ahaayeen qayb ka tirsan qorshaha Ilaah.

> Waad garanaysaan nimcada Rabbigeenna Ciise Masiix in isagoo hodan ah uu aawadiin miskiin u noqday, inaad miskiinnimadiisa hodan ku noqotaan. (2 Korintos 8:9)

Laakiin Ilaah miyuu qorsheen kari waayay nooca ka mid ah dabbaaldeg inuu ku xushmeeyo imaatinka Wiilkiisa?

Wuu sameeyay.





# Dhacdada 41
## Qisada Arijirrada

Ilaah yuu ugu horreeynti ogaysiiyay warka imaatinka Masiixa ee dunida? Suldaanka? Ma dadka taajirinta ee caanka ah? Ma hoggaamiyaasha diineed?

Maya.

Kuwa ugu horreeya ee helay warka yaabka waxay ahaayeen arijirro masaakiin ah, nimankii xannaaneenayay wananka sii logu gowraco macbudka meeshii allabariga oo ku taallay Yeruusaalem.

> Dalkaas waxaa jiray adhijirro bannaanka jooga oo habeenkii idahooda ilaalinaya. Malaa'igtii Rabbiga ayaa ag istaagtay, oo ammaanta Rabbiga ayaa iftiimisay hareerahooda, aad bayna u baqeen.
>
> Markaasaa malaa'igtii ku tidhi, Ha baqina, waayo, ogaada, waxaan idiin keenay war wanaagsan oo leh farxad weyn oo u ahaan dadka oo dhan. Waayo, maanta waxaa magaalada Daa'uud idiinku dhashay Badbaadiye oo ah Masiixa[13] Rabbiga ah. Oo waxaa calaamo idiin ahaan tan, waxaad heli doontaan ilmo maro ku duudduuban oo ku jiifa qabaal.
>
> Dhaqsoba waxaa malaa'igtii la jirtay guuto fara badan, oo jannada ka timid, wayna ammaanayeen Ilaah oo lahaayeen, Ilaah ha ku ammaanmo meelaha ugu sarreeya, Xagga dhulkana nabad ha ahaato dadka ka farxiya Ilaah dhexdooda.
>
> Waxaa dhacay markii malaa'igihii ka tageen oo jannada ku noqdeen in adhijirradii isku yidhaahdeen, Haddana aan tagno xataa ilaa Beytlaxam, aan aragnee waxaas dhacay oo Rabbiga ina ogeysiiyey.
>
> Markaasay dhaqso u yimaadeen oo waxay heleen Maryan iyo Yuusufba iyo ilmihii oo qabaal ku jiifa.
>
> Oo goortay arkeen, waxay ogeysiiyeen hadalka ilmahan looga sheegay iyaga. Dadkii maqlay oo dhanna ayaa ka yaabay waxyaalihii adhijirrad u sheegeen. (Luukos 2:8-18)

Qisada cajiibka ah ayay noo sheegeen arijirrada!

*Badbaadiyaha wuu dhashay! Waan aragnay Isagii! Waan taabanay Isagii! Malaa'igta waxay noo sheegtay inuu yahay Masiixa RABBIGA ah! Koox malaa'igo heesaya ayaa buuxiyay cirka! Habeenka wuxuu ahaa sida maalin! Masiixa wuu imaaday! Wuu joogaa! Wuu joogaa!*

Dad qaarkood waxay rumaysanayeen farriinta arijirrada. Inta badan ma rumaysanin. Laakiin rumayso ama ha rumaysanin, Boqorka, kaasoo oo dhalashadiisu u qaybisay taariikhda dunida laba qayb,[14] wuxuu ku biiray jinsiga aadanaha.

> Goortii siddeed maalmood dhammaatay oo wiilkii la gudi lahaa, magaciisii waxaa loo baxshay Ciise, sida malaa'igtii ugu bixisay intaan uurka lagu uuraysan. (Luukos 2:21)





## Dhacdada 42

# Qisada Nimankii Xigmadda lahaa

Markuu Ciise ku dhashay xerada dhexdeeda kaddib, Yuusuf wuxuu u diyaarinayay reerkiisa yar meel munaasib ah oo ay ku noolaadaan.

Hal maalin nimankii xigmadda lahaa qaarkood oo aad u xiiseenayay (niman xigmad leh oo akhrisan karaan xiddigaha) waxay soo galeen Yeruusaalem. Waxaa hoggaaminayay xiddig khaas ah, nimankii waxay ka imaadeen meel fog oo lay yiraahdo Bershiya, waxay raadinayeen cunugga cusub oo Boqorka ah.

Nimankani xigmadda lahaa waxay lahaayeen hal su'aal iyo hal dan:

> Xaggee buu joogaa boqorka Yuhuudda ee dhashay? Waayo, bari ayaannu xiddigtiisii ka aragnay, oo waxaannu u nimid inaanu caabudno.
>
> Goortuu boqor Herodos waxan maqlay, ayuu welwelay, isaga iyo reer Yeruusaalem oo dhan. Oo intuu isu ururiyey… culimmadii dadka oo dhan, ayuu weyddiyey meeshii Masiixu ku dhalan lahaa.
>
> Oo waxay ku yidhaadeen, Beytlaxamtii Yahuudiya, waayo, sidaasaa nebigii u qoray...
>
> Markaasuu Herodos nimankii xigmadda lahaa hoos ahaan ugu yeedhay… oo ku yidhi, Taga oo ilmaha aad u doondoona, oo goortaad heshaan i soo ogeysiiya si aan anna ugu tago oo u caabudo.
>
> Goortay boqorkii maqleen ayay tageen, oo xiddigtii ay bari ka arkeen ayaa hor kacday ilaa ay timid oo ay kor joogsatay meeshii ilmuhu joogay.
>
> Oo goortay xiddigtii arkeen ayay farxad aad u weyn ku farxeen.
>
> Markaasay gurigii galeen oo waxay arkeen ilmihii iyo Maryan hooyadiis, wayna dhaceen oo caabudeen isaga, oo intay khasnaddahoodii fureen waxay isaga u dhiibeen hadiyado dahab iyo beeyo iyo malmal ah.
>
> Markaasaa riyo loogu digay inaanay Herodos ku noqon, oo dhulkoodii ayay jid kale u mareen.
>
> Goortay ka tageen, malaa'igtii Rabbiga ayaa Yuusuf riyo ugu muuqatay, iyadoo leh, Kac oo kaxee ilmaha iyo hooyadiis, oo Masar u carar oo halkaas joog ilaa aan kuu soo sheego, waayo Herodos ayaa ilmaha dooni doona inuu dilo. (Matayos 2:2-13)

Herodos wuxuu isku dayay inuu dilo cunuggii. Dadka Yeruusaalem way iska dhegatireen Isaga. Laakiin nimankii xigmadda lahaa dhex mareen saxaaraha kulaylka badan si ay u helaan Isaga, waxay caabudeen Isaga. Waxayna siiyeen Isagii hadiyado ku habboon boqor: dahab, foox [beeyo], iyo dhir qaali ah oo ku habboon maydadka in la marmariyo ay u keeneen. Maxay u keeneen dhirta maydadka la marmariyo?

Nimankii xigmadda lahaa miyay ogaayeen Ciise inuu u dhashay si uu u dhinto?





# Dhacdada 43
## Cunugga kaamilka ah

Malaa'igta digniinteeda kaddib, Yuusuf wuxuu u waday Maryan iyo cunuggeeda Ciise xagga Masar waxay u degnaayeen sida qaxootiyaal ilaa dhimashada Boqorkii xaasidka ahaa ee Herodos laga gaaray.

> Laakiin goortuu Herodos dhintay, malaa'igtii Rabbiga ayaa riyo ugu muuqatay Yuusuf oo Masar jooga, iyadoo leh, Kac oo kaxee ilmaha iyo hooyadiis, oo dhulka Israa'iil tag, waayo, kuwii ilmaha naftiisa doonayay waa dhinteen. (Matayos 2:19-20)

Kani ayaa fuliyay waxyi kale oo qadiimi ah oo RABBIGU hore u sheegay:

> Wiilkaygii…waxaan uga yeedhay dalka Masar. (Hoosheeca 11:1)

Oo Yuusuf iyo Maryan waxay u wadeen Ciise xagga Naasared, meesha ayuu kula koray walaalahiisa wiilasha iyo gabdaha oo isku hooyo ahaayeen.[15]

Siyaabo badan wiilka yar oo Ciise ah wuxuu ahaa sida carruurta kale. Wuu cunay, wuu hurday, wuu cayaaray, wuu dhigtay iyo wuxuu bartay ganacsi. Laakiin siyaabaha kale, Ciise wuxuu kaga duwanaay carruurta kale. Weligiis mu ahayn danayste. Mar kasta wuxuu xushmeeyay waalidiintiisa. Weligiis been mu sheegin. Mar kasta wuxuu ka faraxinayay Aabbihiisa samada ku jira.

> [Wuxuu ahaa] mid quduus ah oo aan khiyaano iyo wasakh toona lahayn, oo dembilayaasha ka soocan. (Cibraaniyada 7:26)

Ciise waa cunugga keliya oo kaamilka ah taariikhda dhexdeeda. Kaamil macnahiisa ma aha inuu weligiis lahaan jilib maqaar-siiban ama fin. Macnaha waxaa waaye inuu lahaa dabci kaamil ah. Wuxuu ahaa quduus iyo wanaagsan si kaamil ah. Xataa awooddiisa iyo xigmaddiisa kaamil bay ahayd, laakiin intusaan galin Maryan minkeeda ka hor, wuxuu isku khasbay xaddadaad khaas ah si u ugu noolaado sida insaan insaanka ka mid ah.

> Ciisena wuxuu ku koray xigmad iyo dherer iyo nimco, Ilaah iyo dadka hortooda. (Luukos 2:52)

Markuu Ciise jiray 12 sano wuxuu kala safray waalidiintiisa Naasared ilaa Yeruusaalem Iiddii Allabariga oo loo aqoonsanayay Iiddii Kormaridda.[16] Saaxiibadiisa isla soo barbaareen intay sahminayeen magaalada wayn, Ciise wuxuu ku lumiyay wiigga daraadda macbudka, iyo wuxuu dhex fadhistay macaalimiintii, wuxuu dhegaysanayay iyaga, wuxuuna waydiiyay iyaga su'aalo.

> Dadkii maqlay oo dhan ayaa la yaabay garashadiisii iyo jawaabihiisii. (Luukos 2:47)

Macbudka wuxuu ahaa meesha wananka allabariga lagu gubo dambiyada dadka darteed. Wiilkii Ciise ahaa wuxuu fahansanaay culimmadu ma fahmin.

Wuxuu u yimid inuu hibeeyo Wanka ugu danbeeya.





# DHACDADA 44

## WANKA ILAAH

Soddon sano ayaa ka soo wareegatay dhalashadii Ciise ee Beytlaxam. Kaysar Awgustus waa dhintay; wiilka naagtiisu dhashay Kaysar Tiberiyas wuxuu u talinayay Rooma. Herodos Antibas wuxuu u talinayay Galili. Bontiyos Bilaatos wuxuu xukumay Yahuudiya. Nebi cusubna wuxuu ka khudbeeynayay Falastiin.

> Maalmahaas waxaa yimid Yooxanaa Baabtiisaha isagoo cidlada Yahuudiya wax ku wacdiyaya, oo leh, Toobadkeena, waayo boqortooyadii jannadu waa dhow dahay.
>
> Waayo, kan waa kii nebi Ishacyaah ka hadlay kolkuu yidhi, Waa codka kan cidlada kaga qaylinaya, Jidka, Jidka Rabbiga hagaajiya, Waddooyinkiisa toosiya.
>
> Yooxanaa qudhiisa wuxuu guntanaa dharkiisii dhogorta geel ahaa, oo suun meged ahna dhexduu ku xidhnaa, cuntadiisuna waxay ahayd ayax iyo malab dibadeed. (Matayos 3:1-4)

Halkay dad badan xiran jireen dhar xariir ah oona cuni jireen cuntada ugu fiican, Yooxanaa wuxuu u noolay si fudud. Wuxuu ahaa nin ergo ah.

Yooxanaa wuxuu ahaa midka Boqorka hor socday.

Boqolaal sanadooyin ka hor, laba nebi, Ishacyaah iyo Malaakii, waxay ka qoreen nebi mustaqbalka, kaasoo ogaysiin doonaa imaatinka Masiixa-Boqorka. Yooxanaa wuxuu ahaa nebigaas.

Intay nebiyadii hore wax sii sheegayeen: *Waqtiga saxda ah Badbaadiyaha la ballanqaaday wuxuu imaan doona dunida*, Yooxanaa wuxuu ku khudbeeyay: *Waqtigaas waa la gaaray. Badbaadiyaha wuu imaaday!*

Dad badan oo meel ku soo uruuray ayaa ku qulquleen lamaddegaanka dhexdiisa si ay u maqlaan Yooxanaa. Kuwaasi oo qirteen xaladdooda dambiileyaalnimo oona u baahan Badbaadiyaha waxaa lagu baabtiisay Webiga Urdun. Sidaas waxay ku tusinayeen iimaankooda Masiixa, kaaso dhaqi lahaa dayntooda wayn ee dambiga ee ku gashan lahaa iyagii xaqnimadiisa.


Maalinba maalinta ka danbaysa, wiigba wiiga ka sii danbeeyo, Yooxanaa wuxuu kala hadlay dadka midkii waqtiga dheer la sugayay Badbaadiyaha jannada ka yimid, “kan aanan istahilin inaan kabihiisa u qaado. Isagu wuxuu idinku baabtiisi doonaa Ruuxa Quduuska” (Matayos 3:11).

Kaddibna hal maalin, Badbaadiyaha wuu imaaday—wuxuu ka yimid buurta korkeeda, wuxuu soo maray dad badan oo meel ku soo uruuray dhexdooda, ilaa meeshuu Yooxanaa dadka ku baabtiisay. Yooxanaa wuxuu farta ku fiiqay Ciisa oona yiri,

> Bal eega Wanka Ilaah ee dembiga dunida qaadaya. (Yooxanaa 1:29)

Yooxanaa muxuu ugu yeeray Ciise Wankii Ilaah? Haddaad garatid sababta, waxaad garanaysaa ergada Boqorka.





## Dhacdada 45

## Wiilka kaamilka ah

Ciise wuxuu waydiiyay Yooxanaa inuu baabtiiso Isagii. Yooxanaa wuu diiday, waayo Masiixa-Boqorka oo ka yimid jannada ma u baahnayn inuu toobadkeeno.

> Laakiin Ciise waa u jawaabay oo ku yidhi, Haddeer oggolow, waayo, sidaas waa inoo eg tahay inaynu xaqnimada oo dhan wada yeelno. (Matayos 3:15)

Oo Yooxanaa wuxuu baabtiisay Ciise. Baabtiiskii Ciise, Ciise wuxuu ku tusay inuu ka tirsan yahay reerka bini-aadanka oo u yimid inuu badbaadiyo.

> Ciise goortii la baabtiisay, ayuu markiiba biyaha kor uga baxay, kolkaasaa samooyinku furmeen, oo wuxuu arkay Ruuxa Ilaah oo sida qoolleey oo kale u soo degaya oo dushiisa imanaya, oo cod baa samooyinka ka lahaa, Kanu waa Wiilkayga aan jeclahay, oo aan ku faraxsanahay! (Matayos 3:16-17)

Sida maalintii ugu horreeysay abuuritaanka, Ilaah midnimadiisa in la fahmo ay adagtahay, waa la muujiyay mar kale. Isku marba Ilaah, Ruuxiisa, iyo Eraygiisuba way isla shaqeeynayeen sida hal ayay ku abuureen dunida, haddana way isla shaqeeynayeen iyaga oo hal ah si ay u badbaadiyaan dunida.[17]

Waxaan arkaynaa *Ruuxa Ilaah* (oo bilowgii ayaa ka dul dhaqdhaqaaqayay biyaha) oo ku soo degayaa Ciise. Waxaan fiirsanaynaa *Wiilka Ilaah* (Erayga oo abuuray dunida) oo ka soo soconayaa webiga. Waxaan maqlaynaa *Aabbaha* ka hadlayaa samada.

30kii sano ee la soo dhaafay, Ciise wuxuu ku noolay si qarsoodi ah, wuxuu ka qarsoomay indhaha dad waynaha, laakiin Aabbihiisa samada ku jiray wuxuu eegay fikraddiisa, eraygiisa iyo waxqabadkiisa kasta. Maxaana la guddoon Ilaah nolosha Wiilkiisa?

> Isaga oo aan ku faraxsanahay!

Taariikhda insaanka oo dhan, Ciise waa qofka keliya oo sameeyay wax kasta oo Ilaah u baahan yahay. Wax kasta. Had iyo goor. Si kaamil ah.

Ciise wuxuu sameeyay wuxuu Aadan sameeyn kari waayay: inuu muujiyo aragga Ilaah. Laakiin Ciise wuxuu sameeyay muujin wax ka badan. Wuxuu ahaa Isaga.

> Ilaah wuxuu waagii hore siyaalo badan oo kala duduwan awowayaasheen kula hadlay nebiyadii, laakiin maalmahan ugu dambeeystooda wuxuu inagula hadlay Wiilkiisa uu ka dhigay kan wax walba dhaxla, kan uu duniyooyinkana ku sameeyey. Oo isagu waa dhalaalka ammaantiisa iyo u-ekaanta ahaantiisa, oo wax walba wuxuu ku hayaa erayga xooggiisa… (Cibraaniyada 1:1-3)

Ma ahan yaab inuu Ciise dhahi doono mar dambe,

> Anigu iyo Aabbuhu mid baannu nahay. (Yooxaana 10:30)

Ciise wuxuu yahay Wiilka kaamilka ah.





# Dhacdada 46
## Ninka labaad

Shayddaan ma ku farxasanayn inuu Ninkan kaamilka ah ku noolaado boqortooyadiisa! Laakiin Shayddaankii wuxuu lahaa xeel [qorshe]. Siduu u jirrabay ninka ugu horreeya inuu dambaajiyo, oo haddana wuxuu isku dayi doona inuu Ninkan dambaajiyo.

Shayddaanka wuxuu rabay inuu keeno Ciise xukunkiisa hoostiisa, sidu Aadan u keenay xukunkiisa hoostiisa. Hadduu Wiilka Ilaah ku qalqaalin karay dambi, haddana Isagu muu noqon lahayn mid u qalma inuu ka badbaadiyo dadka dambigooda.

> Goortasaa Ruuxu Ciise cidlada u kaxeeyey in Ibliisku jirrabo. Oo goortuu afartan maalmood iyo afartan habeen soomanaa, ayuu dabadeed gaajooday.
>
> Markaasaa duufiyihii u yimid oo ku yidhi, Haddaad tahay Wiilka Ilaah, dhagaxyadan ku dheh, Kibis noqda. (Matayos 4:1-3)

Ciise wuu gaajooday, laakiin ma addeecin Shayddaanka. Muu sameeyn lahayn wax aan doonista Aabbihiisa ahayn. Ma ku isticmaali lahayn awooddiisa aan xadka lahayn si uu u qanciyo rabitaankiisa insaanka ah. Inuu la diriro Shayddaanka, Ciise wuxuu soo xigtay Tawraadka Muuse:

> Waa qoran tahay, Dadku waa inaanu kibis oo keliya ku noolaan, laakiin waa inuu eray walba oo afka Ilaah ka soo baxa ku noolaado.
> (Matayos 4:4; Sharciga Kunoqoshadiisa 8:3)

Doqonimadiisa kibirka leh, Shayddaankii wuxuu isku dayay mar kale inuu jirrabo Kan Quduuska ah.

> Haddana Ibliiska ayaa buur aad u dheer geeyey, wuxuuna tusay boqortooyooyinka dunida oo dhan iyo ammaantooda. Wuxuuna ku yidhi, Waxyaalahan oo dhan waan ku siinayaa haddaad sujuuddid oo i caabuddid.
> (Matayos 4:8-9)

Markuu Aadan dambaabay, bini-aadanka wuxuu lumiyay xaqa inuu xukumo dunida. Shayddaan wuxuu xaday awoodda dunida, wuxuu iska dhigay inuu boqorkeedii yahay. Hadda Boqorka Ammaanta wuxuu joogay dunida inuu soo ceshto awoodda, laakiin ma sameeyn doono inuu u sujuudo kii uu imaaday inuu burburiyo.

> Markaasaa Ciise wuxuu ku yidhi, Shayddaan yahow, bax, waayo, waa qoran tahay, Waa inaad caabuddo Rabbiga Ilaahaaga ah oo waa inaad isaga keliya u adeegto. (Matayos 4:10)

Ugu danbayntii Shayddaanka wuxuu ka tegay Ciise. Shayddaan weligiis ma jirrabin qof sida Isaga oo kale, nin oo damci ama awood lahayn inuu dambaajiyo. Ciise wuxuu ka duwanaay Aadan iyo farcankiisa.

> Ninkii ugu horreeyey waa kan dhulka oo cammuud ah, ninkii labaadna waa kan jannada. (1 Korintos 15:47)

Aadan wuxuu ahaa ninka kaamilka ah ugu horreeyay. Ciisena wuxuu ahaa ninkii labaad oo kaamilka ahaa. Markuu Shayddaan jirrabay Aadan inuu dambaajiyo, Aadan wuu guuldarraystay Shayddaankiina wuu guulaystay. Markuu Shayddaankii isku dayay inuu Ciise dambaajiyo, Shayddaankii wuu guuldarraystay, Ciisena wuu guulaystay. Ninka ugu horreeyay wuxuu nagu hoggaamiyay boqortooyada Shayddaanka ee dambiga iyo dhimashada. Ninka labaadna wuxuu u imaaday inuu nagu hoggaamiyo ka bixida dambiga iyo dhimashada.





# Dhacdada 47

## Masiixa-Boqorka ah

Markuu Shaydaan isku dayay oona guuldarraystay inuu Isaga dambaajiyo, Ciise wuxuu ku soo noqday Naasared, xaggu ku soo koray wuxuuna u shaqeeyay sida nijaar.

> Oo maalintii sabtida sida caadadiisu ahayd ayuu sunagogga galay. (Luukos 4:16)

Sunagogga wuxuu ahaa guri cibaado halkaas Qoraallada waa la akhriyay oo loogu fasiray, waana la fahansiiyay dadka sabti kasta. Isla sabtidan Ciise wuxuu lahaa ogaysiis.

> Wuu istaagay inuu wax akhriyo.
>
> Waxaa loo dhiibay kitaabkii Nebi Ishacyaah, oo goortuu kitaabkii furay ayuu helay meeshii lagu qoray,
>
> Ruuxii Rabbiga ayaa i dul jooga, Waayo, wuxuu ii subkay inaan war wanaagsan masaakiinta ku wacdiyo, Wuxuuna ii soo diray inaan kuwa xidhan furrinnimada ogeysiiyo iyo kuwa indhaha la' soo celinta araggooda.... (Luukos 4:17-18)

Wuxuu Ciise ka akhriyay Qorniinka waxay ahayd waxyi qadiimi ah oo ku saabsan Masiixa-Boqorka, kaaso tusi doona dunida siduu Ilaah yahay oona ka badbaadin doona dambiileyaasha awoodda Shayddaanka, dambiga, dhimashada, iyo naarta.

> Intuu [Ciise] kitaabkii duudduubay ayuu midiidinka u dhiibay oo fadhiistay; oo dadkii sunagoggii ku jiray oo dhan ayaa indhaha ku taagay. Markaasuu bilaabay inuu ku yidhaahdo, Maanta Qorniinkan dhegihiinnu maqlay waa rumoobay. (Luukos 4:20-21)

Siday Ciise deriskiisu uga ficil-celiyeen sheegashadiisa inuu yahay Masiixa ka yimid jannada si uu fuliyo wax nebiyadu ay ku qoreen Qoraallada?

> Markii kuwii sunagogga ku jiray oo dhan waxaas maqleen ayay aad u cadhoodeen. Markaasay kaceen oo magaaladii ka saareen, waxayna u kaxeeyeen buurtii magaaladoodii ka dhisnayd qarkeedi inay ka tuuraan.
>
> Laakiin isagu intuu dhex maray ayuu iska tegey. (Luukos 4:28-30)

Ciise wuxuu lahaa awoodda. Si ka duwan Aadan farcankiisa dambiga la qaadsiiyay ee dhimanaya, Masiixa-Boqorka Ilaah subkaday[18] isaga wuxuu ku jiray gacantiisa kaamilka ah. Qofna ma taabani karin ilaa uu Isagu ka oggolaaday mooyee.

Laakiin wuu taaban lahaa iyaga.





# Dhacdada 48

## Awoodda ka sarreeysa ruuxaanta xunxun iyo Cudurka

Qoraallada nebiyada dhexdooda, hal magac oo Masiixa waxaa waaye Gacantii RABBIGA (Ishacyaah 53:1). Ciise mucjisooyinkiisu waxay tuseen Isagu inuu yahay Ilaah gacantiisa dunida dusheeda. Ku taabashada gacantiisa ama ku hadalka erayga ka soo baxa afkiisa, bukaanta iyo dad dhimanayay waxaa la bogsiiyay si deg-deg ah.

> Kolkaasaa waxaa u yimid dad fara badan oo wada kuwa curyaan ah iyo kuwa indha la' iyo kuwa carrab la' iyo kuwa addimmo la' iyo qaar badan oo kale, oo waxay iyaga dhigeen cagihiisa agtooda, wuuna bogsiiyey. (Matayos 15:30)

Erayada nebiyada waa la fuliyay.

> Kuwii indhaha la'aa wax bay arkaan, kuwii lugahala'aana way socdaan, kuwii baraska qabayna waa la nadiifiyey, kuwii dhegahala'aana wax bay maqlaan, kuwii dhintayna waa la kiciyey, masaakiintana injiilka waa lagu wacdiyaa. (Matayos 11:5 [Isacyaah 35:4-6; 61:1])

Ma jirin cudur oo Ciise bogsiin karin.

> Markaasaa waxaa u yimid nin baras leh, wuuna jilba joogsaday oo baryay, oo ku yidhi, Haddaad doonaysid waad i daahirin kartaa.
>
> Kolkaasaa Ciise u naxaariistay, oo intuu gacantiisa soo taagay, ayuu taabtay oo ku yidhi, Waa doonayaa ee daahirsanow.
>
> Kolkiiba baraskii waa ka baxay, oo wuu daahirsanaaday. (Markos 1:40-42)
>
> Markii qorraxdu sii dhacaysay, dadkii oo dhan oo lahaa dad cudurro kala cayncayn ah qabay ayay isaga u keeneen; mid kastaba gacmihiisuu saaray oo bogsiiyey. Jinniyona dad badan ayay ka soo baxeen, iyagoo qaylinaya oo leh, Adigu waxaad tahay Wiilka Ilaah.
>
> Isaguse waa canaantay oo uma oggolaanin inay hadlaan, waayo, waxay garanayeen inuu Masiixa yahay. (Luukos 4:40-41)

Ciise muu rabin ruuxaanta xunxun inay u markhaati furaan isaga. Malaa'igahan xunxun waxay u markhaati fureen awooddiisa iyo xooggiisa markuu la hadlay samooyinka iyo dunida inay ahaadaan. Way gariireen markay dib u soo yeereen maalintu Isaga jannada ka turay iyaga. Ee hadda wuxuu ku noolaaday dunida dusheeda sida nin oo kale! Awoodda sayidkooda ayay burburinaysaa. Boqorka Ammaanta wuxuu xoog ku qabsaday awooddooda.

Meel kasta uu Ciise tegay, awoodda Shayddaanka waa la tabardareeyay. Meel kasta uu Ciise tegay, habaarka dambiga dib ayaa loo girangiriyay.

Waxaa weheliyay Isaga mucjisooyin, Ciise farriin ayuu haayay:

> Wuxuuna yidhi, Waqtigii waa buuxsamay, oo boqortooyadii Ilaah waa soo dhowaatay; toobadkeena oo injiilka rumaysta. (Markos 1:15)





# Dhacdada 49

## Awoodda ka sarreeysa Dabaysha iyo Duufaanada

Ciise wuxuu doortay laba iyo toban niman inay la safraan Isaga, inayna wax ka bartaan isaga. Sidaa oo kale waxaa raacay naago badan. Waxay taageereen Ciise iyo xertiisa inay siiyaan cunto iyo lacag.

Kuwa Isaga aamminay, wicitaanka Ciise wuxuu ahaa mid u fudud:

> I soo raac. (Luukos 5:27)

Laakiin wicitaankiisa haddana qaali buu ahaa:

> Kan aabbihiis iyo hooyadiis iga jecel, ima istaahilo, oo kan wiilkisa iyo gabadhdiisa iga jecel, ima istaahilo. (Matayos 10:37)

Maxaa yeelay xertiisa qaar waxay ahaayeen kalluumaysato, inta badan Ciise ayaa ku qaatay maalinta xagga hoose Badda Galili. Dadka waxay uga imaadeen isaga meel dhow iyo meel fog.

> Haddana wuxuu bilaabay inuu badda agteeda wax ku baro, oo waxaa u soo ururay dad badan, sidaa darteed doonni ayuu fuulay, wuxuuna fadhiistay badda, dadkii badnaana waxay joogeen badda xeebteeda. (Markos 4:1)

Markuu maalintii wax baray kaddib, Ciise wuxuu u sheegay xertiisa, Dhanka kale aan u gudubno. Horeba Ciise wuxuu ku jiray doonnta, sidaa darteed waxaa bilaabeen inay ka baxaan, dadkii badnaa wayna ka tegeen.

Waxaa kacay duufaan weyn oo dabayl ah, hirarkiina doonniday ku dhaceen ilaa ay doonnidii buuxsamaysay. Isaguna wuxuu joogay xaggii dambe ee doonnida isagoo barkin ku hurda. Markaasay toosiyeen oo ku yidhaahdeen, Macallimow, miyaanay waxba kula ahayn inaynu lunno?

> Kolkaasuu kacay oo dabayshii canaantay, oo badduu ku yidhi, Aamus oo xasil.
>
> Markaasaa dabayshii degtay oo xawaal weyn baa dhacday.
>
> Goortaasuu wuxuu iyaga ku yidhi, Maxaad sidaa ugu baqaysaan? Sidee baydnaan weli rumaysad u lahayn?
>
> Aad bay u baqeen, oo waxay isku yidhaahdeen, Haddaba yuu yahay kan xataa dabaysha iyo badduba yeelaan? (Markos 4:37-41)

*Yaa waaye ninkan?* Kumaankun sanadooyin ka hor, nebi Daa'uud waqtigan horti ayaa ka jawaabay su'aasha.

> Oo waxay sameyaan ayay garan waayaan. Markaasay RABBIGA u qayshadaan iyagoo dhibban, Oo isna wuxuu ka soo bixiyaa dhibaatooyinkooda. Wuxuu dejiyaa duufaanka, Si ay hirarkiisu u xasillaan. (Sabuurkii 107:27-29)

Yaa ku dejini karaa dabaysha iyo hirarka hadal fudud oo keliya?

Isla Codkii abuuray iyaga.





# Dhacdada 50

## Awoodda ka sarreeysa Dambiga

Maalin maalmaha ka mid ah, afar niman oo ku sidday bareele nin curyaan ah ayaa imaadeen guriga Ciise uu ku jiray.

Nimanku waxay isku dayeen inay jid banneystaan sida qolka ku gali lahaayeen, laakiin qolka aad baa loo buuxiyay, sidaas darteed ma aysan gali karin. Markay fuleen saqafka, waxay ka saareen marmar [mutuleel] qaar, waxayna meesha ka soo galiyeen bareelaha u ninkii ku jiifay qolka gudahiisa, Ciise hortiisa si toos ah.

> Ciise kolkuu rumaysadkoodii arkay, ayuu ninkii curyaanka ahaa ku yidhi, Wiilkow, dembiyadaadu waa cafiyan yihiin. (Markos 2:5)

Ciise wuxuu ogaay ninkan baahidiisa ugu wayn inaysan ahayn inuu socdo mar kale, laakiin in la cafiyo dambiyadiisa.

> Laakiin halkaa waxaa joogay qaar culimmada ah oo iska fadhiyey oo qalbiyadooda ka fikirayay, oo waxay isku yidhaahdeen, Ninkanu muxuu sidan ugu hadlayaa? Wuu caytamayaa. Yaa dembiyo cafiyi kara Ilaah keliya maahee?
>
> Kolkiiba Ciise ruuxiisuu ka ogaaday inay sidaas qalbiyadooda ka fikirayaan, oo wuxuu ku yidhi, Maxaad waxan qalbiyadiinna ugaga fikiraysaan? Iyama hawl yar, in curyaanka lagu yidhaahdo, Dembiyadaadu waa cafiyan yihiin, ama in lagu yidhaahdo, Kac oo sariirtaada qaado oo soco? Laakiin si aad ku garataan in Wiilka Aadanahu dhulka ku leeyahay amar uu dembiyada ku cafiyo.
>
> Ayuu ninkii curyaanka ahaa ku yidhi, Waxaan ku leeyahay, Kac oo sariirtaada qaado oo gurigaaga tag.
>
> Kolkiiba wuu kacay oo sariirtiisii qaatay; wuuna baxay dadkii oo dhan hortooda, sidaa darteed ayay la wada yaabeen.
>
> Wayna ammaaneen Ilaah, oo waxay yidhaahdeen, Weligayo sidan oo kale ma aannu arag. (Markos 2:6-12)

Culimmada sharciga waxaa indhoole ka dhigay diintooda iyo kibirkooda! Waxay ku fikireen sidan oo kale: *Ciisow, waad caytamaysaa! Waxaad caynaysaa Ilaah, waayo waxaad sheegaysaa inaad cafiso dambiyo, laakiin Ilaah keliya taasi sameeyn kara!*

Waxay ku saxsan yihiin in ay ku fikiraan inuu Ilaah keliya cafin karo dambiyo, laakiin waxay ku qaldamayeen gabaggabadooda ku saabsan qofkuu Ciise yahay.

*Adiga* maxaad umalaynaysaa Ciise inuu yahay? Ma xasuusataa macnihii magaciisa? Waxaa laga wada RABBIGA wuu badbaadinayaa.

Magaalo magaalada Falastiin ka mid ah meeshii Ciise wax ku baray, dadku waxay u imaadeen gabaggabadan:

> Qudhayadu waannu maqalnay, waannuna naqaan kanu inuu runtii yahay Badbaadiyaha dunida. (Yooxanaa 4:42)





# DHACDADA 51

## AWOODDA KA SARREEYSA DHIMASHADA

Ciise wuxuu leeyahay awoodda ka sarreeysa qayb kasta ee abuuritaanka. Weli Isaga muusan wareegin, maana dhahin, "I caabuda! Waxaan ahay Ilaah! Waxaan ahay Ilaah!" Si caadi ah wuxuu sameeyay waxyaalaha Ilaah keliya sameeyn karo, kaddibna dadku ha gaaraan gabaggabadooda.

Ku salee labadan qiso ee soo socota, yaad umalaynaysaa Ciise inuu yahay?

> Markii dambe waxaa noqotay inuu galay magaalada Na'in la odhan jiray; waxaana raacay xertiisii, iyo dad badanba. Oo goortuu iriddii magaalada ku soo dhowaaday, waxaa dibadda loo waday nin meyd ah oo madi u ahaa hooyadiis; iyaduna waxay ahayd carmal. Oo waxaa iyada la jiray dad badan oo magalaada.
>
> Rabbigu goortuu arkay iyada, ayuu u naxariistay oo ku yidhi, Ha ooyin.
>
> Oo intuu ku soo dhowaaday, ayuu taabtay rabrabtii [naxaashkii]. Kuwii sidayna way joogsadeen. Markaasuu yidhi, Dhallinyarow, waxaan kugu leeyahay, Kac.
>
> Kolkaasaa kii dhintay sara fadhiistay oo bilaabay inuu hadlo, oo markaasaa Ciise isagii u dhiibay hooyadiis. Kulligood baqdin baa ku wada dhacday, oo Ilaah bay ammaaneen iyagoo leh. (Luukos 7:11-16)

Maalin kale, Ciise wuxuu booqday laba walaalo oo gabdho ah oo baroorteen, Maarta iyo Maryan. Afar maalmood ka hor, walaalkooda Laasaros ayaa dhintay.

> Markaasaa Maarta waxay Ciise ku tidhi, Sayidow, haddaad halkan joogtid, walaalkay ma uu dhinteen...
>
> Ciise ayaa ku yidhi, Anigu waxaan ahay sarakicidda iyo nolosha. Kii i rumaystaa, in kastoo uu dhinto, wuu noolaan doonaa. Kii kasta oo nool oo i rumaystaa weligii ma dhiman doono. Waxan ma rumaysan tahay?
>
> Waxay ku tidhi, Haah, Sayidow, waan rumaysanahay inaad tahay Masiixa oo ah Wiilka Ilaah ee dunida iman lahaa…
>
> Ciise… ayaa xabaashii yimid. Waxay ahayd god, dhagax baana saarnaa. Ciise ayaa yidhi, Dhagaxa ka qaada.
>
> Maarta oo ahayd kii dhintay walaashiis, waxay ku tidhi, Sayidow, hadda wuu urayaa, waayo, afar maalmood buu mootanaa.
>
> Ciise wuxuu ku yidhi, miyaanan kugu odhan, Haddaad rumaysatid, waxaad arki lahayd ammaanta Ilaah? Markaasay dhagaxii ka qaadeen...Wuxuu ku dhawaaqay cod weyn, Laasarosow, soo bax. Markaasaa kii dhintay soo baxay, isagoo gacmaha iyo cagaha ay karfan kaga xidhan tahay... Kolkaasuu Ciise wuxuu ku yidhi iyaga, Fura oo daaya, ha socdee. (Yooxanaa 11:21,25-27,38-41,43-44)

Rabbiga Ciise wuxuu yahay qofka keliya taariikhda gudaheeda oo dhahi karay,

> ANIGU WAXAAN AHAY sarakicidda iyo nolosha.

Camalooyinkiisu waxay caddeeyeen inay erayadiisa run yihiin.





# DHACDADA 52
## DEEQ BIXIYAHA

Dad badan oo meel ku soo aruureen ayaa raaceen Ciise, mararka qaarkood maalmooyin. Inta badan waxay ka heleen Isaga meelaha cidlada ah, halkaas oo uu tagi lahaa inuu waqti kula qaato xertiisa. Marmar dadkii badnaa way gajoonayeen.

Tani waa waxaa dhacay hal galab markay in ka badan 5,000 oo dad ay is kugu imaadeen daadagga buurta bariga Badda Galili. Sidaas darteed Ciise wuxuu waydiiyay Filibos, hal xertiisa ah,

> Xaggee baynu kibis ka soo iibinnaa inay kuwanu cunaan? Wuxuu waxaas ugu yidhi inuu jirrabo isaga, waayo, isaga qudhiisu waa ogaa wuxuu samayn lahaa.
>
> Filibos wuxuu ugu jawaabay, laba boqol oo dinaar oo kibis ahi kuma fillna in nin walba wax yar qaato.
>
> Markaasaa xertiisii midkood oo Andaros la odhan jiray oo Simoon Butros walaalkiis ahaa wuxuu ku yidhi, Halkan waxaa jooga wiil qaba shan kibsood oo shaciir ah iyo laba kalluun, laakiin waxaasi maxay u tarayaan dad sidan u badan?
>
> Markaasaa Ciise yidhi, Dadka fadhiisiya. Meeshina waxay lahayd doog badan. Haddaba nimankii waa fadhiisteen, tiradooduna qiyaastii waxay ahayd shan kun.
>
> Haddaba Ciise kibistuu qaaday, oo goortuu mahadnaqay ayuu u qaybiyey kuwii fadhiyey, sidaas oo kalena kalluunkii intay doonayeen.
>
> Markay wada dhergeen, wuxuu xertiisii ku yidhi, Ururiya jajabkii hadhay, waxba yaanay ka hallaabin.
>
> Sidaa aawadeed ayay ururiyeen, oo laba iyo toban dambiilood ayay ka buuxiyeen jajabkii ka hadhay kuwii shanti kibsood oo shaciirka ahayd cunay. (Yooxanaa 6:5-13)

Maalintii ku xigtay dadkii qaarkood waxay raadiyeen Ciise. Waxay rabeen inay ka dhigtaan boqorkooda, laakiin sababta keliya waxay ahayd inuu ka badbaadin karay iyaga gumaystayaasha Roomanka inuuna siiyo iyaga cunto badan. Ciise wuxuu u sheegay iyagii,

> Ha u shaqaynina cuntada hallaabaysa, laakiin u shaqeeya cuntada sii jiraysa ilaa nolosha weligeed ah ee Wiilka Aadanahu[19] idin siin doono, waayo, isaga Aabbaha Ilaaha ah ayaa caddeeyey.
>
> Anigu waxaan ahay kibista nolosha. Kii ii yimaadaa ma gaajoon doono, kii i rumaystaana ma harraadi doono weligiis. (Yooxanaa 6:27,35)

Cunto waxay siin kartaa jirkaaga nolol waqti yar, laakiin Rabbiga Ciise keliya ayaa ku siin kara nolosha runta ah, hadda iyo weligeedba. Ciise keliya ayaa dhahi kara,

ANIGU WAXAAN AHAY kibista nolosha.





# Dhacdada 53
## Macallinka

Ciise ma u ahayn sida culimmada, kuwaaso dhaha waxayaalo sidaa, Sameey kan! Ha sameeynin kaas! Raac sharciyadan! Kani waa jidka! Ciise keliya wuu dhahi karay,

> ANIGU WAXAAN AHAY jidka iyo runta iyo nolosha. (Yooxanaa 14:6)

Ciisena sidaa oo kale wuxuu kaga duwana nebiyadii, kuwaaso u hibeeyay allabariyo dambiyadooda dartooda, waxayna qoreen wax ku saabsan Masiixa imaan doonaa. Ciise wuxuu yiri,

> Ha u malaynina inaan u imid inaan sharciga ama qorniintii nebiyada baabbi'iyo; uma aan iman inaan baabbi'iyo, laakiin waxaan u imid inaan wada oofiyo. (Matayos 5:17)

Inta badan Ciise wuxuu baray xertiisa siday waddaniyiinta boqortooyada samada ay ku noolaan lahaayeen si ay u muujiyaan dabciga iyo ammaanta Boqorkooda.

> Waad maqasheen in la yidhi, Waa inaad deriskaaga jeclaatid oo cadowgaaga necbaatid, laakiin waxaan idinku leeyahay, Cadowyadiinna jeclaada, u duceeya kuwa idin habaara, wax wanaagsan u sameeya kuwa idin neceb, oo Ilaah u barya kuwa idin caaya oo idin silciya.
>
> Oo goortaad tukanaysaan, ha ahaanina sida labawejiilayaasha, waayo, waxay jecelyihiin inay tukadaan…si ay dadka ugu muuqdaan. Laakiin adigu goortaad tukanaysid, qolkaaga qarsoon gal, oo goortaad albaabkaaga xidhid, Aabbahaaga meesha qarsoon ku jira bari… Haddaba sidatan u tukada, Aabbahayaga jannada ku jirow, magacaagu quduus ha ahaado. Boqortooyadaadu ha timaado, doonistaada dhulka ha lagu yeelo sida jannada loogu yeelo. Kibis maalin nagu filan, maanta na sii…
>
> Sidaa darteed ha ku welwelina, idinkoo leh, Maxaannu cunaynaa? ama, Maxaannu cabbaynaa? Ama Maxaannu huwanaynaa? Waayo, quruumuhu waxaas oo dhan ayay doondoonaan. Aabbihiinna jannada ku jiraa waa og yahay inaad waxaas oo dhan u baahan tihiin. Laakiin horta doondoona boqortooyadii Ilaah iyo xaqnimadiisa, oo waxaas oo dhan waa laydinku dari doonaa.
>
> Iska jira nebiyada beenta ah, kuwa idiinku imanaya iyagoo qaba dharka idaad, laakiin hoosta ka ah yeey wax boobaysa.
>
> Haddaba qof kasta oo ereyadaydan maqla oo yeela, waxaa loo ekaysiinayaa nin caqli leh oo gurigiisa ka dul dhisay dhagaxa. Roobkii ayaa da'ay, daadkiina waa yimid, dabayshiina waa dhacday, wayna ku dhaceen gurigaas, ma uuna dumin, waayo, waxaa laga dul dhisay dhagaxa.
>
> Qof kasta oo ereyadaydan maqla oo aan yeelin, waxaa loo ekaysiinayaa nin doqon ah oo gurigiisa carrada ka dul dhisay. Roobkii waa da'ay, daadkiina waa yimid, dabayshiina waa dhacday, wayna ku dhaceen gurigaas, wuuna dumay, dumiddiisuna waa weynayd. (Matayos 5:43-44; 6:5-6,9-11,31-33; 7:15,24-27)

Ninna weligiis uma hadlin sida Macallinkii ka yimid jannada.



# Dhacdada 54

## Waynaantiisa

Culimmada iyo wadaaddada dadka Yuhuudda ma aysan ku faraxsanayn inay arkaan dad waynaha oo dhegaysanayeen Ciise. Waxay rabeen dadku inay iyaga dhegaystaan, Isaga aan la dhegaysanin.

Maalin maalmaha ka mid ah wadaaddada sare ayaa soo direen saraakiishooda macbudka inay xiraan Ciise, laakiin maysan sameeyn karin. Markay soo noqdeen, wadaaddada waxay waydiiyeen iyaga, Maxaad u keeni weydeen Isaga? Saraakiishii waxay ku jawaabeen,

> Ninna weligiis uma hadlin sida ninkaasi u hadlay. (Yooxanaa 7:46)

Xataa nebiyada maysan u hadlin sida Ciise. Nebiyadu waxay ahaayeen sida shumacyo fallaaro ilays oo ku iftiimaya duni mugdi ah dhexdeeda, laakiin Masiixa wuxuu ahaa "qorraxdii xaqnimada" (Malaakii 4:2). Yaa u baahan shumacyo, markii qorraxdu soo baxdo?

Ciise wuxuu yiri,

> ANIGU WAXAAN AHAY nuurka dunida. Kii i soo raacaa, gudcurka kuma socon doono, wuxuuse lahaan doonaa nuurka nolosha. (Yooxanaa 8:12)

Ciise wuxuu yahay Erayga oo bilowgii dhahay, "Iftiin ha ahaado." Wuxuu yahay Isha ugu danbaysa ee iftiinka jir ahaan iyo ruux ahaan.

Markuu waqtigii soo dhowaaday Masiixi inuu fuliyo ergadiisa, wuxuu geeyay saddex xertiisa ka mid ah, Butros, Yacquub iyo Yooxanaa buur dheer korkeeda.


> Hortoodana ayuu ku beddelmay, wejigiisuna sida qorraxda oo kale ayuu u dhalaalay, dharkiisuna sida nuurka oo kale ayuu u caddaaday.
>
> Oo bal eeg, waxaa iyaga u muuqday Muuse iyo Eliyaas oo la hadlaya isaga… Intuu weli hadlayay, daruur dhalaalaysa ayaa hadhaysay, oo cod baa daruurtii ka soo baxay oo yidhi,
>
> Kanu waa Wiilkayga aan jeclahay oo aan ku faraxsanahay. Maqla isaga.
>
> Xertiina goortay maqleen, ayay wejigooda u dhaceen, aad bayna u baqeen. Markaasaa Ciise u yimid oo taabtay oo ku yidhi, Kaca, hana baqina.
>
> Goortay indhahooda kor u qaadeen, cidna ma ay arkin Ciise keliya maahee. (Matayos 17:2-3,5-8)

Xerta weligood ma iloobin waxay arkeen maalintaas. Waqti dambe, Butros wuxuu qoray, "waxaannu ahayn markhaatiyaal indhaha ku arkay weynaantiisa!" (2 Butros 1:16) Yooxanaa wuxuuna dhahay, "waxaannu aragnay ammaantiisii, taas oo ahayd ammaantii u ekayd tan Wiilka keliya ee Aabbaha, ee nimco iyo run ka buuxa" (Yooxanaa 1:14).

Laakiin hadda ammaanta Wiilka ayaa ku hari doonta oona ku dhuuman doonta jirkiisa bini-aadanka.

Waxay ahayd waqtigii Boqorku inuu fuliyo ergadiisa.





# Dhacdada 55

## Ergadiisa

Saddex sano, Rabbi Ciise ayaa ku wareegi jiray Falastiin “wanaagna wuu fali jiray, oo wuxuu bogsiin jiray kuwii Ibliisku caddibay oo dhan” (Falimaha Rasuullada 10:38). Dadka caadiga ah waxay jeclaadeen isaga, laakiin taliyaasha diineed oo Yeruusaalem waxay sameeyeen shirqool si ay isaga u dilaan—Ciisena wuu ogaay.

> Goortii waqtigii isaga kor loo qaadi lahaa uu dhowaaday, wuxuu wejigiisa u jeediyey inuu Yeruusaalem tago. (Luukos 9:51)

Haddaad ogaatid inay koox niman xun oo magaalo fog qorsheenayaan inay ku qabsadaan, oo ku ciqaabaan, oona ku dilaan, halkaasi ma tegi lahayd?

Taasi waa wuxuu Ciise sameeyay.

> Kolkaa dabadeed Ciise Masiix ayaa bilaabay inuu xertiisii u sheego inay waajib ugu tahay inuu Yeruusaalem tago, oo xanuun badan ka helo waayeellada iyo wadaaddada sare iyo culimmadda, oo la dilo, oo maalinta saddexaad la sara kiciyo. (Matayos 16:21)

Kani ma ahayn nooca Boqorka xerta ay raadinayeen. *Masiix oo lagu qodbay iskutallaabta? Si shaki la’aan ah Ilaah ma la oggolaan lahayn Kan uu Doortay inuu ku silciyo xanuun iyo ceeb noocaas oo kale ah!* Oo Butros wuxuu ku yiri Ciise,

> Ilaah ha kaa hayo, Sayidow, taasu weligaa kuuma noqon doonto!
>
> Laakiin Butros ayuu u soo jeestay oo ku yidhi, Gadaal iga mar, Shayddaan yahow. Waad i xumaynaysaaye, waayo, waxyaalaha Ilaah kama fikirtid, waxaadse ka fikirtaa waxyaalaha dadka. (Matayos 16:22-23)

Xerta waxay rabeen Masiixa-Boqorka, kaaso burburin lahaa gumaystaha Roomanka ah iyo ka dhisi lahaa dowlad cusub xagga Yeruusaalem. Xataa hadday iyaga safreen, xerta waxay ku doodeen yaa lahaan lahaa jagooyinka ugu sarreeya ee boqortooyada Ilaah dhexdeeda. Sidaa darteed Ciise wuxuu u sheegay xertiisa,

> Ku alla kii doonaya inuu dhexdiinna u weynaado, midiidinkiina waa inuu ahaado …sida Wiilka Aadanahu uusan ugu iman in loo adeego laakiin inuu adeego iyo inuu naftiisa dad badan furashadooda u bixiyo.
> (Matayos 20:26,28)


Imaatinka ugu horreeya dunida, Masiixa muusan u imaanin inuu ka guulaysto boqortooyooyinka siyaasada ah iyo inuu xukumo carshiyo dunida: wuxuu u imaaday inuu ka guulaysto Shayddaanka iyo inuu xukumo qalbiyada bini-aadanka gudahooda. Taasi waa sababtuu Ciise u baray,

> Boqortooyada Ilaah waa idinku dhex jirtaa. (Luukos 17:21)

Laakiin horta Boqorka jannadu intuu karay inuu xukumo qalbiyada gudahooda (kaddibna dunida oo dhan korkeeda), daynta dambiga dunida waa inay bixiso iyo dhimashada waa in laga guulaysto.

*Taasi* waxay ahayd ergadiisa.





# Dhacdada 56
## Boqorka wuxuu galaya Yeruusaalem

Wax kasta waxay ku socdeen sida loo qorsheeyay. Intuu Rabbigu Yeruusaalem u soo dhowaanayay, wuxuu u diray laba xertiisa ka mid ah adeeg.

> Isagoo leh, Tuulada idinka soo hor jeedda taga, tan goortaad gashaan aad ka helaysaan qayl xidhan oo aan ninna weligii fuulin; soo fura oo keena. Haddii laydin weyddiiyo oo laydinku yidhaahdo, Maxaad u furaysaan? Waxaad ku tidhaahdaan, Sayidkaa u baahan.
>
> Markaasay kuwii la diray tageen oo heleen sidii lagu yidhi. Kolkay qaylka furayeen ayaa kuwii lahaa ku yidhaahdeen, Maxaad qaylka u furaysaan?
>
> Waxay ku yidhaahdeen, Sayidkaa u baahan. Markaasay Ciise u keeneen, oo dharkoodii bay qaylkii dusha ka saareen, oo Ciise ayay fuusheen.
>
> Oo intuu socday, dharkoodii ayay jidka ku gogleen. Goortuu ku soo dhowaanayay xataa meeshii Buur Saytuun laga dego, dadkii oo dhan oo xertii ahaa ayaa bilaabay inay farxaan, oo cod weyn Ilaah ku ammaanaan waxa xoogga leh oo dhan oo ay arkeen aawadood, iyagoo leh, Waxaa barakaysan Boqorka Rabbiga magaciisa ku imanayaa. Nabaddi jannada ha ku jirto, amaantuna meelaha ugu sarreeya.
>
> Farrisiintii[20] qaarkood oo dadkii badnaa ku dhex jiray ayaa ku yidhi, Macallimow, xertaada canaano.
>
> Markaasuu u jawaabay oo ku yidhi, Waxaan idinku leeyahay, Kuwani hadday aamusaan, dhagaxyada ayaa qaylin doona. (Luukos 19:30-40)

Waa boqor boqorrada ka duwan!

Masiixa-Boqorka ah caasimadda kuma soo galin buuqa turumbooyinka iyo ciidan xoog badan. Ma ku galin faras dagaal oo geesi ah. Wuxuu ku galay oo watay dameer hooseeya xag darajo—dameer yar, dameer weligii aan la isticmaalin (kaasoo sida caadiga ah haraantami lahaa oo biqli lahaa), xayawaan leh calaamada iskutallaabta oo ku yaala dhabarkiisa iyo garabahiisa, oo ugu muhiimsan, waa xayawaanka keliya kasoo fulin karay wuxuu nebi Sekaryaah qoray shan boqol oo sanadood ka hor:

> Magaalada Yeruusaalemay, qayli. Bal eeg, boqorkaagu waa kuu imanayaa. Isagu waa xaq oo guul buu leeyahay, waana qalbi qabow yahay, oo wuxuu fuushan yahay dameer ah qayl dameereed. (Sekaryaah 9:9)

Masiixa-Boqorka ah muxuu ugu galin Yeruusaalem faras dagaal oo xoog leh? Maxaa yeelay muu u imaanin inuu ka badbaadiyo dadka gumaystaha Roomanka ah.

Wuxuu u imaaday inuu ka badbaadiyo dadkiisa dambiyadooda.





# Dhacdada 57

## Boqorka waa la su'aalay

Maalmaha xiga ee muddada gaaban ah, Ciise wuxuu baray dadka joogay macbudka, meeshuu markuu wiilka ahaa kaga yaabsiiyay culimmada su'aalahiisa adkaa iyo jawaabooyinkiisa xigmadda leh. Hoggaamiyaasha macbudka hadda waxay lahaayeen fikirad ka duwan tii hore.

> Dooni mayno ninkaas inuu boqor noo ahaado. (Luukos 19:14)

Haddaba waxay Ciise ku weerareen su'aalo adag, iyagoo rajaynayaan inay dadka caadiga ah inay Isaga ka soo horjeestaan.

> Wayna dayayeen, oo ay u soo direen jaajuusiin iska dhigaya dad xaq ah, si ay hadalkiisa ugu qabtaan, oo ay ugu gacangeliyaan talada iyo amarka taliyaha.
>
> Markaasay weyddiiyeen oo ku yidhaahdeen, Macallimow, waxaannu og nahay inaad si hagaagsan wax u tidhaahdo oo wax u bartid, oo annad ninna u eexan, laakiin aad jidka Ilaah run ku bartid. Ma xalaal baa inaannu cashuur Kaysar siinno ama inaannan siin? (Luukos 20:20-22)

Ciise muxuu ugu jawaabi doonaa? Hadduu oran lahaa: Haah, cashuur bixiya Suldaanka, beesha Yuhuuda waxay ku eedeeyni lahaayeen inuu kula dhaqmay daacaddarrada ujeeddadooda. Dhinaca kale, hadduu Ciise ku jawaabi lahaa, Maya, cashuur ha bixinina, guddoomiyaha Roomanka waxaas ayuu ka maqli lahaa iyo wuxuu ku cambaareen lahaa qarandumis.

> Laakiin khiyaanadooda wuu gartay, oo wuxuu ku yidhi, Dinaar i tusa. Yaa leh masawirkan iyo qorniinkan ku yaal?
>
> Waxay yidhaahdeen, Kaysar baa leh.
>
> Markaasuu ku yidhi, Haddaba Kaysar siiya wixii Kaysar leeyahay, Ilaahna siiya wixii Ilaah leeyahay.
>
> Hadalkiisa way ku qaban kari waayeen dadka hortiisa, wayna ka yaabeen jawaabtiisa, oo way aamuseen. (Luukos 20:23-26)

Mar iyo mar kale, kooxo oo kala duwan ee culimmad diineed ayaa dabin u qooleen Ciise, laakiin mar kasta wuxuu ugu jawaabay iyaga xigmad kaamil ah.

> Maalintaas dabadeed ninna kuma dhicin inuu mar dambe wax weyddiiyo. (Matayos 22:46)

Markii la ceebaystay, nimanka way siibteen oo waxay la sameeyeen shirqool wadaaddada sare si ay u xiraan Ciise una dilaan. Waa maxay indhoolenimada! Wadaaddadan waxay masuulka yihiin inay u hibeeyaan allabariyada macbudka meesha allabariga korkeeda, ma garanaynin Ninkii ay rabeen inay dilaan inuu yahay midka kaasoo lagu muujiyay allabaryadaas.

Ilaah qorshehiisa qarsoodiga ah way soo dhowaatay inuu fuliyo.





# Dhacdada 58

## Boqorka waa la xiray

Waxay ahayd habeenkii Iidda Allabariga sanadlaha ah oo loo yaqaano Kormaridda.[16] Maalinta ku xigtay waxay ahayd in kumanaan wan la gowraco.

In kastoo Ciise ogaay in Isagana la dili doono maalinta ku xigtay, wuxuu la qaatay habeenkii xertiisa, wuxuuna la wadaagay cashada ugu danbayso. Markay casheenayeen wuxuu qaatay rooti, wuu barakeeyay, wuxuuna kala jabiyay iyo wuxuu siiyay iyaga si ay u cunaan. Wuxuuna u dhaadhaafiyay koob. Wuxuu u sheegay rootiga jabsan waa inuu ka dhigo iyaga inay xasuustaan jirkiisa iyo cabitaanka guduudan waa dhiiggiisa, kaaso uu daadin doono si uu ula galo axdi cusub oo dambidhaafka dambiyada.

Saqdhexe wuxuu geeyay xertiisa beer oo la yiraahdo Getsemane. Halkaani, wuxuu ogaanayaa argaggaxyada soo socda, wuxuuna ka barayay Aabbihiisa.

Markaasaa, sida iyagoo u socda af gambis, culimmada waxay la imaadeen niman badan oo hubaysan. Ciise wuxuu iyaga ku yiri,


> Ma waxaad iila soo baxdeen seefo iyo ulo inaad i qabataan sidaan tuug ahay? Maalin walbaba macbudka ayaan fadhiyi jiray oo wax bari jiray, imana aydnaan qabsan. Laakiin waxan oo dhan ayaa noqday in qorniinka nebiyadu rumoobo.
>
> Markaasaa xertii oo dhammu ka wada tageen oo carareen. (Matayos 26:55-56)

Ciise wuxuu aqbalay inay xiraan Isaga oo la geeyo Isaga guriga wadaadka sare meesha ay taliyaasha Yuhuuda tuurnayeen. Meeshaas niman badan waxay been uga sheegeen Ciise.

> Markaasaa wadaadkii sare dhexda istaagay oo Ciise weyddiiyey isagoo leh, miyaanad waxba ka jawaabayn? Kuwanu waxay kugu marag furayaan waa maxay? Isaguse waa iska aamusay oo waxba uma jawaabin. Mar kale wadaadkii sare ayaa weyddiiyey oo ku yidhi, Miyaad tahay Masiixa oo ah Wiilka Kan la ammaano?
>
> Ciise baa yidhi, Waan ahay, oo waxaad arki doontaan Wiilka Aadanaha oo fadhiya midigta xoogga Ilaah, oo ku imanaya daruuraha cirka.
>
> Markaasaa wadaadkii sare dharkiisii jeexjeexay oo yidhi, Maxaannu markhaatiyaal weli ugu baahan nahay? Waad maqasheen caytanka. Maxay idinla tahay?
>
> Kulligood waxay xukumeen inuu dhimasho istaahilo.
>
> Qaar waxay bilaabeen inay candhuuf ku tufaan oo wejigiisa daboolaan oo garaacaan, waxayna ku yidhaahdeen, Wax sheeg. Askartiina way dharbaxeen. (Mark 14:60-65)

Maxkamadda Yuhuuda waxay amreen xukun dil ah, laakiin ma lahayn awoodda inay fuliso. Maxkamadda Roomanka keliya ayaa taas sameeyni kartay.





## Dhacdada 59

# Boqorka waa la cambaareeyay

Waxay ahayd aroortii hore markay taliyaasha diineed iyo dad badan oo ay tiradooda sii badanaysay ay Ciise ka wadeen guriga wadaadka sare oo mariyeen waddooyinka Yeruusaalem ilaa madaxtooyada guddoomiyaha Roomanka Bontiyoos Bilaatos.

Taliyaasha diineed waxay rabeen Bilaatos inuu Ciise dil ku xukumo.

> Kolkaasay bilaabeen inay ku ashtakeeyaan iyagoo leh, Waxaannu aragnay ninkan oo quruuntayada rogaya, oo diidaya in Kaysar cashuur la siiyo, oo odhanaya inuu qudhiisu yahay Masiix oo boqor ah.
>
> [Markay waydiiyeen Ciise kaddib] Dabadeed Bilaatos wuxuu wadaaddadii sare iyo dadkii ku yidhi, Anigu ninkan eed kuma aan helin. (Luukos 23:2,4)
>
> Way u jawaabeen oo ku yidhaahdeen, Ninkanu haddaanu ahayn xumaanfale, kuuma aannu soo gacangelinneen…
>
> Bilaatos haddaba guriga taliyaha ayuu mar kale galay oo Ciise u yeedhay, oo wuxuu ku yidhi, Adigu ma waxaad tahay Boqorka Yuhuudda? … Maxaad samaysay?
>
> Ciise ayaa ugu jawaabay, Boqortooyadaydu tan dunidan ma aha. Haddii boqortooyadaydu tan dunidan tahay, midiidinyadaydu waa ii diriri lahaayeen inaan Yuhuudda la ii gacangelin. Imminkase boqortooyadaydu tan halkan ma aha.
>
> Sidaa daraaddeed Bilaatos ayaa ku yidhi, Haddaba ma boqor baad tahay?
>
> Ciise ayaa ugu jawaabay, Waad tidhaahdaa inaan boqor ahay. Taas ayaan u dhashay, oo taas ayaan dunida u imid, inaan marag u furo runta. Mid kasta oo kan runta ah wuu maqlaa codkayga.
>
> Bilaatos ayaa ku yidhi, Waa maxay runtu?
>
> Oo markuu sidaa ku yidhi, mar kale ayuu Yuhuudda u baxay oo ku yidhi, Eedna isagii kuma aan helin. (Yooxanaa 18:30,33,35-38)

Laakiin dadkii badnaa way sii qayliyeen iyagoo leh,

> Iskutallaabta ku qodob, iskutallaabta ku qodob.
>
> Markaasuu wuxuu kolkii saddexaad ku yidhi, Waayo? Waa maxay sharka kanu sameeyey? Kuma aan helin sabab lagu dilo, taas aawadeed waan edbinayaa oo sii daynayaa.
>
> Laakiin cod weyn ayay ku adkaysteen iyagoo weyddiisanaya in iskutallaabta lagu qodbo, oo waxaa xoog batay codadkoodii. (Luukos 23:21-23)

Bilaatos wuxuu ogaay inuu Ciise dambi lahayn, laakiin maadaama uu ka cabsanayay taliyaasha diineed iyo dadkooda badnaa, markaa wuxuu ku xukumay Ciise dil.





# Dhacdada 60

## Boqorka waa la caleemasaaray

Bilaatos wuxuu ku xukumay Ciise ciqaab aad u daran oo sharciga Roomanka ah: garaac naxariis la'aan ah oo loogu sii daray dilkii ku qodbidda iskutallaabta. Dhibbanayaashii la xukumay waxaa lagu karbaashay shabuugo oo bir afaysan ku dhegdhegan yihiin.

Todobba boqol oo sanadood ka hor, Rabbiga ayaa amray nebi Ishacyaah inuu qoro:

> Kuwii i karbaashay ayaan dhabarkaygii u duway, oo kuwii timaha iga rifayna dhabannadaydaan u duway. Wejigaygiina ceeb iyo candhuuf toona kama aan qarin. (Ishacyaah 50:6)

Injiilka wuxuu noo sheegayaa wixi dhacay markii Rabbiga la karbaashay kaddib:

> Markaasaa taliyaha askartiisii waxay Ciise geeyeen guriga taliyaha, oo waxay isaga ku soo ururiyeen askartii oo dhan.
>
> Dharkiisii ayay ka qaadeen oo waxay u geliyeen dhar guduudan.
>
> Markaasay taaj qodxan uga taxeen oo madaxiisay saareen, cawsduurna gacantiisa midigtaa ayay u geliyeen, oo intay hortiisa jilba joogsadeen oo ku majaajiloodeen ayay waxay ku yidhaahdeen, Nabad, Boqorka Yuhuuddow. Wayna ku candhuufeen, markaasay cawsduurkii ka qaadeen oo madaxay kaga dhufteen. (Matayos 27:27-30)

Askarta ma garanaynin macnaha taajka qodxaha leh ee ay Ciise madaxa xoog ugu ciriiriyeen. Qodxaha waxay ka tirsanayeen habaarka ku imaaday dunida dambiga Aadan dartiis. Boqorka ammaanta leh oo quduusan wuxuu u imaaday inuu naga qaado habaarka dambiga.

> Oo goortay ku majaajiloodeen dabadeed ayay dharkii ka qaadeen oo dharkiisii bay u geliyeen, markaasay wadeen in iskutallaabta lagu qodbo. (Matayos 27:31)

Laba dambiile oo la xukumay ayaa lala bixiyay Ciise. Mid kasta waxaa loo saariyay iskutallaabtiisa inuu qaato ilaa meesha lagu dili lahaay.

Haddaba bannaanbaxa oo aad u xun, askartii Roomanka waxay ku qasbeen nin ka yimid waqooyiga Afrika inuu u qaado Ciise iskutallaabtiisa isaga. Kaddib, way sii socdeen, waxay sii mareen waddooyinkii cariiriga ee Yeruusaalem, derbiyada magaalada bannaankeeda ee ilaa la fuulo buurta la yiraahdo Golgota, qaybta waqooyiga Buurta Moriyaah, meeshan waa halkii 1,900 oo sanadood ka hor, nebi Ibraahim ku yiri,

> Ilaah qudhiisaa keeni doona wankii allabariga la gubo loo bixin lahaa, wiilkaygiiyow. (Bilowgii 22:8).

Waxay ahayd waqtigii uu Wankaas dhimman lahaa.





# Dhacdada 61

## Boqorka waa la qodbay

Dilka iskutallaabta waa dilka aadka u daran ee qaabka dowladdu taageerto oo weligeed la sameeyay. Inuu ku daro ceebta bulshada hortooda xanuun aad u daran, askartii Roomanka waxay soo saareen dhibbanayaasha iyagoo wada qaawan intaynaan ku durin musmaaro gacmahooda iyo cagahooda iskutallaab ama geed.

> Markay yimaadeen meeshii la yidhaahda dhakada, halkaasay iskutallaabo ku qodbeen isaga iyo xumaanfalayaashii, mid midigta, kan kalena bidixda. Markaasaa Ciise wuxuu yidhi, Aabbow, iyaga cafi, waayo, garan maayaan waxay samaynayaan.
>
> Markaasay dharkiisii qaybsadeen, wayna saami riteen. Dadkuna way taagnaayeen iyagoo daawanaya. Taliyayaashuna way ku qosleen iyagoo leh, Kuwa kale ayuu badbaadiyey, kanu ha isbadbaadiyo, hadduu yahay Masiixa Ilaah, kan uu doortay. (Luukos 23:33-35)

Hadduu Ciise isbadbaadin lahaa, ma uusan ina badbaadin lahayn. Dadkii badnaa wax fikrad ah kama ay haysan inay fulinayaan wuxuu Rabbiga ku yiri nebi Daa'uud:

> Oo waxay iga mudeen gacmaha iyo cagaha…Oo iyagu way i fiiriyaan oo igu dhaygagaan, Dharkayga bay qaybsadaan, Oo maradaydana saami bay u ritaan…Oo kuwa i arka oo dhammu way igu qoslaan, Bushimahay yuubaan, oo madaxay lulaan, iyagoo leh, RABBIGUU…ha samatabbixiyo. Bal isagu waa kan ku faraxsane hadda ha samatabbixiyo. (Sabuurkii 22:16-18,7-8)

Ilaah qorshehiisa badbaadinta ah waa lagu fuliyay tallaabo kasta.

Isla buurtii[11] halkii nebi Ibraahim ku yiri, "Ilaah qudhiisaa keeni doona wankii," iyo "RABBIGA siin doona," (Bilowgii 22:8,14), Ilaah wuxuu siiyay Wankiisa qudhiisa ah—Ciise.

Ma xasuusataa sidii wankii geesaha [sumalkii] eedlawaha ahaa lagu kor gowracay qoriyaha meesha allabariga in madaxfurasho ahaan Ibraahim wiilkiisa loogu xukumay? Imminka Wiilka Ilaah oon dambi lahayn waxaa lagu gowracay iskutallaab qori leh inuu madaxfurasho Aadan farcankiisa loogu xukumo. Ilaah wuxuu badbaadiyay Ibraahim wiilkiisa, laakiin Isaga "aan xataa Wiilkiisa lexejeclaysan, laakiinse innaga dhammaanteen u bixiyey." (Rooma 8:32).

> Ilaah intuu dunida jacayl u qabay ayuu siiyey Wiilkiisa keliya oo dhashay in mid kastoo isaga rumaystaa uusan lumin laakiinse uu lahaado nolosha weligeed ah. (Yooxanaa 3:16)
>
> Waxaad og tihiin inaan dabiicaddiinnii bilaashka ahayd oo aad awowayaashiin ka dhaxasheen laydinkaga soo furan waxyaalaha baabba'aya oo ah sida lacagta iyo dahabka, laakiinse waxaa laydinku soo furtay dhiiggii qaaliga ahaa oo Masiix oo ah sidii wan yar oo aan wax ceeb ah iyo iin toona lahayn. (1 Butros 1:18-19)

Sidaas ayaad xagga Ilaah qiimo uga leedahay.





# DHACDADA 62

## BOQORKA-BADBAADIYAHA AH

Si uu u fuliyo qorshaha Ilaah ee badbaadinta, Rabbiga Ciise wuxuu dareemay ceebta uu dambi keenayo. Isaga ayaa habaarkii ku dhacay baddalkeennii. Wuxuu qaatay ciqaabtii anaga u aan u qalanay.

Maalintuu Aadan sharciga Ilaah jabiyay, Ilaah wuxuu caddeeyay inuu maalin Masiixa burburin doono Abeesada. Ilaah wuxuu u sheegay Shayddaanka,

> Madaxaaguu burburin doonaa, adiguna cedhibtiisaad burburin doontaa. (Bilowgii 3:15)

Waxyigan qadiimiga ah oo qarsoodiga ah oo ku saabsan Shayddaanka inuu burburin doono Badbaadiyaha ceribtiisa waxaa waxsheegay ceebta iyo xanuunka Wankii Ilaah inuu ku silci doono iskutallaabta markii "isaga loo dhaawacay xadgudubyadeenna" (Ishacyaah 53:5).

Kuwaasi Ciise iskutallaabta ku qodbeen ma ogayn Ilaah qorshehiisa qarsoodiga ah.

> Tan madaxda waqtigan midkoodna aanu garanaynin, waayo, hadday garan lahaayeen, iskutallaabta kuma ay qodbeen Rabbiga ammaanta.
>
> Waayo, hadalka ku saabsan iskutallaabtu waa u nacasnimo kuwa lumaya, laakiin waa u xoogga Ilaah kuweenna badbaadaya. (1 Korintos 2:8; 1:18)

Iskutallaabta Ciise waxay u dhexaysay labo xumaanfalayaal.

> Xumaanfalayaashii deldelnaa midkood ayaa caayay isagoo leh, Miyaanad ahayn Masiixa? Annaga iyo qudhaadaba badbaadi.
>
> Laakiin kii kale ayaa jawaabay oo canaantay isagoo leh, Miyaanad xataa Ilaah ka baqin, waayo, isku xukun baad tihiin? Waayo, innaga waa inoo xaq, maxaa yeelay, waxaynu helnay abaalkii wixii aynu falnay, ninkanuse wax aan jid ahayn ma uu falin. Markaasuu ku yidhi, Ciisow, i xusuuso goortaad boqortooyadaada ku timaado.
>
> Wuxuu ku yidhi, Runtii waxaan kugu leeyahay, Maanta Firdooska ayaad igula jiri doontaa. (Luukos 23:39-43)

Xumaanfalahii kowaad wuxuu rabay keliya in laga badbaadiyo xanuunka jirkiisa. Ma uusan ku fikirin inuu u baahan yahay Badbaadiyaha inuu u dhinto baddalkiisa.

Xumaanfalahii labaad wuxuuna caayay Ciise. Laakiin markuu sakaraadka gaaray, qalbigiisa ayaa is baddalay. Wuxuu rabay Rabbiga inuu ka badbaadiyo Shayddaanka boqortooyadiisa. Wuxuu rabay inuu noqdo mid ka mid ah kuwa qabaan waddaninimada oo ku jira boqortooyada Ilaah, hadduu Boqorku aqbali doono isaga. Ciise jawaabtiisa waa shaki la'aan:

> Maanta Firdooska ayaad igula jiri doontaa. (Luukos 23:43)

Habeenkaas labadii xumaanfalayaal way dhinteen. Mid wuxuu tegay naarta. Midka kalena wuxuu tegay jannada. Maxay ku kala duwanayeen?

Mid muu aamminin Badbaadiyaha-Boqorka ah. Midka kalena wuu aamminay.





# Dhacdada 63

## Allabarigii ugu dambeeyay

Waa duhur. Ciise wuxuu durbaba ku qodbanaa iskutallaabta muddo saddex saacadood ah. Daruuro madow ayaa soo degeen oo dhulka mugdi ka dhigay. Maalinta waxay noqotay sida habeen. Dadka fiirsanayay ee cabsanayay way kala cararayaan. Aammuusnaan cabsi leh ayaa buurta dabooshay. Saddex saacadood kaddib, Ciise ayaa cod wayn ku dhawaaqay,

> Ilaahayow, Ilaahayow, maxaad ii dayrisay? (Matayos 27:46)

Meesha allabariga iskutallaabta, Wiilka Ilaah oo daa'imka ah wuxuu dareemay argaggax inuu ka kala-fogaanayo Ilaaha samada ku jira. Saacadaas mugdiga leh, waxaa laga qariyay indhihii bini-aadanka, Ilaah wuxuu qaaday dambiyadeenna oo dhan, wuxuuna dul saaray Wiilkiisa quduusan. Ciise wuxuu noqday allabariga ugu dambeeya ee dambiga.

Marka dambiyada waqtiga hore, waqtigan, iyo waqtiga mustaqbalka ah ee dunida la saaray Ciise, Ilaaha samada ku jiro waa inuu fiiriyo dhan kale waayo "indhihiisu [waxay] ka sii daahirsan yihiin inay wax shar ah eegaan" (Xabaquuq 1:13). Muddo dheer oo saddex saacadood ah, Ilaah caradiisa ka dhanka ah dambiga waxay gubay allabarigiisa qudhiisa. Sida wanka allabariga meesha allabariga dusheeda, Wankii Ilaah waxaa lagu suray iskutallaabta samada iyo dunida dhexdooda, Ilaah iyo bini-aadanka dhexdooda. Midka daa'imka ah ayaa u adkaystay naarteenna waqtigaas si aanan ugu baahanin inaan u adkaysano daa'im.

Kaddibna way kaamilantahay.

Isagoo og inuu garbaha u dhigtay edbinta la edbin lahaa dambiilayaasha oo weliba fuliyay waxyaalihii laga sheegay Axdigii Hore, Ciise wuxuu yiri,

> Waa dhammaatay. Markaasuu madaxa foororshay oo ruuxii bixiyey. (Yooxanaa 19:30)

> Oo bal eeg, daahi macbudka ayaa kor ilaa hoos laba u kala dillaacay, dhulkiina waa gariiray, dhagaxyadiina waa kala dildillaaceen. (Matayos 27:51)

Qarniyaal badan ayaa wanan la dilay, waxaana lagu gubay meesha allabariga macbudka. Markuu Ciise dhintay, Ilaah wuxuu kala dillaaciyay daahii qarinayay qolka khaaska ah oo ahaa meeshii dhiigga lagu firdin jiray sanad kasta inuu daboolo dambiga. Markuu kala dillaacay daaha, Ilaah wuu ogaysiinayay: *Waa dhammaatay! Daynta dambiga waa la bixiyay kulli. Wankayga ayaa daadiyay dhiiggiisii quduusan dambiga dunida dartiisa. Hadda kaddib ma u aqbali doono dhiigga xayawaanka dambiyada dartooda. Wiilkayga aan jeclahay ayaa Allabariga Ugu Dambeeyo ah. Kuwa rumaysato oo dhan, irridda jannada way furantahay aad iyo aad!* (Bal eeg kitaabka Cibraaniyada Axdiga Cusub.)

Toddobo boqol oo sanadood ka hor, nebi Ishacyaah ayaa qoray,

> Waxaa isaga loo dhaawacay xadgudubyadeenna, waxaana loo nabareeyey xumaatooyinkeenna, edbintii nabaadiinadeennana dushiisay ku dhacday, dildillaaciisiina waynu ku bogsannay. Dhammaanteen sidii ido baynu u hallownay, midkeen waluba jidkiisuu u leexday, oo RABBIGU wuxuu isaga dul saaray xumaanteenna oo dhan. (Ishacyaah 53:5-6)

Way dhammaatay.





# Dhacdada 64

## Boqorka waa la aasay

Ciisihii reer Naasared waa dhintay. Si uu hubsado, askariga wuxuu ku duray waran dhinaciisa si xoog leh. Dhiig iyo biyo ayaa ka burqadeen.

Rajooyinkii Xerta waa la burburiyay. Fikirka Ciise inuu burburinayo dadka Roomanka ah iyo si uu uga sameeyo boqortooyadiisa dunida korkeeda, xerta weli maysan fahansanayn ballankiisa inuu ahaa inuu soo sarakaco maalinta saddexaad.

Inta badan meydadkii dhibbanayaasha oo lagu qodbay iskutallaabta waxaa lagu tuuray qashin qubka magaalada bannaankeeda ama xabaal wadareedyo. Laakiin Ciise jirkiisa ma la tuurin.Toddoba boqol oo sanadooyin ka hor, nebi Ishacyaah wuxuu qoray,

> Xabaashiisiina waxaa lagu daray kuwii sharka lahaa, dhimashadiisiina mid taajir ahaa... (Ishacyaah 53:9)

Ilaah wuxuu u qorsheeyay Wiilkiisa in lagu aaso xabaal xushmad leh.

> Goortay casarkii ahayd waxaa yimid nin reer Arimataya oo hodan ah oo Yuusuf la odhan jiray, oo isaguna Ciise xertiisa ahaa. Kaasu wuxuu u tegey Bilaatos oo ka baryay Ciise meydkiisii. Markaasaa Bilaatos amray in la dhiibo. (Matayos 27:57-58)

Ciise dhimashadiisa ka hor, Yuusufka Arimataya iyo saaxiibkiisa Nikodemos waxay ahaayeen xertii qarsoodiga ee Ciise Masiix. Waxay ka cabsanayeen taliyaasha diineed. Laakiin markay arkeen Ciise oo iskutallaabta ku silcayo, ma cabsanin marnaba. Oo waxay qaateen meydka Ciise, way dhaqeen, waxayna ku duubeen karfan nadiif ah oo 35 kiilo oo malmal, isku nooc oo dhir qaali ah, nimankii xigmad lahaa ay siiyeen cunugga la yiraahdo Ciise. Kaddib waxay dhigeen meydkii xabaashii Yuusuf ee cusbayd. Markay ku garangariyeen dhagax aad u wayn meesha guud ee laga galo, way soo galbadeen.

Waxay ahayd aas boqoreed, boqor u qalma.

Subaxii xigay, taliyaasha diineed waxay u yimaadeen Bilaatos.

> Oo waxay ku yidhaahdeen, Sayidow, waxaannu xusuusan nahay in khaa'inkaasu yidhi, intuu weli noolaa, Saddex maalmood dabadeed waan soo sara kacayaa. Haddaba amar in xabaashii aad loo dhawro ilaa maalinta saddexaad inaan xertiisu iman oo xadin oo aanay dadka ku odhan, Kuwii dhintay wuu ka soo sara kacay, oo aanay khiyaanada dambe ka sii xumaan tii hore.
>
> Bilaatos wuxuu ku yidhi, Waardiyayaal baad leedihiin. Taga oo adkeeya in alla intaad adkayn taqaaniin. Markaasay tageen, iyaga iyo waardiyayaashii, oo xabaashay soo adkeeyeen, dhagixiina way shaabadeeyeen. (Matayos 27:63-66)

Isla mar ahaantaas, xabaashii dhexdeeda maxaa ku dhacayay Ciise meydkiisa?

Waxba.





# Dhacdada 65

## Xabaasha eberka ahayd

Tan iyo maalintu Aadan dambaabay, Dhimashadu waxay u xukumtay reerka insaanka sida boqor xaasid ah. Hadduu Ciise weligii dambaabi lahaa, Dhimashadu sidoo kale waxay sameeyn lahayd in jirkiisu bilaabo inuu qurmo, shiiro iyo tartiib-tartiib u noqdo dhoobo. Laakiin 1,000 sano ka hor, nebi Daa'uud wuxuu qoray,

> Kaaga quduuska ahna uma dayn doontid inuu qudhun arko.
> (Sabuurkii 16:9-10)

Dhimashada iyo xabaasha ka ma xoog badna Midka aan weligiis dambaabin.

Maalinta saddexaad marka Ciise la dilay oona la aasay kaddib, Axadda aroortii naagaha qaarkood ayaa imaadeen xabaasha si ay u tusaan xushmaddooda. Si kadis ah, waxaa dhacay dhulgariir wayn, markay malaa'igta hoos uga soo degaysay samada, dhagaxa ay gees u riixday, waxayna kor fadhisatay dhagaxa. Askartii way suuxeen, laakiin malaa'igta waxay u sheegtay naagaha,

> Ha baqina, waayo, waxaan ogahay inaad doonaysaan Ciise, kan iskutallaabta lagu qodbay. Halkan ma joogo, waayo, wuu sara kacay siduu yidhi. Bal kaalaya oo arka meeshii Rabbigu jiifay. Dhaqso u taga, oo waxaad xertiisii ku tidhaahdaan, Kuwii dhintay ayuu ka soo sara kacay…
>
> Dhaqsoba waxay xabaashii kala tageen baqdin iyo farxad weyn, oo way u ordeen inay xertiisa u warramaan.
>
> Kolkaasaa Ciise ka hor yimid oo ku yidhi, Nabad. Markaasay u dhowaadeen oo intay cagihiisa qabteen ayay caabudeen. (Matayos 28:5-9)

Isla mar ahaantaas, askarta waxay imaadeen magaalada waxayna u sheegeen taliyaasha diineed wixii dhacay. Sidaas darteed hoggaamiyaha waxay ku laluusheen iyaga lacag badan, waxayna u sheegeen,

> Waxaad tidhaahdaan, Xertiisii ayaa habeennimo timid oo xadday isaga intii aannu hurudnay. (Matayos 28:13)

Laakiin beentooda ma qarini karin runta. *Xabaashii waxay ahayd eber!*

Dhimashadiisa, Ciise wuxuu ku bixiyay dambiga daynteenna.
Aaskiisa, Ciise wuxuu hoos u imaaday godka dhimashada iyo qurunka.
Sarakiciddiisa, Ciise wuxuu ka guulaystay Dhimashada, wuxuuna dhahayaa hadda,

> Ha cabsan. Anigu waxaan ahay kan ugu horreeyey iyo kan ugu dambeeya, iyo kan nool. Anigu waan dhintay, oo bal eeg, waan noolahay tan iyo weligayba, oo waxaan haystaa furayaasha dhimashada iyo Haadees [meeshii kuwii dhintay]. (Muujintii 1:17-18)

Kulli kuwa rumaysan warkan wanaagsan, Dhimashadu waa irrid caadi ah oo ku hoggaaminaysa agagaarka Boqorka dhahaya,

> Waan noolahay, taas aawadeed idinkuna waad noolaan doontaan.
> (Yooxanaa 14:19)





# DHACDADA 66
# FARRIINTA NEBIYADA

Maalintii sarakiciddiisa, Ciise wuxuu isku muujiyay dad badan oo xertiisa ka mid ah: marka ugu horreeysa naagaha, kaddibna Butros, kaddibna laba musaafiriin ah…

> Laba ka mid ah iyaga waxay maalintaas qudheeda ku socdeen tuulo la odhan jiray Emma'us, tan Yeruusaalem u jirtay lixdan istaadiyon.
>
> Oo waxay noqotay…in Ciise qudhiisa u soo dhowaaday oo la socday. Laakiin waa la indhasaabay si aanay u garanayn. Markaasuu ku yidhi, Maxay yihiin hadalladan aad isku haysaan intaad socotaan?
>
> Wayna istaageen iyagoo fool qulubsan. Midkood oo Kale'obas la odhan jiray, ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Ma adigoo keliya oo Yeruusaalem deggan oo aan ogayn wixii ayaamahan meeshaas ka dhacay?
>
> Wuxuu ku yidhi, Wax maxay ah? (Luukos 24:13,15-19)

Musaafiriintu waxay sheegeen sida ay u rajaynayeen inuu Ciisihii reer Naasared noqoni doono Masiixa ka guulysan doono cadowayaashooda. Laakiin Isaga waxaa lagu qodbay iskutallaabta! Haddana xabaasha waxay ahayd eber. *Way adagtahay in la fahmo!*


> Markaasuu ku yidhi, Nacasyo yahow oo qalbigoodu ka raagay inuu rumaysto wixii nebiyada oo dhammi ay ka hadleen. Masiixa miyaanay waajib ku ahayn inuu waxaas oo dhan ku silco oo uu ammaantiisa galo?
>
> Markaasuu ka bilaabay Muuse iyo nebiyada oo dhan, Qorniinka oo dhanna ayuu uga micneeyey wixii isaga qudhiisa ku saabsanaa.
>
> Goortaasay ku soo dhowaadeen tuuladay ku socdeen, isaguna wuxuu iska dhigay mid sii fogaanaya, laakiin way oggolaysiiyeen iyagoo leh, Nala joog, waayo, makhribku waa dhow yahay, maalintiina durba waa dhammaatay. Markaasuu la galay inuu la joogo.
>
> Waxaa dhacay kolkuu cunto ula fadhiistay intuu kibista qaaday, oo barakeeyey, oo intuu kala jebjebiyey ayuu siiyey. Markaasaa indhahoodu furmeen, oo isagay garteen, wuuna ka libdhay.
>
> Markaasay isku yidhaahdeen, Miyaan qalbigeennu gubanin intuu jidka inagula hadlayay iyo intuu Qorniinkii inoo furayay? (Luukos 24:25-32)

Way soo kaceen, waxayna u carareen Yeruusaalem si ay xerta u sheegeen: *Rabbiga wuu nool yahay! Waa Badbaadiyaha oo loogu ballanqaaday Qoraallada! Waa Wanka oo lagu sawiray allabariyaasha! Waa RABBIGA!*

Ugu dambeeyntii farriinta nebiyada waa la fahmay.

Waa fahmid kaamil ah.





# Dhacdada 67

## Jir baddalmay

Waxay ahayd Axadda fiidkii. Xerta way isla joogeen iyagoo albaabku u xiran yahay. Si kadis ah, Ciise wuxuu ka dhex muuqday qolka, wuuxuna yiri,

> Nabadi ha idinla jirto!
>
> Oo markuu waxaas yidhi, wuxuu iyagii tusay gacmihiisii iyo dhinaciisii. Sidaa daraaddeed xertii waa ku farxeen markay Sayidkii arkeen. (Yooxanaa 20:19-20)

Laakiin Toomas mid laba iyo tobanka ka mid ah lama joogin, markuu Ciise yimid. Haddaba xertii kale ayaa ku tidhi, Waxaannu aragnay Sayidkii.

> Laakiin wuxuu ku yidhi, Haddaanan gacmihiisa ku arkin calaamadii musmaarrada, oo aanan fartayda gelin nabarkii musmaarrada, oo aanan gacantayda gelin dhinaciisa, rumaysanba maayo.
>
> Oo siddeed maalmood dabadeed xertiisii gudaha ayay mar labaad wada joogeen, oo Toomasna waa la joogay. Markaasaa Ciise yimid, albaabbadii oo xidhan, oo intuu isdhex taagay ayuu ku yidhi, Nabadi ha idinla jirto.
>
> Markaasuu Toomas ku yidhi, Fartaada keen oo arag gacmahayga, oo gacantaadana keen oo geli dhinacayga, oo ha rumaysad la'aanin laakiin rumayso.
>
> Toomas ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Rabbigay iyo Ilaahayow.
>
> Markaasaa Ciise ku yidhi, Waad i aragtay, taas aawadeed ayaad rumaysatay. Waxaa barakaysan kuwa aan i arag ee rumaystay. (Yooxanaa 20:24-29)

Inta lagu jiro afartan maalmood, Rabbiga wuxuu ugu muuqan doona xertiisa lama filaan, wuxuu la hadli doona iyaga, kaddibna wuu qarsoomi doonaa. Ciise jirkiisa oo sarakacay wuxuu dhex mari karay derbiyada, wuxuuna u safri karay sida xawlliga fikiradda. In kastoo uu yahay kan qaba jirka noocan ah, ma ahaan doono kan ugu dambeeyo ee jirka noocan ah lahaanayo.

> Oo sidaynu ugu eg nahay kan cammuudda ah, sidaas oo kale ayaynu ugu ekaan doonaa kan jannada.
>
> Dhimashadu nin bay ku timid, saas aawadeed sarakicidda kuwii dhintayna nin bay ku timid. Siday dhammaan Aadan ugu wada dhintaan, sidaas oo kalaa dhammaan Masiixa loogu wada noolayn doonaa. (1 Korintos 15:49,21-22)

Ma fahansan tahay inaad tahay dambiile ciirsi la'aan ah oo aan lahayn jid si aad u hesho xaq inaad ku noolaato Ilaah Boqortooyadiisa? Ma aamminsan tahay Rabbiga Ciise Masiix inuu u dhintay *baddalkaaga* wuxuu u dhintay *dambiyadaada,* wuuna sarakacay, wuxuu ka guulaystay dhimasho adiga *dartaada*? Hadduu yahay sidaan, Ilaah wuxuu dhahayaa adiga hadda kaddib *Aadan ka ma tirsanid*. Ilaah wuxuu ku arkayaa xaq *Ciise Masiixa* dartiisa. Maalin adiga sida oo kale waxaad heli doontaa jirkii baddalmay—sida Kiisa.

Laakiin aan lahayn nabarrodii musmaarka.





# DHACDADA 68

## BAXITAANKA

Awoodda Shayddaanka ee Aadan ka guulaysatay ayuu Ciise soo ceshtay. Amarkiisa oo dhan Shayddaanka iyo ruuxaanta xunxun, dabayl iyo duufano, cudur iyo gaajo, dambi iyo dhimasho—Ciise wuxuu tusay wax walba inay ku jiraan gacantiisa kaamilka ah. Inkastoo taliyaasha diineed iyo saraakiisha ay xireen, dileen iyo ku qodbeen iskutallaabta, wuxuu oggolaaday taasi inay sameeyaan.

Taasi waa sababta intuunaan ku soo noqonin guriga Aabbihiisa, Rabbiga Ciise ayaa ku yiri xertiisa:

> Amar oo dhan ayaa samada iyo dhulka laygu siiyey. Haddaba taga, oo quruumaha oo dhan xer ka dhiga, oo ku baabtiisa magaca Aabbaha iyo Wiilka iyo Ruuxa Quduuskaa, oo bara inay dhawraan wax walba oo aan idinku amray, oo bal eega had iyo goor Ayaan idinla joogaa xataa ilaa waqtigu dhammaado. (Matayos 28:18-20)

Ciisena wuxuu u sheegay xertiisa,

> Waxaan idin siinayaa qaynuun cusub oo ah, Waa inaad isjeclaataan; sidaan idiin jeclaaday, idinkuna waa inaad isu jeclaataan. Sidaasay dadka oo dhammi idinku garan doonaan inaad xertaydii tihiin, haddaad jacayl isu qabtaan. (Yooxanaa 13:34-35)

Afartan maalmood sarakiciddiisa kaddib, Ciise wuxuu isku aruuriyay xertiisa Buurta Saytuunka ee Yeruusaalem bannaankeeda. Xertiisa way rabeen inay gartaan markuu soo noqon doonaa.

Markaasuu iyaga ku yidhi,

> Dantiinna ma aha inaad ogaataan waqtiyada iyo xilliyada uu Aabbuhu amarkiisa kaga dhigay. Laakiinse waxaad heli doontaan xoog markii Ruuxa Quduuska[22] ahi idinku soo dego; oo markhaatiyaal ayaad iiga noqon doontaan Yeruusaalem, iyo Yahuudiya oo dhan, iyo Samaariya, iyo meesha dunida ugu fog.
>
> Oo kolkuu waxyaalahaas yidhi dabadeed, iyagoo eegaya, ayaa sare loo qaaday isagii, oo daruur baa indhahoodii ka qarisay. Oo intuu sii socday, iyagoo samada aad u fiirinaya, ayaa waxaa isa soo ag taagay laba nin oo dhar cadcad qaba.
>
> Oo waxay ku yidhaahdeen, Nimankiinan reer Galiliyow, maxaad la taagan tihiin oo aad samada u eegaysaan? Ciisahan samada laydiinka sare qaaday, sidaad u aragteen isagoo samada u socda oo kale ayuu u iman doonaa.
>
> Markaasay Yeruusaalem ku noqdeen…(Falimaha Rasuullada 1:7-12)

Isla mar ahaantaas samada dhexdeeda, waxay ahayd waqtiga Boqorku "taajka dhigtay ammaan iyo murwad" (Sabuurkii 8:5; Cibraaniyada 2:9).





# Dhacdada 69
# U Dabbaaldegga Guusha

Bal qiyaas quruxda. Midaabada. Heesaha. Xiisada. *Boqolaal milyan oo malaa'igo ah ayaa isla hadleen. Boqorka wuxuu ku soo noqonayaa guriga! Laakiin wuxuu ekaan doonaa mid ka duwan. Kan, kaaso ka abuuray nin Ilaahii araggiisa wuxuuna had iyo goor u ekaan doonaa aragga ninka!*

Aammusnaan ayaa ka sugnaatay magaalada jannada.

Si kadis ah aammusnaanta waxaa jabisay koox turunbo oo waynaan leh oo la socda dhawaaq cod dheer:

> Irdahow, madaxiinna kor u qaada, Oo albaabbada daa'imiska ahow, kor ha laydiin qaado, Oo waxaa soo geli doona Boqorka ammaanta. Bal waa ayo Boqorka ammaantu? Waa RABBIGA xoog iyo itaal badan, Waa RABBIGA dagaalka ku xoog badan. Bal waa ayo Boqorkan ammaantu? Waa RABBIGA ciidammada, Isaga weeye Boqorka ammaantu. (Sabuurkii 24:7-8,10)

Ganjeellada waxay u furmeen si ballaaran ah iyo sacabka samada sida onkodka ayaa waxaa soo galay Horyaalka, Wanka, Wiilka Aadanaha oo leh nabarka-dagaal—*Ciise*! Isaga ayaa dhex maray dad badan oo jeclaa ilaa carshiga Aabbihiisa.
Wuu soo jeesanayaa, wuxuu eegayaa quruunta Aadan oo la madaxfurtay wuuna fadhisanayaa.

Ergada waa la fuliyay.

Kaddib, waddaniyiinta samada waxay u heesayaan heestan cusub Boqorkooda la jecelyahay:

> Adigu waad istaahisha…waayo, waa lagu gowracay, oo waxaad Ilaah dhiiggaaga ugu soo iibisay dad ah qabiil kasta iyo af kasta iyo quruun kasta. (Muujintii 5:9)

Kaddib malaa'igaha waxay ku wareegsanayaan carshiga, way cabuudayaan Ilaah, waxayna dhahayaan,

> Istaahil waxaa ah Wankii la gowracay inuu helo …ciso, iyo ammaan, iyo mahad. (Muujintii 5:12)

Imminka dunida dusheeda Aadan farcankiisa inta badan weli waxay yihiin maxaabiistii boqortooyada Shayddaanka halaagga ah oo dambiga iyo dhimashada. Laakiin xurnimo waa la heli karaa. Dhimashadiisa, aaskiisa, iyo sarakaciddiisa Rabbiga Ciise wuxuu ka guulaystay dagaalka aan lahayn shakiga. Kuwa rumaysan oo dhan, wuxuu dhahayaa,

> Qalbigiinnu yuusan murugoon. Ilaah waad rumaysan tihiin, anigana i rumaysta. Guriga Aabbahay wuxuu leeyahay hoyaal badan. …Oo haddaan tago oo meel idiin diyaariyo, mar dambe waan soo noqon doonaa, oo xaggaygaan iidin qaadan doonaa, in meeshaan joogo, idinkuna aad joogtaan.
>
> Anigu waxaan ahay jidka iyo runta iyo nolosha. Ninna Aabbaha uma yimaado, xaggayguu ku yimaado maahee. (Yooxanaa 14:1-3,6)



# Dhacdada 70

## Boqorka wuu soo noqonayaa

Maalin maalmaha ka mid ah, intay dunida ku mushquulsan tahay doonisyo qaymi yar leh iyo diimo been ah, Boqorka Aammaanta wuxuu ku soo noqon doonaa dunida, laakiin ma ku imaanayo dameer hooseeya xag darajo, oo weliba lagu jeesjeesi doono, mana lagu boqri doono taaj qodxan leh. Boqorka la sarakiciyay wuxuu Yooxanaa u yara muujiyay waxa ay tahay maalintaas imaan doonto:

> Oo bal eeg, waxaan arkay samadii oo furantay, iyo faras cad, oo kii fuushanaana waxaa la odhan jiray Aamin iyo Run; oo isagu xaqnimuu wax ku xukumaa oo uu ku diriraa. Oo indhihiisuna waxay u ekaayeen ololka dabka, madaxiisana waxaa u saarna taajaj badan. …magaciisana waxaa la odhan jiray Ereyga Ilaah. Oo ciidammadii samada ku jirayna isagay soo raaceen iyagoo fuushan fardo cadcad oo qaba dhar wanaagsan oo cad oo daahir ah... Oo dharkiisa iyo bowdadiisana waxaa ugu qornaa magac, kaas oo ah BOQORKA BOQORRADA, IYO SAYIDKA SAYIDYADA. (Muujintii 19:11-14,16)

Markuu Boqorka soo noqonayo, cod ayaa ka onkodi doonaa xagga samada:

> Boqortooyadii dunidu waxay noqotay boqortooyadii Rabbigeenna iyo Masiixiisa, oo isna boqor buu ahaan doonaa weligiis iyo weligiis. (Muujintii 11:15)

Cadawga Boqorka waxay ku dhalaali doonaan hortiisa. Kaddibna, wuxuu xiri doonnaa Shayddaanka, wuxuuna dunida baabba'san tusi doona waxa dowladda xaqnimadu u ektahay. Waxayna noqon doontaa saacadda dunida ugu fiican.

> Oo RABBIGU boqor buu ka ahaan doonaa dunida oo dhan, oo maalintaas RABBIGU mid buu ahaan doonaa, oo magiciisuna mid buu ahaan doonaa. (Nebi Sekaryaah 14:9)

Maalinta Qiyaamaha, RABBIGA Ciise wuxuu ahaan doona Xakiinka.

> Carshigiisu wuxuu ahaa olol dab ah, giringirihiisuna waxay ahaayeen dab wax gubaya. Oo waxaa hortiisa ka soo dareeray oo ka soo baxay durdur dab ah; oo waxaa u adeegayay kumaan kun iyo kumaan kun, hortiisana waxaa taagnaa toban kun oo min toban kun ah; oo xukunkiina waa la dhigay, kitaabbadiina waa la furay. (Nebi Daanyeel 7:9-10)

Shayddaanka iyo boqortooyadiisa mugdiga ah "waxaa lagu dhex tuuray baddii dabka iyo baaruudda ahayd" (Muujintii 20:10). Ugu dambeeynta, Abeesada madaxeeda waa la burburin doonaa weligeed. Dhinaca waddaniyiinta boqortooyada iftiinka, Ilaah wuxuu u sameeyn doonaa "samo cusub iyo dhul cusub. …Iyana waxay ahaan doonaan dadkiisa, oo Ilaah qudhiisuna wuxuu la jiri doonaa iyaga, oo wuxuu ahaan doonaa Ilaahood; oo isna indhahooda ilmo kastuu ka tirtiri doonaa, oo dhimashona mar dambe ma jiri doonto, oo mar dambena ma jiri doonaan murug iyo oohin iyo xanuun toona. (Muujintii 21:1,3-4).

Ugu dambeeynta, ducada kuwa jecel Boqorkooda waxay u rumoobi doontaa si weligeed ah:

> Boqortooyadaadu ha timaado, doonistaada dhulka ha lagu yeelo sida jannada loogu yeelo. (Matayos 6:10)

Tani ma ducadaadaa? Miyaad u sujuudday Boqorka Ammaanta? Isaga miyuu yahay *Boqorkaaga*?



# Xiritaanka


Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Kii ereygayga maqla oo rumaysta kii i soo diray, wuxuu leeyahay nolosha weligeed ah, xukunna geli maayo, laakiin dhimashadii ayuu ka soo gudbay oo nolosha u soo gudbay. — Ciise, Boqorka Ammaanta (Yooxanaa 5:24)

Wuxuu ku jiray dunida, dunidana waxaa laga sameeyey xaggiisa, oo duniduna ma ay garanayn isaga. ... Laakiin in alla intii aqbashay, wuxuu siiyey amar ay carruurtii Ilaah ku noqdaan, kuwaasu waa kuwii magiciisa rumaystay. — Injiilka (Yooxanaa 1:10,12)

## Farriinta ku jirta Qisada • 1

# Farxad weligeed ah Qisada kaddib?

Dadka oo cimri kasta ah waxay jecelyihiin qisooyin khayaali ah ee ku saabsan jecayl iyo samatabbixin, qisooyin ay la socdaan dhammaadyo farxad leh. Dadka waxay sheegayaan qisooyin noocaas oo kale ah, waayo Ilaaha Waaxidka ah ayaa ku abuuray insaanka qalbiga rabitaanka in laga badbaadiyo shar si ay ugu noolaadaan nolol farxad weligeed ah. Laakiin qisada Boqorka Ammaanta ma ahayn qiso khayaali ah.




Qiso rumaysad lagu xoojinayo ma jirto oo ay qoreen ilaa iyo afartan nebi oo ay ku qaadatay ilaa iyo shan qarni, laakiin Kitaabka Ilaah waa sidaas. Khayaaliga ma ahan wax ay hubin karaan boqolaal waxyiyo iyo tacliinta ku takhasusan sahanka waxyaalaha taariikhda ah, laakiin qisada Ilaah waxyaala badan ayaa gacan siinayaan.




Qiso rumaysad lagu xoojinayo oo ku saabsan qofka ugu geesisan ma ahan mid kala dhigayso dhabta taariikhda, laakiin Ciise wuu kala dhigaya. Qisooyinka khayaaliga ah ma naga dhaqi karaan dambi iyo ceeb, xariirka aan Ilaah la leenahayna ma suubin karaan, mana na siin karaan qalbi uu ka buuxo jecaylkiisa, farxaddiisa iyo nabaddiisa, laakiin Ciise wuu awoodaa.

Fulinta uu fuliyay qoraallada nebiyada, Ciise Masiix wuxuu bini-aadanka suurtagal uga dhigay inay nolol weligeed ah la noolaadaan Abuurahooda-Boqorka ah. Laakiin dadka oo dhan ma ku noolaan doonaan Boqortoyadiisa.



Sida uu Ilaah ugu caddeeyay sharcigiisa keliya Aadan oo ku saabsan sida loogu noolaado beerta dhulka, sidaas oo kale ayuu Ilaah u caddeeyay sharcigiisa farcanka Aadan siday ugu noolaan lahaayeen magaalada samada:

> Oo gudaheedana sinaba uma ay geli doonaan wax nijaas ah amase kii sameeya karaahiyo iyo been; laakiinse waxaa keliyahoo geli doona kuwa ku qoran kitaabka nolosha ee Wanka. (Muujintii 21:27)



Wanka kitaabkiisa ee nolosha waa diiwaanka samada oo magaca qof kasta leh oo ka bilaabato waqtigii Aadan aammineen habka Ilaah ee badbaadada. Boqorka Ammaanta ma ku qasbi doonoo adiga ama reerkaaga inaad aammintaan Isaga iyo waxa u sameeyay oo kaaga badbaadiyay Shayddaanka, dambiga, dhimashada, iyo naarta.

Boqortooyadiisa kuma jiri doonaan waddaniyiin aan raalli ka ahayn inay galaan. Laakiin maadaama uu Boqorka rabin qofna inuu galo naarta, wuxuu ku gabangabaynayaa Kitaabkiisa martiqaad, digniin iyo ballan:

> Oo kii harraadsanuna ha yimaado. Oo kii doonayaaba biyaha nolosha hadiyad ahaan ha u qaato. Oo anigu waxaan ku idhaahdaa nin kasta oo maqla erayadii wax sii sheegidda ee kitaabkan lagu qoray, Haddii nin wax ku daro iyaga, Ilaah wuxuu isaga ku dari doonaa belaayooyinka kitaabkan ku qoran. … Haddaba kan waxyaalahan ka markhaati furayaa, wuxuu leeyahay, Haah, anigu dhaqsaan u imanayaa. Aamiin, Rabbi Ciisow, kaalay. (Muujintii 22:17-20)

Markuu Aadan dambaabay, muxuu Aadan ku yiri Ilaah, markuu Ilaah beertii imaaday oo Aadan u yeeray? Aadan oo ceebaysan ayaa ugu jawaabay,

> Codkaagaan beerta ka dhex maqlay, waanan cabsaday. (Bilowgii 3:10)

Laakiin hadda, sidee ayaa Aadan farcankiisa qaar ugu ficil-celinayaan Rabbiga ballankiisa inuu ku imaado dunida iyaga dartood? Si farxad leh ayay ugu jawaabeen,

> Aamiin Rabbi Ciisow, kaalay. (Muujintii 22:20)


Maxaa keenay baddalka noocaas oo kale ah? Maxay sababta ay waayahan dambe dadka qaarkood uga cabsanin inay hor istaagaan Xaakinka dunida? Maxay u dareemayaan farxad wayn inay arkaan Boqorka weji ka weji?

Maxaa yeelay waxay rumaysanayaan qisadiisa iyo farriintiisa.

Nebi Ishacyaah ayaa qoray,


> Bal yaa warkayagii rumaystay? ... Dhammaanteen sidii ido baynu u hallownay, midkeen waluba jidkiisuu u leexday oo RABBIGU wuxuu isaga dul saaray xumaanteenna oo dhan. (Ishacyaah 53:1,6)

Ishacyaah wuxuu ku soo koobay Boqorka qisadiisa iyo farriintiisa saddex walxood:




**1. Waxaan leenahay dhib.**

"Midkeen waluba jidkiisuu u leexday."



**2. Ilaah wuxuu leeyahay xalka.**

"RABBIGU wuxuu Isaga [Wiilkisa] dul saaray xumaanteenna oo dhan."



**3. Waxaan leenahay doorasho.**

"Yaa warkayagii rumaystay?"

Ma rumaysantahay Boqorka?

> Haddii aynu maragfurka dadka aqbali lahayn, maragfurka Ilaah baa ka weyn, waayo, maragfurka Ilaah waa kan oo ah inuu Wiilkiisa ka marag furay. Ka Wiilka Ilaah rumaystaa maragguu ku haystaa nafsadiisa, kii aan Ilaah rumaysanna, wuxuu isaga ka dhigay beenaaleh; maxaa yeelay, wuxuusan rumaysan maraggii uu Ilaah ka marag furay Wiilkiisa. Maragguna waa kan, kaas oo ah in Ilaah ina siiyey nolosha weligeed ah, oo ay noloshuna Wiilkiisa ku jirto. Kan Wiilka haystaa, noloshuu leeyahay. Kii aan Wiilka Ilaah haysanna nolosha ma leh.
>
> Waxyaalahan waxaan idiinku soo qoray, idinka oo rumaystay magaca Wiilka Ilaah, si aad u ogaataan inaad nolosha weligeed ah leedihiin. (1 Yooxanaa 5:9-13)

Haah, waad *garan* kartaa. Boqorka ma oggolaanayo inaad sii nasiibsatid.

Miyaad ka soo leexatay diinta bini-aadanka oo ma rumaysatay Ilaah maragfurkiisa? Haddii ay jawaabtaada tahay haah, haddaba waxaad la joogi doontaa Boqorka dhammaan waqtiga…

…farxad weligeed ah.

## WARKA XUN

Sida aan uga akhrinayno bilowga Kitaabkiisa, Boqorka adduunka wuxuu nin ka abuuray araggiisa iyo ekaanshadiisa. Wuxuu u sameeyay bini-aadanka ammaantiisa. Dadka waxay yihiin kuwa uu aad u qiimeeynayo, saaxiibadiisa qaaliga ah, iyo waddaniyiinta quduusan ee boqortooyadiisa iftiinka. Laakiin horta waa inuu jiro waqti tijaabo.

RABBIGA Ilaah ah wuxuu siiyay Aadan imtixaan yar oo uu la socdaan natiijooyin waawayn. Ilaah wuxuu u sheegay inuu ka cuni karo geedaha beerta dhan ku yaalay hal mooyaane. Ilaah muxuu sheegay inay ku dhici doonaan Aadan, hadduu jebiyo halkan sharci?




Ilaah miyuu u sheegay Aadan inuu bilaabo inuu xafido tukasho, inuu soomo, inuuna sameeyo camal fiican oo uu ku miisaamayo camalkiisa xun? Maya! Ilaah wuxuu yiri, "Maalintii aad wax ka cuntid hubaal waad dhiman doontaa" (Bilowgii 2:17).



Waxaan ognahay wixii dhacay. Bini-aadanka wuxuu doortay inuu addeecin Abuurehiisa-Boqorka. Aadan iyo Xaawa way dambaabeen. Laakiin miyay dhinteen isla maalintaas? Maya. Oo muxuu Ilaah ka waday markuu yiri, "Maalintii aad wax ka cuntid hubaal waad dhiman doontaa"?

Haddaan fiirino Qoraallada, maxay tahay macnaha dhimashadu?



Bal eeg sawirka. Maxaa helaya laanta? Maxaa ku dhici doona markay geedka ka jabto kaddib? Miyay noolaan doontaa? Ama miyay dhiman doontaa?

Laanta waxay u egtahay weli mid nool, laakiin way dhiman doontaa, waayo waxay ka fogaatay isha nolosha.

Dhimashadu macnaheeda waa kala-fogaasho. Kani waa war xun.

Markay Aadan iyo Xaawa doorteen inay raacaan jidkooda baddalkii Ilaah jidkiisa, waxay waayeen xariirkii Ilaah kala dhexeeyay sidaa laan ka go'day geedka. Xariirkoodii Ilaah kala dhexeeyay wuu dhintay. Ma ay sii rabin inay la joogaan Isaga. Waxay isku dayeen inay iska qariyaan. Aadan iyo Xaawa ruuxi ahaan ayay ka dhinteen.

> Laakiinse xumaatooyinkiinnaa idin kala soocay idinka iyo Ilaahiinna, oo dembiyadiinnaa wejigiisa idinka qariyey, oo saas uusan idiin maqlin. (Ishacyaah 59:2)



Aadan iyo Xaawa waxay sidaa oo kale bilaabeen inay ka dhintaan jir ahaan. Xataa sida ay caleemaha laan jabtay ku yaala ay dhaqso u engegin, sidaa oo kale jirarkooda ma ku soo noqonin dhoobo isla maalintii ay dambaabeen. Laakiin tallaabooyinka duqnimada ayaa bilaabatay. Dhimashadu waxay ahayd cadow aanay ka baxsan karin.

Laakiin warka xun wuu sii xumaanaya. Waa hadduunan Ilaah siin badbaado, Aadan iyo Xaawa waxay wejihii lahaayeen kala-fogaasho daa'im ah xagga Ilaah, waxayna ku jiri lahaayeen "dabka weligiis ah kan Ibliiska iyo malaa'igihiisa loo diyaargareeyey" (Matayos 25:41).

Dadka qaarkooda waxay ku jeesjeesaan fikiradda naarta—war dabka meeshay naftu ku wasakhowday dambiga lagu karantiili doono si daa'im




ah. Laakiin ma xigmadbaa ku jirta inaan ku jeesjeesno wax aan fahmaynin? Maadaama aan nahay bini-aadanka, ma fahmi karno fikradda guud ee nolosha daa'imka ah. Waa cabbir oo kale.[8] Dadka xataa waxay ku jeesjeeseen nebi Nuux, markuu dhisay doonta ballaarnayd oo uga digayay iyaga daad imaan doona, laakiin markii albaabka doonta la xiray oo daadka yimid, waxay fahmeen runta ay ku jeesjeeseen. Sidaa oo kale, waqtiga dadka ay galayaan naarta, waxay fahmi doonaan suurtagalkeeda rasmiga ah.


> Waxaa lagu ciqaabi doonaa halaag weligiis ah, oo waxaa laga gooyn doonaa Rabbiga hortiisa iyo ammaanta xooggiisa. (2 Tesaloniika 1:9)

Boqorka ma oggolaani doono inuu dambi si joogta ah u wasakheeyo adduunkiisa. Dambigu waa awoodda ugu burburinta badan oo masiibooyinka ugu xun ku hayo dunideenna dusheeda. Dambiga waa asalka xumaanta oo dhan.

Sida cudur lays qaadsiiyo oo kale, dambiga Aadan wuu na gaaray. Isla sida ay caleen kasta iyo laan kasta oo geedka ka go'da ay u dhimato, midkeen waliba waxaa saameeyay dambiga Aadan. Dhammaanteenba waxaan nahay qayb ka tirsan laanta Aadan.



> Haddaba sida dembigu nin [Aadan] keliya dunida ugu soo galay, dhimashaduna dembiga ugu timid, sidaasa dhimashadiina u gaadhay dadka oo dhan, waayo waa la wada dembaabay. (Rooma 5:12)



Maalmihii hore ee Muuse, dadku isku fikrad qaldan ayay haysteen sida dadka maanta oo kale. Waxay rajaynayeen in hadday wanaagga ka badsadaan xumaanta, Ilaah uu tusi doono naxariis Maalinta Qiyaamaha. Inuu saxo fikradooda qaldan,



Ilaah wuxuu ku soo dul degay Buurta Siinay Isagoo dab ololayaa ku muuqday, wuxuuna siiyay dadka toban amar inay addeecaan. Qof kasta oo aan u addeecin tobankaas amar oo dhan si kaamil ah waa la eedeeyay, wuxuuna u qalmay dhimasho.



Tobankii Amar waxay yihiin sida muraayad oo kale. Hadduu wejigaaga wasakhaysan yahay, muraayadda waxay kugu caawinaysaa inaad aragtid



wasakhdaas, laakiin kaama qaadi karto wasakhdaas. Sidaa oo kale, amarada ma naloo siinin inaan ku noqono xaq Ilaah hortiisa. Baddalkeeda, waxay na tusinayaan inaan nahay dambiile eedaysan Ilaaha quduuska ah hortiisa. Kuma habboonin inaan ku noolaano boqortooyadiisa xaq ah. Waxaan nahay dambiileyaal aan nafteenna gargaari karin oo u baahan Badbaadiye kaamil ah.

> Maxaa yeelay, dhammaan way wada dembaabeen oo gaadhi waayeen ammaanta Ilaah. (Rooma 3:23)

Warka xun wuxuu yahay inaanan gaari karin Ilaah heerkiisa kaamilka ah ee wanaagga. Warka wanaagsan waxaa waaye inuu jiro hal qof oo taariikhda dunida ku jira oo fuliyay.  Magaciisa waa Ciise.

## FARRIINTA KU JIRTA QISADA • 3

# WARKA WANAAGSAN

RABBIGA waa ku kaamilanyahay xagga caddaaladda iyo naxariista. Caddaaladda macnaheedu waxaa waaye in kulli ciqaabta sharciga ka dhanka ah ayaa la igu fuliyay xagga dambigayga. Naxariista macnaheedu waxaa waaye ciqaabta sharciga aniga dusha la iga ma saarin.

Ilaah sidee buu u ciqaabi karay dambigeenna Isagoon anaga na ciqaabin?


Jawaabta waxaa laga helaya Rabbiga Ciise Masiix, oo u imaaday badbaadinteenna.



Waqtiga Axdigii Hore, intuunaan Ciise imaanin ka hor, Ilaah wuxuu qotomiyay *sharciga allabariga dambiga* inuu ka badbaadiyo dambiileyaasha *sharciga dambiga iyo dhimashada*. Ilaah wuxuu aqbalay dhiigga xayawaannada eedlawaha ah sidaa bixinta dambiga. Tani waxaa waaye sidaas ayuu u ciqaabay dambiga Isagoo dambiilaha ciqaabin.

Laakiin wanku miyuu ku filan yahay baddalkii aadanaha? Maya. Dhiigga xayawaanka wuxuu tusaya oo keliya tusaalaha dhabta ah oo lagu fahmi karo waxa lagu fulinayo caddaaladda.


Dhiig noocee ayaa bixin kara daynta dambiga dunida? Keliya dhiigga Nin kaamil ah oo dhammaad lahayn. Abuuraha-Erayga naftiisa wuxuu noqday Ninkaas.




Bilowgii waxaa jiray Erayga…Ereyguna jidh buu noqday, oo waa ina dhex joogay, oo waxaannu aragnay ammaantiisii, taas oo ahayd ammaantii u ekayd tan Wiilka keliya ee Aabbaha, ee nimco iyo run ka buuxa. (Yooxanaa 1:1,14)





Dhiigga wananka ayaa dabooli karay dambiga keliya. Ciise waa "Wanka Ilaah ee dembiga dunida qaadaya." (Yooxanaa 1:29)






Ma xasuusataa Haabiil? Ilaah wuxuu dambiyada Haabiil dusha ka saaray wanka. Wanka wuxuu ahaa Haabiil dambi-qaadihiisa waqti xaddidan. Ciise waa Dambi-Qaadaheenna joogtada ah. Ilaah wuxuu dusha ka saaray dambiyadeenna Isaga.





Wankii la dilay ee la gubay ilaa u dambas noqdo Haabiil baddalkiisa wuxuu ahaa tusaalaha Ciise oo si buuxda ciqaabta dushiisa ku qaatay. Taasi waa sababta, intuunaan dhimanin muddo yar ka hor, Ciise wuxuu ku qayliyay guul, "Waa dhammaatay!" (Yooxanaa 19:30)






Caddaaladda waa la kaamilay. Naxariista waa la heli karaa.


Oo aadna ku badbaaddeen, haddaad xajisaan… Masiixu wuxuu u dhintay dembiyadeenna sida Qorniinku leeyahay, waa la aasay isaga, oo maalintii saddexaad ayaa la sara kiciyey, sida Qorniinku leeyahay. (1 Korintos 15:2-4)




Ka fikir Ibraahim iyo wilkiisa. Ilaah muxuu ugu diray labadooda buur gaar ah oo aad u fog allabariga dartiisa?






Ilaah wuxuu calaameeyay meesha uu Wiilkiisa madiga ah ugu dhiman lahaa dambiyada dunida.


Ibraahim muxuu ugu bixiyay buurta "RABBIGA siin doona"? Maxaa yeelay buurtaas dusheeda Ilaah wuxuu ku siiyay allabariga buuxa ee ugu dambeeya.





Ilaah muxuu siiyay Ibraahim baddalka Wiilkiisa? Wan geesaha [sumal]. Ilaah muxuu na siiyay si uu kaaga badbaadiyo xukunka? Ciise, Wanka Ilaah.







Miyaad ka cabsanaysaa dhimasho iyo xukun? Haddaad aammintid gebi'ahaan in Ciise sida Badbaadiyahaaga yahay ma ahan inaad cabsato, waayo Ilaah wuxuu Isaga u bixiyay dambiyadaada, wuxuuna u soo sarakiciyay Isaga nolosha.

Hadda, gadaal u fikir Aadan iyo Xaawa. Dambigooda iyo ceebtooda ayaa ku kallifay inay isku qariyaan caleemo berde, waxayna rabeen inay iska qariyaan Ilaah. Caddaaladdiisa iyo naxariistiisa awgeed, Ilaah wuxuu muujiyay dambigooda, wuxuuna siiyay iyaga dhar harag ah oo xayawaanno la gowracay. Dhiigga la daadiyay ee xayawaannada waxay ahayd mataal lagama maarmaanka ah in la daboolo dambigooda, hargaha xayawaannadana waxay ahaayeen mataal lagama maarmaan ah in la daboolo ceebtooda.


Anaga oo dhan waxaan wadaagnaa isirkeenna dambigooda iyo ceebtooda. Ma gaari karno Ilaah xaqnimadiisa. Naguma habboono inaan la noolaano Isaga. Warka wanaagsan waa in Ciise Masiix u iskutallaabta ku qaaday dambigeenna iyo ceebteenna. Inta lagu jiray saacaddaas mugdiga ahaa, wuxuu dareemay kala fogaashada Ilaah ee aan anaga istaahilnay. Kaddibna wuu dhintay. Laakiin maadaama dambi uu Isaga falay jirin, xabaasha ma hayni karin Isaga.


Ciise dhimashadiisa iyo sarakiciddiisa darteed, Ilaah wuxuu ku hibeenayaa inuu ku nadiifiyo oo dharkuu xiro: inuu dambiyadaada kuugu baddalo xaqnimadiisa.





> Waayo, kulligayo waxaannu noqonnay sida wax aan nadiif ahayn. Oo xaqnimadayada oo dhammuna waa sida dhar wasakh ah. (Ishacyaah 64:6)





> Si weyn baan Rabbiga ugu rayrayn doonaa, oo naftayduna Ilaahayga bay ku farxi doontaa, waayo, wuxuu ii xidhay dharkii badbaadada, oo wuxuu i huwiyey khamiiskii xaqnimada. (Ishacyaah 61:10)

> Wuxuu isaga oo aan dembi aqoonin ka dhigay inuu dembi noqdo aawadeen, inaynu noqonno xaqnimada Ilaah ee ku jirta isaga. (2 Korintos 5:21)

Maalintii Qiyaamaha, miyaad Ilaah la hor istaagi doontaa calalada dadaal diimeedka?

Ama ma istaagi doontaa adoo gashan khamiiska xaqnimada Masiixa ee daahirka ah?

## Farriinta ku jirta • 4

# Jawaabta aad siisay Boqorka

Kaba soo qaad adoo dhex socdo duur cidlo ah. Kee baad jeclaan lahayd inaad la kulantid—ma wan ama libaax?



Imaatinkiisa ugu horreeya, Boqorka ammaanta waxaa loogu yeeray *Wanka*. Wuxuu ku imaaday is hoosaysiin inuu badbaadiyo dambiileyaal. Markuu Boqorka soo noqdo, waxaa loogu yeeri doona *Libaaxa*. Wuxuu ku imaan doona waynaanta inuu xukumo dambiileyaasha aan toobadkeenin.



Markuu Ciise soo noqdo, miyaad ku farxi doontaa Badbaadiyahaaga-Boqorka ah hortiisa ama ma waad ku hor gariiri doontaa Xakiinkaaga-Boqorka ah hortiisa? Waxaas oo dhan waxay ku xirantahay sida aad u qaadatay farriinta Ilaah.

Ciise markuu safarkiisa bilaabay oo wax barayay, erayadiisa ugu horreeya waxay ahaayeen,

> Toobadkeena oo injiilka rumaysta (Markos 1:15)

"Toobadkeentu" macnaheeda waa inaad *baddasho maskaxdaada* ku saabsan waxa aad ku aammintid si aad ugu yeelato xaq inaad ku noolaato Ilaah boqortooyadiisa. Macnaha waa inaad joojisid aamminidda waxyaalaha kula qumman oo aad bilowdid inaad aammintid oo raacdid jidka Ilaah.

"Injiilka rumaysta" macnaha waa inaad *ku aamminto Badbaadiyaha,* kaasoo u dhintay dambiyadaada, oona u sarakacay inuu ku siiyo nolol cusub. Laakiin maxaa laga waddaa inaad ku aamminto?

Aan kuugu sharraxo qisada dhab ah oo ka dhacday Galbeedka Africa. Waxay ku saabsan tahay laba naago, Fatu iyo Bintu.

Labadooduba waxay lahaayeen cudurka indhaha oo faafo. Fatu waxay tagtay isbitaalka. Dhakhtarka wuxuu siiyay iyada qalajiye goojada indhaha. Indhaheeda waa la daawaayay. Bintu waxay u tagtay dhakhtar dhaqameed. Wuxuu farta ku walaaqay "daawada" indhaheeda. Indhaheeda way caddaadeen, waxayna noqotay indhoole.

Fatu iyo Bintu labadooduba waxay lahaayeen iimaan. Labada naag waxay ku dhaqaaqeen iimaankooda, markay u tageen dhakhtar ay aamminsanayeen—laakiin waxaa la yaab leh sida ay natiijada u kala duwan tahay.

Marka ay timaaddo arrinta nolosha daa'imka ah, qof kasta wuxuu aamminsan yahay wax ama qof.
Dad badan waxay rajadoodu ku xirantahay diinta waalidiintooda. Qaarkooda waxay u hiillinayaan dadka dhahaya noloshu waxay ku dhammaanaysa xabaasha. Dad kale waxay ku imaanayaan fikiraddooda ku saabsan nolosha, dhimashada, iyo daa'imka. Ugu dambeeysta, hal su'aal ayaa muhiim ahaanaysa: Miyaad dooratay runta?

Aniga ahaantay, waan gaaray go'aankayga. Waxaan aamminsanahay Boqorka, oo yiri,


> Mid kasta oo kan runta ah wuu maqlaa codkayga. (Yooxanaa 18:37)

Isagu waa Kan aan doonayo inaan la noolaado daa'im. Isaga waa Kii "i jeclaaday oo naftiisa u bixiyey daraadday" (Galatiya 2:20).

Ma aha *boqor* keliya. Isagu waa *Boqorkayga*!



Ninka ugu horreeyay waxaa loo sameeyay inuu muujiyo Ilaah araggiisa. Araggaas waxaa hallayay dambi. Ciise Masiix, "suuraddii Ilaaha aan la arki karin" (Kolosay 1:15), wuxuu u imaaday inuu ku siiyo nolol cusub oo weliba dib kugu soo celiyo Ilaah araggiisa.



Haddaad iimaankaaga saaratid Ciise Masiixa oo ah Boqorka ammaanta, haddaba, Ilaahii hortiisa waxaad ku tahay qof aan ku jirin Aadan. Waxaad ku jirtaa Masiixa. Waxaad tahay waddani laga jecelyahay jannada iyo cunugga Ilaah ee la jecelyahay. Waxaad tahay khasnadda Ilaah, oo wuxuu kugu madaxfurtay dhiigga Wiilkiisa.

Maadaama aad tahay xubin dhashay oo ah Ilaah reerkiisa, hadda waxaad ugu yeeri kartaa Ilaah Aabbe. Laakiin mudnaanta wayn ee aad helaysid waxaa la socota masuuliyad wayn.

> Idinkoo ah carruur addeec leh ha raacina damacyadiinnii hore oo aad ku samayseen jaahilnimadiinnii; laakiinse siduu kan idiin yeedhay quduuska u yahay, idinkuna sidaas oo kale dabiicaddiinna oo dhan quduus ku ahaada.
> (1 Butros 1:14-15)


Maadaama aad tahay xerta Masiixa, waxaa lagugu yeeray in aad cafisid, jeclaatid oo weliba u ducaysid dadka oo dhan, xataa kuwa cadawgaaga ah. Ciise wuxuu yiri,

> Sidaasay dadka oo dhammi idinku garan doonaan inaad xertaydii tihiin, haddaad jacayl isu qabtaan. (Yooxanaa 13:35)

Inta aad iisu hoosaysiinaysid Isaga, Ruuxa Rabbiga Ciise, kaasoo qalbigaaga soo galay gudahiisa markaad aammintay Injiilka, wuxuu kugu caawini doona inaad ka guulaysatid dambiga oo weliba aad muujiso dabcigiisa quduusan.

> Laakiin midhaha Ruuxu waa jacayl, farxad, nabad, dulqaadasho, roonaan, wanaag, aamminnimo, qabownimo, iscelin. (Galatiya 5:22-23)

Maadaama aad tahay cunugga Boqorka, waxaad ku leedahay dan cusub nolosha: inaad xushmeeyso Isaga. Waxaad safiirkiisa uga tahay dunida lunsan. Safiir wacan u ahaw Isaga. Maalin ayaad Isaga ku arki doontaa weji ka weji, markaasna waxaad "noqon doontaa sidiisa oo kale" (1 Yooxanaa 3:2). Ilaa waqtigaas laga gaarayana, la hadal Isaga mar kasta. Ku ammaan Isaga arrin kasta. La caabud oo ugala adeeg Isaga dadka kale oo Isaga iyo Eraygiisa jecayl. Baro Qoraallada maalin kasta (ku bilow *Luukos, Yooxanaa, Falimaha Rasuullada, iyo Rooma*). Ruuxa Quduuska waa Macallinkaaga. Kitaabka waa cuntadaada ruux ahaneed iyo hubka kaa difaacaya Shayddaanka oo aan rabin inaad ku fikirto, ku hadasho, u dhaqantid sida Ciise. Sida aad u badsanaysid akhriska iyo ka fikiradda Qoraallada, isla sidaas ayaa uga xoogeysanaysa xagga ruuxa.



Waxaan jeclahay sawirkan uu sawirayo erayga Sabuurrada:

> Sida deeradu biyaha durdurka ugu harraaddo,
> Ayay naftaydu kuugu harraaddaa, Ilaahayow. (Sabuurkii 42:1)

Ma dhahi kartaa taas? Go'aanka adigaa iska leh.

Paul D. Bramsen
resources@rockintl.org

# Astaan gaar ahaaneed dheeraad ah

Waayo, idinku waxaad ku badbaaddeen nimco xagga rumaysadka, mana aha wax xaggiinna ka yimid, laakiinse waa hadiyadda Ilaah, mana aha xagga shuqullada, si aan ninna ugu faanin. Waayo, innagu waxaynu nahay wixii u sameeyey, oo waxaa laynoogu uumay Ciise Masiix shuqullada wanaagsan aawadood oo Ilaah hore ugu diyaariyey inaynu ku soconno.

Sidaas daraaddeed innagoo xaq laynagaga dhigay rumaysad, nabad baynu xagga Ilaah ku haysannaa Rabbigeenna Ciise Masiix; kan xaggiisa aynu rumaysad ku galnay nimcadan aynu dhex taagan nahay, oo waxaynu ku faraxnaa rajada ammaanta Ilaah.

—Axdiga Cusub (Efesos 2:8-10; Rooma 5:1-2)

## Boqorka Ammaanta

## Su'aalaha Naqtiinka Dhacdada • Qaybta 1 • Axdigii Hore

Liiskan ayaa laga helaya hal ama laba su'aal oo u gaar ah mid kastoo 70ka dhacdo ka mid ah. Jawaabooyinka waxay ku jiraan aayadaha la socdaan dhacdo kasta. Xor u ahaw inaad minguurisid boggan oo u isticmaashid si loogu isticmaalo wax barashada wadajirka ah. Wixii macluumaad dheeraad ah booqo: www.one-god-one-message.com

*Nambarka Dhacdada • su'aal(o)*

1 • Boqorka ammaanta wuxuu ku qaadanayaa kumaankun oo sano inuu fuliyo Qorshehiisa. Taasi maxay kaaga sheegaysaa Boqorka?

2 • Magacaw labada qayb ee ugu waawayn Kitaabka Quduuska. Siday u kala duwanyihiin?

3 • Ma aamminsan tahay erayada ugu horreeya ee Qorniinka? (Bilowgii 1:1)? Haah ama maya? Sababta waa maxay?

4 • In xataa markuu keligiis jiray, inaba keligiis ahanin weligiis. Maxaad ka fahantay hadalkan?

5 • Maxaan ka barani karnaa Ilaah waxyaalaha uu sameeyay?

6 • Magacaw siyaabaha qaarkood ay sida uu Ilaah dadka u abuuray uga duwan tahay sida xayawaannada?

7 • Muxuu Ilaah u waydiin waayay Aadan hadduu rabay inuu ku noolaado Ceeden?

8 • Dambi waa maxay? Ilaah muxuu sheegay inay ku dhici doonaan Aadan, hadduu addeecin Ilaah amarkiisa? Erayga kale ee dhimasho waa maxay?

9 • Sida Aadan, Xaawa waxaa laga abuuray Ilaah araggiisa. Macnaha waa maxay?

10 • Waa maxay waxa soo jiidashada ugu fiican leh xagga jannada?

11 • Dambiga siduu ku soo galay adduunka?

12 • RABBIGA muxuu sheegay inuu ku dhaci doono, hadduu nin cuno mirta ku taala geedka aqoonta wanaagga iyo xummaanta? Shayddaanka muxuu sheegay inuu ku dhaci doono?

13 • Dambi siduu u soo galay reerka insaanka?

14 • Waa maxay natiijada ugu horreeysa markuu qofka dambaabo? Markay Aadan iyo Xaawa dambaabeen, sidee buu dambigu sharaftooda ugu baddalay ceeb?

15 • Sidee Aadan iyo Xaawa u dhinteen isla maalintii ay dambaabeen? Siday ku ahaayeen sida laan jabtay? (Eeg bogga 144.)

16 • Sheeg siyaabaha qaarkood siduu habaarka dambigu u halleeyay abuuritaanka asalka ah.

17 • Maxay kula tahay Ilaah qorshehiisa qarsoodiga ah oo ku jiro Badbaadiyaha ahaan doona Farcan naageed (inuu leeyahay hooyo insaan ah, laakiin ma laha aabbe insaan ah)?

18 • Muxuu Ilaah sameeyay inuu ku daboolo Aadan iyo Xaawa dambigooda iyo ceebtooda? Ilaah siduu u tusay iyaga inuu yahay Ilaah caddaalad ah, naxariis leh, oo nimco leh?

19 • Muxuu Ilaah Aadan iyo Xaawa uga saaray beerta Ceeden?

20 • Sidee bay Aadan iyo Xaawa dambigooda ugu daarteen carruurtooda? Sidee bay noo gaarsiiyeen anaga iyo reeraheenna? (Eeg bogga 145.)

21 • Wan noocee ayuu Ilaah aqbali doonaa inuu u dhinto dambiilaha baddalkiisa?

22 • Kafaaraggud macnahiisa waa maxay? Ilaah muxuu ugu baahnayay kafaaraggud dhimasho leh?

23 • Ilaah muxuu ku sameeyay Haabiil dambigiisa? Maxaa ka qaldanay Qaabiil qurbaankiisa?

24 • Toobadkeentu waa maxay? Ilaah muxuu rabay Qaabiil inuu sameeyo? Qaabiil muxuu sameeyay?

25 • Muxuu na barayaa daadkii adduunka oo dhan qabsaday waqtiga Nuux ee ku saabsanaa samirka iyo xukunka Ilaah?

26 • Waa maxay waxa ugu horreeyay ee ay Nuux iyo reerkiisa sameeyeen, markay ka soo baxeen doonta ballaarnayd?

27 • Sidee munnaaradda Baabel ay noogu muujinaysaa diin been ah?

28 • Waa maxay labada ballamood ee waawayn uu ka qaaday RABBIGA Ibraahim, hadduu aammino oona raaco RABBIGA?

29 • Ilaah muxuu u cafiyay Ibraahim iyo Saarah dambiyadooda oo u ku sheegay inay xaqyihiin?

30 • Maxay ahayd su'aasha uu wiilka Ibraahim waydiiyay aabbihiis, markay ku socdeen buurta allabariga?

31 • Ilaah wuxuu ku ballanqaaday inuu ka dhigo Isxaaq aabbaha quruun cusub. Maadaama Ibraahim ogaa inuu Ilaah been sheegi karin, muxuu ku fikiray Ibraahim inuu Ilaah sameeyn doono, markuu ku gowraco Isxaaq meesha allabariga dushiisa?

32 • Ibraahim muxuu ugu magacaabay buurta RABBIGA siin doonaa? Wanka miyuu u dhintay Ibraahim wiilkiisa baddalkiisa maalintaas?

33 • RABBIGA siduu u fuliyay labada ballamood ee waawayn oo uu ka qaaday Ibraahim?

34 • Haddaan isku dayno in badan inaan addeecno Ilaah amaradiisa, miyaan gaari karnaa heer aan kula noolaano Ilaah samada? Sidee bay Tobankii Amar u yihiin sida muraayad? Siday Amaradaas noo tusaan inaan u baahan nahay Badbaadiye?

35 • Maxay tahay sababta ay xoolaha la gowraco u qaadi karin daynta dambiga ee dunida?

36 • Ka xulo hal waxyi qoraalka oo sheeg siduu u tilmaamay Badbaadiyaha imaanaya.

## SU'AALAHA NAQTIINKA DHACDADA • QAYBTA 2 • AXDIGA CUSUB

37 • Ilaah muxuu u isticmaalay afar qof (baddalka hal qof keliya) inuu qoro qisada Injiilka ku saabsan Ciise?

38 • Malaa'ig Jibriil muxuu ugu yeeray Ciise Wiilka Ilaah?

39 • Macnaha magaca Ciise waa maxay?

40 • Waa maxay shayga ku soo jiitay ee ku jira qisada dhalashada Ciise?

41 • Malaa'igaha waxay u sheegeen arijirrada: "Waxaa idinku dhashay Badbaadiye oo ah Masiixa Rabbiga ah." Maxay arijirada ugu farxeen inay maqlaan warkan?

42 • Miyay ahayd sax inay nimankii xigmadda lahaa caabudaan cunugga la yiraahdo Ciise? Haah ama maya? Sababta waa maxay?

43 • Sidee buu Ciise uga duwanaa carruurta kale?

44 • Sidee nebi Yooxanaa farriintiisa uga duwanayd farriimaha nebiyada ka horreeyay oo dhan? Maxay kula tahay sababta uu Yooxanaa Ciise farta ugu taagay oo u yiri: "Bal eega Wanka Ilaah ee dambiga dunida qaadaya"?

45 • Bal dib u eeg mar kale dhacdadan oo sheeg wax aad ka garatay Qorniinka oo ku saabsan Ruuxa Ilaah, Wiilka Ilaah, iyo Aabbaha samada ku jiro.

46 • Shayddaanka muxuu u iskugu dayay inuu Ciise dambaajiyo?

47 • Markuu Ciise ka akhriyay haragga nebi Ishacyaah, wuxuu yiri: "Maanta Qorniinkan dhegihiinnu maqlay waa rumoobay!" Maxaad umalaynaysa inay tahay sababta ay taasi uga xanaajiysay deriskiisa?

48 • Sidee buu Ciise u ahaa Gacanta Ilaah ee joogta dunida?
Ruuxaanta xunxun maxay uga cabsadeen Ciise?

49 • Kaddib markuu Ciise amray dabaysha, "Aammus oo xasil!" xertiisa waxay dhaheen, "Haddaba yuu yahay kan xataa dabaysha iyo badduba yeelaan?" Adiga maxay kula tahay Ciise inuu yahay?

50 • Maxay tahay sababta ay taliyaasha diineed ugu eedeeyeen Ciise inuu caayay Ilaah?

51 • Ciise wuxuu yiri, "Anigu waxaan ahay sarakicidda iyo nolosha. Kii i rumaystaa, inkastoo uu dhinto, wuu noolaan doonaa." Sidee baan ku garanaynaa inuu runta ka hadlay?

52 • Ciise muxuu kula hadlay dadka oo soo noqdeen maalintii ku xigtay, kuwaasoo rabeen in la siiyo cunto kale?

53 • Ku soo celi dhacdadan oona sheeg hal wax oo Ciise yiri oona adiga ka yaabiyay.

54 • Nebiyada waxay ugu yeereen Masiixa "qorraxdii xaqnimada."
Ciise wuxuu iskuugu yeeray naftiisa "nuurka dunida."
Sidee buu Ciise kan ah Masiixa uga duwanay nebiyada?

55 • Xerta maxay ku fikirayeen Ciise inuu sameeyo?
Masiixa muxuu u imaaday inuu sameeyo?

56 • Maxay ahayd sababta uu Rabbi Ciise ugu imaaday dameer hooseya Yeruusaalem baddalkuu ku imaan ahaa faras wayn oo ka mid ah kuwa dagaalada?

57 • Maxay tahay sababta ay taliyaasha diineed u khiyaani kari waayeen inay Ciise ka sheegsiiyaan wax qaldan?

58 • Maxay wadaadkii sare iyo taliyaashii Yuhuudda u dhaheen Ciise ha la dilo?

59 • Muxuu Bilaatos ugu xukumay Ciise dhimasho?

60 • Askarta waxay Ciise madaxa xoog ugu galiyeen taaj qodxo. Qodxaha maxay na xasuusinayaan?

61 • Sidee waxyihii Ibraahim loogu fuliyay Ciise?
Qiimo intee la'eg ayaad ku leedahay Ilaah?

62 • Laba tuugo ah ayaa iskutallaab lagu qodbay Ciise agtiisa. Maanta mid wuxuu ku jiraa naarta (weligiisa wuxuu ka fogaanayaa Rabbiga) oo midka kalena wuxuu ku jira jannada (weligiisna wuxuu la jirayaa Rabbiga). Maxaa kale duway labadooda?

63 • Markuu Rabbi Ciise uu ku surnay iskutallaabta mugdiga dhexdiisa, maxay ahayd hawsha uu Aabbaha u xilsaaray saaray Isaga? Muxuu Ciise u yiri, "waa dhammaatay"? Muxuu Ilaah u dillaaciyay daaha macbudka?

64 • Xerta miyay xasuusteen Ciise ballankiisa oo ku saabsan inuu soo sarakaco mar kale? Miyay taliyaasha diineed oo xumeeyay xasuusteen ballankiisa?

65 • Maxay naagaha arkeen markay imaadeen xabaasha axadda aroortii? Maxay sameeyeen taliyaasha diineed ku saabsan xabaashii eberka ahayd? Haddaan gebi ahaan aammino Ciise oo Wankii Ilaah ah, kaasoo u dhintay dambiyadayda oona ka soo sarakacay, maxaanan ugu baahnayn inaan ka cabsado dhimasho?

66 • Muxuu Rabbi Ciise ugu sheegay labadii musaafiriin oo u socdeen Emmaus inay ahaayeen nacasiin?

67 • Markuu Badbaadiyaha sarakacay oo isku muujiyay qolka, Toomas wuxuu ku dhahay Isaga, "Rabbigay iyo Ilaahayow!" Miyuu Toomas saxsanaa ama qaldanaa inuu Ciise ugu yeero Rabbigiisa iyo Ilaahiisa? Sabab?

68 • Muxuu Ciise u sheegay xertiisa inay sameeyaan, markuu ku noqday samada?

69 • Yaa waaye Boqorka ammaanta? Muxuu Isaga kula yahay?

70 • Markuu Boqorka soo noqdo, miyaad farxi doontaa ama miyaad cabsani doontaa? Sabab?

# Saldhigga Qoraallada muhiimka ah ee la soo xigtay

**Saldhigga Dhacdooyinka:** [1]Intii lagu jiray *Alice in Wonderland* waxaa lagu turjumay ugu yaraan 200 oo luqadooyin, *Kitaabka Quduuska ah* oo dhan ama ilaa xad waxaa lagu turjumay 2,500 luqadooyin in ka badan.

[2]Kitaabka Quduuska ah waxaa laga xaqiijiyay cilmiga barashada dadkii hore iyo dhaqankooda, taariikhda adduuneed ah, waxyi oo la fuliyay, iyo israacsanaanshada kaamilka ah qiso qaybo kala duwan ku qornayd labataan qarni in aad ugu dhaw.

**Dhacdada 2:** [3]Boqorka ma aha keliya Abuuraha iyo Quudiyaha adduunkiisa, laakiin Isaga wuxuu yahay Qoraaga iyo Ilaaliyaha Kitaabkiisa xataa. Qoraallada haragga Badda Dhimatay waxay xaqiijinayaan Qorniinka Axdigii Hore oo maanta ah inay yihiin isku Qorniinka oo jiray waqtigii Ciise ka hor. Qorniinka Axdiga Cusub waxaa laga caddeeyay kumaankun oo gacan-ku-qorayaal oo qadiimi ah, in badan degan qarniyaasha hore Ciise oo kaddib. Sheegashada caanka ah inay qoraallada asalka ah in la baddalay oona ay baddaleen niman erayada ma laha caddayn xaqiiqda ah. Bal ka eeg *Ilaah keliya iyo Kitaab keliya*, cutubka 3. www.one-god-one-message.com

**Dhacdada 5:** [4]Qummaati u eegidda tilmaamaha Ilaah sida looga arkayo lixda maalmood ee abuurista, bal ka eeg *Ilaah keliya iyo Kitaab keliya*, cutubka 8.

**Dhacdada 6:** [5]Maadaama Ilaah HAL uu yahay, muxuu u dhahayaa, "Aan nin inoo eg ka samayno araggeenna…"? Jawaabta waxaa ku dhaggan midnimadiisa in la fahmo ay adagtahay. Qoraallada erayga Cibraaniyada oo "Ilaah" waa *Elohim* oo yahay eray wadar ah. Erayga "hal" oo oraaha "Ilaah waa hal" waa *echad* oo muujinaya hal oo isku midnimadiisa. Daa'imka intuu abuurin malaa'igaha iyo nin ka hor, Ilaah wuxuu ku faraxsanay wehelnimadiisa naftiisa—Eraygiisa/Wiilkiisa iyo Ruuxa Quduuska. "Bal eeg, Ilaah waa weyn yahay, oo annana isaga ma aannu naqaan!" (Nebi Ayuub 36:26)

**Dhacdada 7:** [6]Isla waxayaalaha kiimikaal oo jirka laga sameeyay kulli waxay ku jiraan dunida busteeda engegan. Runtan ka hor ma laga ogaani jirin cilmiga ilaa waqtiga hadda ah. Intii lagu jiray aqoonyahaanta ayay ku salaynayaan aqoonta ogaanshada iyo *aragtida* (fikirta ninka), aqoonta oo kuwaani oo ku rumaysanayaan Kitaabka Quduuska ah ayna ku salaysantahay ogaanshada iyo *muujinta* (Ilaah Eraygiisa).

**Dhacdada 11:** [7]Waxyaalo dheeraad ah oo ku saabsan asalka Shayddaanka bal ka eeg *Ilaah keliya iyo Kitaab keliya*, cutubka 11.

**Dhacdada 16:** [8]Hadday Badda Dabka, meesha oo ciqaabta daa'imka ah, u muuqan lahayn caddaalad ama suurtagal caqligeenna dartiisa, laga yaabaa weli anaga ma fahmaynin quduusnimada Ilaah oo dhammaystiran, ninka dabcigiisa daa'imka ah, culayska dambiga, iyo fikrad guud daa'imka. Isla eraygan *daa'imka* wuxuu gaari waayay awooddeenna caqliga ah, waayo hadda waxaan ku soconaa waqti. Daa'imka waqti maleh. Ilaaha abuuray waqti ma lagu xirin isaga. (2 Butros 3:8-9). Daa'imka ma laga sameeynin sanadooyin. Bal ka fikir sida *imminka daa'imka ah*. Isku waqtigii markay dambiileyaal soo galayaan boqortooyadaas oo aan lahayn baxsasho, waxay fahmi doonaan suurtagalnimadeeda rasmiga ah.

**Dhacdada 17:** [9]Madaxfuro (ama badbaadin) macnaheedu waa *dib-u-bixiyo qiimaha loo baahnaa*. Cutubka 18 *Ilaah keliya iyo Kitaab keliya* qoraaga ayaa tan ku sharaxayo qiso ku saabsan carruurnimadiisa:

Sida wiil ku koray Kalifoornia, waxaan lahaa eey yar. Waan quudinayay, waan dhaqaaleenayay, waana la cayaarayay iyada. Meel kasta way ii racaysay, wayna farxaysay markaan ka soo noqday dugsiga oo guriga imaado. Laakiin waxay lahayd cillad. Marmar waxay war-wareegaysay xaafadda, inkastoo mar kasta ay soo noqonaysay. Ilaa maalin dambe. Markaan ka soo noqday dugsiga, eeydayda i ma soo dhowaynin. Waqtiga hurdada weli meel laga ma helin. Maalinta ku xigtay aabbahayga wuxuu igula taliyay inaan waco guriga xannaanada xayawaanka maxalliga ah, meel oo leedahay bisadooyin iyo eeyo baxsi ah waqtiga xaddidan. Xayawaanno oo mulkiile la'aan oo dhan waa la dilay.

Waxaan wacay xannaanada xayawaanka. Haah, waxay lahaayeen eey yar sida tilmaantayda oo kale. Qofka oo qabta eeyga oo magaalada wuxuu qabsaday iyada. Eeydayda maysan is badbaadin karin iyada. Hadduu qof u imaan lahayn inuu badbaadiyo iyada, waa la dili lahay.

Waxaan tegay meesha xannaanada xayawaanka. Waxaan soo ceshanayay eeydayda! Laakiin qof haya mas'uuliyad miiska dhinaca muhiimka ah wuxuu ii sheegay haddaan rabay iyada mar labaadna waa inaan bixiyo ciqaab. Sharciga ma oggolaanayo inuu eey ku wareegsado waddada.

Waxaan bixiyay qiimaha oo loo baahnaa iyo eeydayda waa la sii dayay. Aad bay u farxsanayd inay joogin qafaskaas aad u xun inayna la joogtay mar labaad midka oo ilaalinaya iyada! Iyada waa la badbaadiyay.

Khibraddayda wiilnimada oo dib-u-bixiyay eeydayda caasiga ah ayay siinaysaa fahan yar xaaladdeenna. Maadaama aan nahay dambiileyaal caasi ah ee la xukumay, ma nahayn jid inaan ka badbaadno ciqaabta dambigeenna, iyo sharciga dambiga iyo dhimashada. Waxaan u baahan nahay Badbaadiye oo bixin kara qiimaha madaxfurashada.

**Dhacdada 23:** [10]Waa suurtagal in Ilaah tusiyay aqbalaaddiisa Haabiil qurbaankiisa in uu sameeyo sida maalmihii nebiyada Muse, Sulaymaan, iyo Eliiyaah: "Oo Rabbiga hortiisa waxaa ka yimid dab, oo meesha allabariga dusheedii ayuu ku baabba'saday qurbaankii la gubayay iyo baruurtii." (Laawiyiintii 9:24; 2 Taariikhdii 7:1; 1 Boqorradii 18:38).

**Dhacdooyin 30 & 61:** [11]Moriyaah macnahiisa waa *Midka RABBIGA doortay*. Waxaa waaye gobolka Yeruusaalem laga dhisay waqtiga dambe. Maanta, Buur Moriyaah waa rugta oo Macbudka Sulaymaan ahaan jiray (2 Taariikhdii 3:1). Aad ugama foga, isku silsiladda buurta "meeshii la yidhaahda dhakada" (Luukos 23:33).

**Dhacdada 36:** [12]Waxyi la fuliyay wuxuu gooni uga dhigaa Kitaabka Quduuska buugaga kale oo dhan oo ku jiraan dunida. Nebiyada loo waxyooday dhacdooyinka mustaqbalka ah, oo la socda fulintooda taariikhda dhexdeeda, waa hal jid sidaa Ilaah u xaqijiiyay Farriintiisa. Ilaah keliya ayaa ogaysiini kara "bilowga waxaan sheegaa ugudambaysta, oo waqtiga hore waxaan sii sheegaa waxyaalo weli la samayn" (Ishacyaah 46:10). Ciise Masiixa wuxuu ku yiri, "Hadda dabadeed waxaas ayaan idiin sheegayaa intaanay dhicin, in markay dhacaan aad rumaysataan inaan ahay isagii" (Yooxanaa 13:19). Bal ka eeg *Ilaah keliya iyo Kitaab keliya*, cutubka 5.

**Dhacdada 41:** [13]Kristoos waa eray Giriigga oo erayga Cibraaniyada oo macnahiisa yahay *Masiixa*, oo laga wado *Kan La Doortay*.

[14]Taariikhda ku qoran dhacdooyin taariikhda waxay ku salaysanyihiin sanadka uu Ciise Masiix dhashay. Tusaale ahaan, nebi Ibraahim wuxuu dhashay 2000 CK (2,000 sanadood dhalashada *Ciise ka hor*). Buuggan (*Boqorka Ammaanta*) waxaa la qoray AD 2011 (in ka badan 2,000 sanadood dhalashada *Ciise kaddib*). AD waa eray gaaban *Anno Domini*, Latin macnaha waa *sanadka Rabbigeenna*. Maanta dad badan waxay isticmaalayaan Waqtigii Hore oo Caadiga ah iyo Waqtigii Caadiga ah inay ka saaraan Ciise Masiix soogaabinta erayga, laakiin ujeeddada oo kala saarinta oo taariikhda weli waa dhalashadii Ciise Masiix.

**Dhacdada 43:** [15]"'Kanu miyaanu ahayn nijaarkii, ina Maryan, kii walaal u yahay Yacquub, iyo Yoosee, iyo Yuudas, iyo Simoon; gabdhihii walaalihiis ahaana miyaanay inala wada joogin? Wayna ka xumaadeen." (Markoos 6:3). Maadaama uu Yuusuf ahayn Ciise Aabbihiisa dhiig ahaan ula xariira, Ciise wuxuu ahaa qaraabo walaalahiisa wiil iyo gabdho ah xagga hooyadiisa dhinaceeda keliya. Ciise wuxuu ahaa Wiilka Ilaah iyo Wiilka Aadanaha. Bal eeg qoraalka ugu dambeeya 19 (Dhacdada 52).

**Dhacdooyin 43 & 58:** [16]Sannad kasta oo Iidda Kormaridda ah, dadka Yuhuudah waxay xasuusanayeen dhacdo oo dhacay waqtigii Muuse markay ahaayeen addoommadii dalka Masar. Dadkii isirkoodii waxay gowraceen wanan, waxayna marinayeen dhiigga iridda korkeeda waayo Ilaah wuxuu yiri, "Oo markii aan dhiigga arko, waan iska kiin kor mari doonaa" (Baxniintii 12:13). Saqda-dhexe RABBIGA wuxuu dilay wiilka curadka ah oo kasta guri kasta oo aan ku jirin dhiigga wanka iridda korkeeda. Ilaah wuxuu isticmaalay dhacdan inuu ka badbaadiyo dadkiisa 400 sanadooyin oo addoonnimada ah.

**Dhacdada 45:** [17]Dhinacan xagga samada, weligeed ma fahmi doonaa Ilaah saddex-midnimadiisa oo dhan. Si kastaba, wuxuu yahay ILAAH. Si kastaba hal wax anaga oo dhan ayaan fahmaynaa waxaa waaye fikrad guud oo uu saddex qayb yahay, isla mar ahaantaas weli inuu mid yahay.

# Saldhigga Qoraallada muhiimka ah ee la soo xigtay

Dunideenna waxaa buuxiyay saddex-laakiin-hal midnimada: WAQTI: ka kooban waqtiga hore, waqtiga hadda ah, iyo waqtiga mustaqbalka ah. HAWADA SARE: cabbir dherer, ballac, dheerer. BINI-AADANKA: ruux, naf, jir. QORRAXDEENNA waxay tahay saddex-midnimada xataa. Waxaan ugu yeeraynaa jirka laga meeleeyay *qorraxda*, iftiinkeeda *qorraxda*, iyo kulaylkeeda *qorraxda*, laakiin qorraxda waa *hal*. Sidaa oo kale RABBIGA inuu yahay Aabbaha Daa'imka ah, Wiilka Daa'imka ah, iyo Ruuxa Quduuska Daa'imka ah. Sida iftiinka iyo kulaylka ka bilaabayaan qorraxda, sida oo kale, Wiilka (Erayga) Ilaah iyo Ruuxa Quduuska waxay ka bilaabanayaan Ilaah, isla mar ahaantaas "RABBIGA Ilaaheenna ahu waa Rabbi keliya" (Sharciga Kunoqashadiisa 6:4). Xataa bal eeg dhacdada 4 iyo qoraalka ugu dambeeya 5 (dhacdada 6). Wax badan oo ku saabsan Ilaah midnimadiisa oo in la fahmo ay adagtahay iyo Ciise dabcigiisa insaanka ah iyo awoodda Ilaah ka akhri *Ilaah keliya iyo Kitaab keliya*, cutubooyin 9 iyo 17. Uguba sii fiicane, akhri Injiilka Yooxanaa.

**Dhacdada 47:** [18]Masiixa macnahiisa waxaa waaye *Kan La Doortay* ama, si eray-eray, *Kan La Subkay*. Waqtigii qadiimiga ahaa xagga Bariga ah, markuu boqorka cusub boqornimada loo caleemasaaray, wadaad ama nebi ayaa ku shubayay saliid khaas ah oo subkid ah madaxiisa inuu tuso inuu ahaado taliyaha cusub boqortooyada dhexdeeda. Ciise ninna ma subkaynin, laakiin waxaa subkayay Ruuxa Quduuska naftiisa (bal eeg dhacdada 45).

**Dhacdada 52:** [19]Mar badan Ciise wuxuu xusay Naftiisa inuu yahay Wiilka Aadanaha. Si weligeed ah wuxuu ahaan jiray Wiilka Ilaah, laakiin wuxuu noqday Wiilka Aadanaha. Xagga Wiilka Ilaah wuxuu yahay Erayga oo la jiray Ilaah bilowgii (Yooxanaa 1:2; Bilowgii 1:3), laakiin xagga Wiilka Aadanaha wuxuu yahay Erayga oo jir buu noqday, Kan Ilaaha Doortay inuu yahay Badbaadiyaha-Xaakinka-Boqorka dunida korkeeda (Yooxanaa 1:14; Daanyeel 7:13-14).

**Dhacdada 56:** [20]Wadaaddadii sare waxay ka tirsanayeen koox diineed oo Yuhuudah ah oo xamaasad leh. Qaarka iyaga ka mid ah way tukanayeen lix mar maalin kasta, waxay soomayeen saddex bilood sanad kasta, iyo waxay siiyeen sadaqo oo toban boqolkiiba xagga mushaarkooda dad masakiin ah (Luukos 18:9-14). Laakiin waxyaalahaas oo dhan waxay ahaayeen sunnah bilaash ah. Waxay ahaayeen dad diineed, laakiin ma garanaynin mana jecelaynin Ilaah.

**Dhacdada 68:** [21]Xagga xerta Rabbiga Ciise Masiix baabtiiska waa jid ay ku dhawaaqaan go'aankooda inay raacsanyihiin Isaga. Inuu dhex-maquuro biyaha ma ka qaadin dambiga. Waxay na tusaysaa qofka aqoonsigiisa Ciise xagga dhimashada, aaska iyo sarakacidda. Baabtiiska biyaha (biyo-geliska) wuxuu yahay mataal lagu caddeenayo dhammaadka nolosha hore iyo bilowga nolol cusub oo ku jirta Masiixa.

[22]Maalmo yar kaddib markuu Wiilka Ilaah kor u baxay samada, Ruuxa Quduuska wuxuu hoos u imaaday inuu ku noolaado qalbiga nin kasta, naag kasta, iyo cunug kasta oo rumaysanaya Injiilka. Falimaha Rasuullada Axdiga Cusub waxaa ku qoran qiso xiiso leh siduu Ruuxa Quduusku u siiyay xerta awoodda inay muujiyaan dabciga Ciise iyo inay faafiyaan farriintiisa quruumaha. Ilaah jidkiisa oo badbaadinta ma is baddalin. Haddaad go'aansatid inaad rumaysato farriintiisa—qiratid inaad tahay dambiile oo ka fog Ilaaha quduuska ah iyo weliba inaad iska badbaadin karin ciqaabta dambiga, Ciise Masiixna inuu soo qaado ciqaabtaada xagga iskutallaabta, in la aasay, iyo inuu ka sarakacay kuwii dhintay—markaas adigana waxaad heli doontaa hadiyadda Ruuxa Quduuska. Macnahan waxaa waaye inuu Boqorka adduunka Naftiisa imaado inuu ku noolaado qalbigaaga. Wuxuu noqon doonaa Sayidkaaga cusub, Aabbahaaga, iyo Saaxiibkaaga. Qorniinka wuxuu leeyahay, "Oo weliba idinku isagaad ku maqasheen ereyga runta ah, kaas oo ah injiilka badbaadadiinna, oo weliba idinku markii aad rumaysateen ayaa laydinku shaabadeeyey Ruuxa Quduuska ah oo uu ballanqaaday, oo ah carbuuntii dhaxalkeenna xagga furashada hantida Ilaah in la ammaano cisadiisa" (Efesos 1:13-14). Ilaah waa Boqor wayn oo la yaab leh, wuxuuna samada ku lahaan doonaa reer ballaaran oo daa'im ah. Ma joogi doontaa halkaas?

## Ilaah keliya iyo Kitaab keliya


# Qummaati u dhex galid



Sida BOQORKA AMMAANTA, ILAAH KELIYA IYO KITAAB KELIYA wuxuu kula galaya safar uu ku qataan Qorniinnada nebiyada, laakiin si qoto dheer ah ayuu is barbardhigayaa Kitaabka Quduuska ah farriintiisa iyo aragtida dunida kale. Su'aalo ayaana lagaga jawaabin buugga BOQORKA AMMAANTA dhexdiisa (sababta oo ah wax xaddidaadda awgeed iyo dhagaystayaasha day'arta), waxaana lagaga jawaabay ILAAH KELIYA IYO KITAAB KELIYA dhexdiisa.

Meesha uu BOQORKA AMMAANTA qofka ku qaadanayo muddo saddex saac aan ka badnayn inuu ku akhriyo cod dheer, ILAAH KELIYA IYO KITAAB KELIYA wuxuu u baahan yahay qiyaastii toban iyo laba saac.

Isku xirnaanta khibrad shaqsiyeed, farriimo oo ka imaadeen shakileyaal, iyo si cusub u sheegidda qisadan marar badan la sheegay, buuggan wuxuu soo jeedinayaa hab oo dib loogaga fikirayo su'aalaha waawayn ee nolosha.




- Qoraaga: P. D. Bramsen
- Sharraxaadda: D. C. Bramsen
- Shirkadda daabacadda: ROCK International
- 30 sawiro inka badan.
- 150-su'aalo oo haga wadahadalka.
- 271 saldhigga Qoraallada laga soo xigtay
- Soo dejisasho bilaash ah: Af Carabi, Af Albania, Af Shines, Af Ingiriis, Af Bershiyaanka, Af Faransiis, Af Ruush, Af Isbaanish, Af Turki, Luqadda Bakistaan, Luqadda Indonesia …

www.rockintl.org/rock-document/ilaah-keliya-iyo-kitaab-keliya-one-god-one-message-somali

*Buuggan wuxuu yahay il wax soo saar oo ku salaysan runta; habka qoraalka waa hab gaar ah; waxaa ka buuxa faa'iidada insaanka.*

— William MacDonald, qoraaga oo Mu'minka faallada Kitaabka Quduuska ah iyo 80 buug kale

*Soo koobitaanka oo farriinta waxay xaqiijinayaan akhriyaha inuu qoraaga ka cararin su'aalaha adag.*

— Vaughan, arday oo barta dhakhtarnimada oo ka yimid Koofurta Afrika

*Akhriska waa sida qiso sirdoon, waana sida ay dhabtii tahay.*

— Theo, akhriste oo ka yimid Kanada

*Markaan akhriyay buuggan kadib, macaqulgalka Kitaabka Quduuska ah waa wax dhedhen leh oo maskaxda xalimayso. Waxay igu abuurtay xiiso inaan akhriyo Kitaabka Quduuska.*

— Mohammed, wariyaha Bariga Dhexe

**www.one-god-one-message.com**

ROCK International waxay soo gudbinaysaa

# BOQORKA AMMAANTA FILINKA

Kaasoo lagu soo gudbiyay eray eray laga soo qaaday buugga la yiraahdo Boqorka AMMAANTA oona ku qoran luuqado badan

**1 SHEEKO OO 2 QAYBOOD AH. 70 DHACDOOYIN OO 15 XALQADOOD AH.**

**Qaybta 1: Axdigii Hore: Boqorku Wuxuu Sii Sheegayaa Qorshehiisa** 1:47

Hordhaca: *Dhacdooyinka 1-3* ~ 10:40
2. Abuuraha iyo Abuurkiisa: *Dhacdooyinka 4-9* ~ 19:04
3. Galitaanka Sharka: *Dhacdooyinka 10-15* ~ 15:10
4. Habarka, dambiga iyo Ilaahay ballantiisa: *Dhacdooyinka 16-19* ~ 11:57
5. Waddada Allabariga: *Dhacdooyinka 20-24* ~ 14:58
6. Binu-aadanka caasinimadooda iyo Ilaahay: Daacadnimadiisa *25-27* ~ 9:05
7. Ilaahay qorshihiisa wuu hormaraya: *Dhacdooyinka 28-32* ~ 14:04
8. Sharciga iyo Nebiyada *Dhacdooyinka 33-36* ~ 12:20

**Qaybta 2: Axdiga Cusub: Boqorka Wuxuu Fulinayaa Qorshehiisa** 1:55

9. Boqorka Galitaankiisa: *Dhacdooyinka 37-42* ~ 20:16
10. Boqorka Dabeecaddiisa: *Dhacdooyinka 43-47* ~ 15:32
11. Boqorka Xukunkiisa: *Dhacdooyinka 48-51* ~ 14:02
12. Boqorka Himiladiisa: *Dhacdooyinka 52-56* ~ 15:24
13. Boqorka Is hoosaysiintiisa: *Dhacdooyinka 57-61* ~ 14:50
14. Boqorka Naf-huriddiisa & Guushiisa *Dhacdooyinka 62-65* ~ 13:53
15. Boqorka Injiilkiisa & Ammaantiisa *Dhacdooyinka 66-70* ~ 18:26


*Siduu u wanaagsan yahay Ilaaheennu* (Oo lagu heesay af Carabi*)* ~ 2:45

***"Filinku wuxuu wax u sharaxayaa si aan fahmi karo." – Eli, 7***

***"Dareenkayga oo dhan ayaa u dareemay sheekadan sidii inaan meesha joogay oo kale." Lydia, 21***

***"Wuxuu u sharaxayaa qayb ka mida muujinyada adduunka ugu waawayn si fudud oo haddana awood leh!" Dick, 74***

MANHAJKA BUUGGA
**BOQORKA AMMAANTA**



BUUGGA KALARAYNTA | HAGID WAXBARASHO OO MUUQAAL AH | FILIN LUUQADO BADAN LAGU TURJUMAY | BUUG SAWIRO LEH

**www.king-of-glory.com**